2019-20

WESTERVILLE CITY SCHOOL DISTRICT STUDENT HANDBOOK SOMALI

SHAQAALAHA DAGMADA 8

SIYAASADAHA, HABABKA IYO BROGRAAMYADA DAGMADA 9

XEERKA ASLUUBTA ARDAYGA 9

Sharciyada Asluubta Ardayga 17

1. Goynta Fasalka 17

2. Jebinta Imaashada aan ahayn Goynta Fasalka 17

3. Dagaalka/Gacan Qaadka 17

4. Jejebinta/Khasaarada ama Burburinta Hantida Dugsiga/Qofka 17

5. Tuugonimada/Xatooyada/U Diididda Hantida Qofka ama Hantida Dugsiga 18

6. Isticmaal, Haysashada, iibinta ama Qaybinta Hubka 18

7. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Hub Halis ah Balse Aan Ahayn Qori ama Waxyaabaha Qarxa, Dab, ama Gaaska Sunta 19

8. Adeegsiga, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Waxyaabaha Burburinta, kana mid ah Waxyaabaha Qarxa, Dabka ama Sunta Gaaska 19

9. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Maadooyinka Tubaakada 19

10. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Cabbitaanka Qamrada Lagu Sakhraamo 20

11. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Mukhadaraadka Marka Laga Reebo Tubaakada ama Qamrada 20

12. Muujinta Jeceelka Jirka 20

13. Cadaabid 20

14. Digniinta Beenta, Hanjabaadda Bambada, Carqaladeynta Dugsiga, Dabka/Dabka aan la Fasixin iyo/ama Haysashada Waxyaabaha Lagu Shiddo Dabka 21

15. Labiska aan Habboneyn 21

16. Qalabka Isgaarsiinta aan Fiilada Lahayn (Wireless Communications Devices) (WCD)/Madadaalada iyo Isticmaalka Farsamada 22

17. Khayaanada/Been Abuurka Warqadaha iyo/ama Iska Dhigidda Qof Kale 22

18. Dabeecadda Caasinimada/Carqaladeynta iyo/ama Isticmaalka Af Xumada 22

19. Gardareysi /Kadeedka/Cabsi Gelinta/Jujuubka 23

20. Waxyaabaha Qoriga Loo Ekeysiiyay 40

21. Dhaqanka Jinsiga aan La Soo Dhaweynin/Kadeedka Jinsiga/Dagaalka Ballanka 40

22. Dhaawaca Culus ee soo Gaara Jirka 40

23. Meelaha Aan La Geli Karin 40

24. Khamaarka 41

25. Ka Dhigidda Badeeco 41

26. Jebinta Sharciyada Dugsiga 41

27. Jebinta Sharciyada Baska 41

28. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta, ama Qeybinta Cayaaraha Dabka 41

29. Weerarka 41

30. Asluubta Aqoonta/Aadaab Darrada.....41

Raadomta/La Wareegidda.....42

Ciqaabta ka Dambeyso Jebinta Sharciyada Dugsiga.....42

Dishibiliinka Ardayda Itaalka Darran.....42

Ciqaabta Guddiga Sifeysay.....43
1. Tubaakada.....43
2. Mukhadaraadka marka laga reebo Tubaakada.....43

Ciqaabta Dugsiga.....44
1. Adeegga Bulshada.....44
2. Xabsiga Ardayda.....44
3. Dishibiliinka Dugsiga Kaddib.....44
4. Ka Saaridda Degdegga.....44
5. Luminta Axsaanka Hawsha Dheeraadka Manhajka.....44
6. Talada Fargelinta Waalidka.....45
7. Xarunta Waxbarashada Kale.....45
8. Ka-Joojinta.....45
9. Ka-Saaridda.....45

Jebinta Sharciyada Dugsiga/Talada Ka-Saaridda.....46

Ka Saaridda Muddo Hal Sanno Kalendarka.....46
Qoriga.....46
Middiyada.....46
Falalka Waxyeelada Culus Gaarsiiya Dadka ama Hantida.....46
Cabsi Gelinta Bambada.....47
Ka-Saaridda Joogtada ah.....47
Daruufaha Gaarka Ardayda Itaalka Darran.....47

Agagaarka Ammaanka Dugsiga.....48
1. Hubka Halista.....48
2. Walaaltinimada/Bulshada Gabdhaha/Hawlaha Burcadnimada.....48

Gaadiidka Dugsiga.....49
Dabeecadda Ardayga Inta la Saaran Yahay Basaska Dugsiga.....49
Mas'uuliyadda Saaran Ardayda.....49
Mas'uuliyadda Saaran Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha.....49
Sharciyada Amaanka Baska Dugsiga.....50
Ka-Joojinta/Ka-Saaridda Basaska Dugsiga.....50
Baddalaadda Gaadiidka ama Meesha loo Socdo.....51

CAAFIMAADKA ARDAYDENA 51
Dawooyinka – Siinta Dawooyinka Ardayda 51
Soo Koobidda Foomamka La Xariira Dawooyinka 52
Cudurka iyo Hababka Degdegga 53
Talaalka 53
Baaritaanka Tiibishada (TB) 54
Arrimaha Caafimaadka Ardayga ee soo Noqnoqda 54
Xaaladaha Leysku Daarto 54
Injirta Madaxa 54
Tababarka Guriga 55
Ceymiska Shilka Ardayga iyo Ceymiska Khasaarada La Geysto 55
Mideynta Maamulka Cayayaanka [Integrated Pest Management (IPM)] iyo Ogeysiinta 56
IMAASHADA DUGSIGA 56
Sifeynta Imaashada 56
Maqnaashada la fasaxay 56
Goynta Dugsiga 56
Goynta fasalka 56
Maqnaashada La Fasaxay 57
Xisaabinta Imaashada Ardayga (Caruurta Maqan iyo Kuwa Aan Soo Xaadirin) 58
Ka Daahidda Dugsiga iyo Rawaxaadda Hore 58
Shaqada Gadaal Laga Sameeyo 59
DAGGANAASHADA 59
Dugsiga la Tago 59
Ka Guuridda Dagmada 59
Dagganaashada iyo Ilaalinta Sharciga 60
Arrimaha Ardayga Aan Daganeyn 60
HAWLAHA GUUD 61
Keenista iyo Fariimaha 61
Ogeysiiska Duubidda Fiidiyowga Fasalka 61

Kormeerka Fiidiyowga iyo Kor Ka Eegidda Elatarooniga 61
Hababka Degdegga 61
Helitaanka Adeegga Raashinka iyo Dabeecadda Makhaayadda Qaxwadda 62
Diiwaanka Shaqada Ardayga, Kaararka Darajada 62
Lumay Lana Helay 63
Waxyaabaha Qofka Leeyahay 63
Xoolaha Guri Joogga iyo Xoolaha Jooga Dugsiga 63
Dhajinta Calaamadaha/Qeybinta Warqadaha 63
Diiwaanada Ardayga 63
Ogeysiiska Sannadka ee ku saabsan Diiwaanada Ardayga 64
Ogeysiiska Xuquuqda Sida Hoos Timaado Badbaadinta Baddaladda Xuquuqda Caruurta (PPRA) 67
Takoor La'aanta 68
Qorshooyinka 504 69
Sharciga Horumarinta Waxbarashada Dadka Itaalka Darran 2004 69
Ardayda Guri Laaweyaasha 69
Buugaagta/Buugaagta Maktabka/Qalabka 71
Dadka Soo Booqda Dugsiga/Fasalka - Dabagalka/Kor Ka Eegidda Dugsiga - Hababka 72
Brograamyada Iskaa Wax u Qabso 72
Ka Lug Yeelashada Waalidka 73
ADEEGYADA KHAASKA AH 82
Ardayda Barata Ingiriisiga (EL) 82
Adeegga Waxbarashada Hibada 82
Adeegga Caafimaadka Dugsiga 82
La Talinta iyo Taageerada Caafimaadka Madaxa 83
XuXKaalmada Faragelinta 83
Waxbarashada Ardayda Itaalka Darran 83

KA BIXIDDA SHABAKADA ARDAYGA/GELITAANKA INTERNETKA..... 83
FOOMKA KA BIXIDDA SHABAKADA/INTERNETKA ARDAYGA 85

WARQADDA HORUDHACA

Gacaliyeyaal Qoysaska Westerville,

Ku soo dhawow sannad dugsiyeedka 2019-20 iyo qeybta dugsiga hoose. Waxaan rajeyneynaa in aan la shaqeyno qoyskaada. Waan ku faraxsanahay in aad qeyb ka tahay qoyska dugsiyada Westerville. Waxaan ku kalsoonahay in tani ahaan doonto sannad lagu guuleysto oo xiiso kuu leh adiga iyo cunuggaada/caruurtaada.

Buuggaan waxaa laguu siiyay sida ilo kuu roon adiga, wuxuu ka jawaabi doonaa su'aalo badan oo caadi ah oo ku saabsan qeybtena iyo dagmadena. Waxaa loo qeybiyay labo qeybo sida siyaasadda iyo macluumaadka la xariira siyaasadaha u gaarka ah dhismooyinka dugsiga hoose iyo siyaasadda dagmada, hababka iyo brograamyada. Macluumaadka guud waxaa loogu talogalay in lagu gudbiyo waxa laga filaayo caafimaadka, ammaanka iyo fiyoobida dhamaan. Waxaan kaa codsaneynaa in aad waqti qaadatid si aad ula fiirisid cunugaada si isaga/iyada u fahamto sharciyadena iyo hababkena. Fadlan, waxaad buugga dhigtaa meel sugan, meel laga heli karo si loo tixraaco si fudud sannadka oo idil ama calaameyso meesha aad ku keydisid kombuyutarkaada.

Buuggaan waa hal siyaabo ay ku xariiraan guriga iyo dugsiga. Waxaa jira siyaasado badan, sharciyo, brograamyo iyo adeegyo looga hadlo bogaggaan. Waxaan iskudaynay in aan horay uga jawaabno su'aalaha badan aad qabtid, waxaan uga hadalnay si tafatiran.

Waxaa jira qodobo badan oo Westerville ka dhiga meel lagu guuleysto, hase ahatee taageerada laga helo qoysaska waa mid ka mid ah meelaha aan ka helno xoogga ugu muhiimsan. Waxaan kugu dhiiri gelineynaa in aad si firfircoon uga qeybgashid waxbarashada cunugaada, iskaa wax u qabso uga shaqeysid dugsiga, guriga, tagidda shirarka PTO/PTA, kullanka macalimiinta, kormeerka shaqada guriga, iwm. Waxaa aad isugu xeran guusha ardayga ka gaaro dugsiga iyo taageerada waalidka siiyo ardayga.

Ingiriisi
Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha: Si aad u heshid kaalmada luqadda, fadlan la xariir xogeynta dhismaha ama maamulaha dhismaha ee ku sugan dugsiga cunugaada una sheego luqadda aad ku hadashid.

Isbanish
Waalidiinta / Ilaaliyeyaasha: A veces el Distrito puede proporcionar asistencia gratis en otros idiomas. Si necesita esta ayuda, comuníquese con la secretaria del edificio o con el administrador del edificio en la escuela de su hijo y hágales saber el idioma que usted habla.

Somali
Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha: Degmada Waxbarashada waxay mararka qaarkood idinka kaalmeyn kartaa luqadaha kale. Haddii aad u baahan tahay kaalmo, fadlan la xariir xoghaynta ama qofka maamula dugsiga cunugaada tago una sheeg luqadda aad ku hadashid.

Waxaan rajeyneynaa in aan kula shaqeyno. Fadlan la xariir xafiiskena haddii aad qabtid su'aalo, arrimo, ama talooyin.

Mahadsanid,

Agaasimeyaasha Dugsiga Hoose Westerville

SHAQAALAHA DAGMADA

DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE
Guddiga Waxbarashada
936 Eastwind Drive
614-797-5700

Guddiga Waxbarashada

Madaxa.....Tracy A. Davidson
Ku Xigeenka Madaxa.....Rev. Rick A. Vilardo
Xubinta.....Dr. Nancy Nestor Baker
Xubinta.....Rev. Vaughn Bell
Xubinta.....Gerrie Cotter

Maamulka

Maamulaha.....Dr. John R. Kellogg
Ku Xigeenka Maamulaha.....Mark Hershiser

Xafiiska Maaliyadda

Khasnajiga.....Nicole Marshall

DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE
SIYAASADAHA, HABABKA IYO BARNAAMIJYADA DAGMADA
Ogolaashada Guddiga

XEERKA ASLUUBTA ARDAYGA

Qeybtaan buugga waxaa ku jira Xeerka Dhaqanka Ardayga ee Dagmada (District Code of Student Conduct) iyo siyaasadaha iyo nidaamka kale ee dagmada. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo ardayda labadaba waxay u baahan yahaiin in ay naftooda u bartaan siyaasadahaan dagmada bacdamaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo ardayda, nidaamka waxbarashada wuxuu ahaado, laga filaayo in ay u hoggaansamaan siyaasadahaan.

Siyaasadaha iyo nidaamka waxaa u dheer, in qeybtaan ay ku jiraan sharaxaadyo ku saabsan noocyo kala duwan oo ah adeegyada ardayga iyo barnaamijyo kuwasoo la heli karo. Haddii ay jiraan su'aalo ku saabsan waxyaabaha ku jira buugaan, fadlan la xariir maamulaha dhismaha ama qof isaga/iyada mattala.

Xeerkaan aadaabta waxaa ka mid ah (1)aadaab darrada uu ku kaco ardayga meel ka baxsan hantida dugsiga dagmada balse la xariirta hawlaha ama dhacdooyinka ka dhacay hantida dugsiga dagmada; iyo (2) aadaab darrada uu ku kaco arday, iyadoo aan la fiirinin meesha ay ka dhacday, taasoo ku wajahan sarkaal ka tirsan dagmada ama shaqaale ama hantida sarkaal ama shaqaale. Sidaas awgeed, xeerkaan dhaqanka wuxuu shaqeeyaa inta (1) ardayda hoos yimaadaan awoodda shaqaalaha dugsiga iyo/ama (2) inta ay socdaan hawlaha iyo munaasabadaha la xariiro dugsiga, xattaa maarka hawlahaas ka dhacaan meelo ka baxsan dugsiga.

Koodkaan Dabeecadda waxaa lagu dabaqaa basaska dugsiga, munaasabadaha manhajka dheeraadka iyo barnaamijyada waxbarashada kale.

Waxaa hoos lagu soo bandhigay Xeerka Dhaqanka Ardayga uu Guddiga soo ogolaaday. Hal rabitaan muhiim ah uu xeerka leeyahay waa dajinta heerka dabeecadda la ogolaan karo. Jebinta sharciyada Xeerka Dhaqanka Ardayga waxay dhalin kartaa in la qaado talaabo dishibiliin, kana mid ah, balse aan ku ekeen, ka joojinta iyo/ama ka saaridda dugsiga iyo/ama ku wareejinta madaxda sharciga ee ku habboon. Xeerka La Baddalay Ohio 3313.20, 3313.66, 3313.661).

Siyaasadda Guddiga 5610 – SAARIDDA, JOOJINTA, ERINTA, IYO REEBIDDA JOOGTADA ARDAYDA

Guddiga Waxbarashada (Board of Educatifon) wuxuu aqoonsan yahay in ka-reebidda brograamka waxbarashada dugsiyada, ha ahaato ka-saaridda degdegga ah, ka-joojinta dibadda dugsiga, erinta, ama ka-reebidda joogtada ah, waa ciqaabta ugu darran ee la siiyo ardayga ku sugan Dagmadaan, taasoo ah mid aan la saari karin haddii aan la raacin nidaamka dagsan (due process). Hase ahatee, Guddiga uma dulqaadan doono dagaalka, carqaladeynta ama dabeecadda aan habbooneyn ay ku kacaan ardaydeeda.

Lama ogola in arday laga saaro, laga joojiyo dibadda dugsiga, laga eryo iyo/ama si joogto ah looga reebo, haddii dabeecaddiisa/dabeecaddeeda tahay aadaab darro sida ku sifeysan Xeerka Aadaabta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code) sida Guddiga ogolaaday. Xeerka wuxuu kaloo sifeyn doonaa hababka loo baahan yahay in ay raacaan saraakiisha dugsiga marka ay ku hawlan yahiin fullinta dishibiliinka noocaas. Badbaadada nidaamka iyo sifeynta ku qoran siyaasadaan iyo buugga ardayga/waalidka, waxaa kaloo dheeraad ku ah hababka iyo tixgelinta

lagu dabaqi doono ardayda lagu tilmaamay in ay yahiin kuwo itaal darran sida hoos timaado IDEA, ADA, iyo/ama Qeybta 504 ee Sharciga Dayactirka (Rehabilitarion Act) ee 1973. (Fiiri Siyaasadda 5605 "Ka Joojinta/Ka Saaridda Ardayda Itaalka Darran.")

Waxaa dhici karto in ardayda la saaro dishibiliin marka ay jebiyaan Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code) xattaa haddii dhaqankaas ka dhaco hanti uu leeyahay ama kantaroolin Guddiga hase ahatee dabeecadda noocaas la xariirto hawlaha ama dhacdooyinka ka dhacay hantida uu leeyahay ama uu kantaroolo Guddiga, ama dabeecad, iyadoo aan la fiirinin meesha ay ka dhacday, ku beegan tahay sarkaal ama shaqaale ka tirsan Dagmada, ama hantida sarkaalka noocaas ama shaqaale.

Xagga siyaasaddaan iyo Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code), waxaa lagu dabaqi doonaa inta soo socota:

A. "Ka Saarid Degdeg" waa marka dugsiga laga reebo arday oo halis joogto ah ku haayo hantida Dagmada ama dadka ku sugan Dagmada ama dabeecadiisa cabsi gelin joogto ah ku tahay carqaladyenta hawsha waxbarashada ay Dagmada bixiso. (Fiiri Siyaasadda 5610.03 "Ka Saaridda Degdegga")

B. "Ka-Joojnta" ("Suspension") waa muddada ku meel gaarka ah uu maamulaha, agaasimaha, kaaliyaha agaasimaha, ama maamule kale oo ka socda brograamka waxbarashada Dagmada muddo aan ka badneyn toban (10) maalin dugsiyeed. Ka-joojinta ma gaari doonto in ka badan sannad dugsiyeedka iminka jiro, haddii in ka yar toban (10) maalin ka harsan tahay sannad dugsiyeedka marka la siiyo ka-joojinta. Maamulaha wuxuu badal ahaan ka codsan karaa ardayga in uu ka qeybgalo brograamka adeegga bulshada ama ciqaab kale muddo saacado la'eg qeybta ka hartay muddada ka-joojinta. Ardayga waxaa laga rabaa in uu bilaabo brograamka adeegga bulshada noocaas ama ciqaabta kale inta lagu dhex jiro todobaadka kowaad nasashada kuleylaha. Haddii ardayga ku guul dareysto in uu dhamaysto adeegga bulshada laga rabo ama ciqaabta kale ee la siiyay, Maamulaha wuxuu gaari karaa talaabada la qaado ee ku xigta. Hase ahatee, talaabada noocaas kuma jirto in ardayga laga dalbado in uu qaato waqtiga ka haray ka-joojinta marka la gaaro horaanta sannadka xiga. Hababka ka-saaridda waxay ku qoran yahiin Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipine Code) iyo Siyaasadda Guddiga (Board Policy) 5611 "Xuquuqda Nidaamka" (Due Process Rights").

Ardayga laga joojiyo waxaa loo ogolaan doonaa in uu dhamaystiro hawlaha fasalka uu gaffay taasoo ugu wacan ka-joojinta.

C. "Erinta" waxaa loola jeedaa marka ardayga laga reebo dugsiyada Dagmadaan muddo aan ka badneyn sideetan (80) maalin dugsiyeed ama tirada maalmaha dugsiga ka haray muddo hal samester ama teerm oo lala kulmo dhacdada ka dambeyso ka-saaridda ama muddo hal (1) sanno sida ku qoran siyaasaddaan iyo Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code). Maamulaha keliya ayaa awood u leh in uu ardayga eryo. Hababka erinta waxay ku qoran yahiin Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipine Code) iyo Siyaasadda Guddiga (Board Policy) 5611 "Xuquuqda Nidaamka" (Due Process Rights").

Haddii waqtiga erinta, ay maalmo yar ka haraan sannad dugsiyeedka marka loo firiyo tirada maalmaha erinta, Maamulaha wuxuu qeyb ama dhamaan muddada hartay ku xisaabi karaa sannad dugsiyeedka xiga.

1. **Hub ama Middi**

Marka ardayga aan si joogto ah looga reebin dugsiga, Maamulaha wuxuu ardayga ka saari karaa dugsiga muddo hal (1) sanno marka uu hub ama middi awood u leh in ay dhaawac culus gaarsiiso jirka, uu la yimaado dugsiga ama hanti kale (sida baabuurka dugsiga) uu leeyahay, kantaroolo ama ku shaqeeyo Guddiga, meel uu ka socdo tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kale uu dugsiga wado ama hawl aan ka soconin dugsiga ama hanti uu leeyahay ama

kantaroolo Guddiga, marka laga reebo marka Maamulaha yareeyo muddadaan hadba sida kiiska yahay sida waafaqsan siyaasaddaan. Sidoo kale, Maamulaha wuxuu ardayga ka saari doonaa dugsiga muddo hal (1) sanno marka lagu helo in uu haysto hub ama middi awood u leh in ay dhaawc culus gaarsiiso jirka, kana dhacdo dugsiga ama hanti kale (sida baabuurka dugsiga), taasoo uu leeyahay, kantaroolo, ama ku shaqeeyo Guddiga, tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kale uu dugsiga wado ama hawl aan ka soconin gudaha dugsiga ama hantida uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga, marka laga reebo Maamulaha oo yareyn kara muddadaan hadba sida kiiska yahay sida waafaqsan siyaasadaan. Ka-saaridda waxay gaari kartaa, hadba sida loo baahdo, sannad dugsiyeedka ku xiga sannad dugsiyeedka lala kulmay dhacdada dhallisay ka-saaridda. Maamulaha wuxuu arday kasta oo laga saaro dugsiga oo hub ama qori u soo qaato dugsiga (sida ku sifeysan 18 U.S.C. 921(a)(3)) wuxuu ku wareejin donaa caddaaladda dambiyada ama siistemka gafafka dhallinta ee u adeega Dagmada.

Hubka waxaa lagu sifeyaa hub kasta, kana mid ah qoriga bilaabaha, kaasoo loo handasay ama dhakhso loo baddali karo in uu tuuro xabbad marka la qarxiyo, frameka ama qaataha hubka noocaas, hub kasta oo xabad ka dhacdo, qarxo ama aamusiyaha, ama qalab kasta oo wax burburiyo. Qalabka burburinta, waxaa ka mid ah, balse kuma eka, waxyaabaha qarxa, waxyaabaha dabka kiciya, ama gaaska sunta, bamka, saaruuqa wax tuura ee ka culeys badan afar (4) ounce, saaruuqa waxyaabaha qarxa ama wax guba oo ka culeys badan rubac ounce; miino, ama qalab kale oo la mid ah.

Middida dhaawac culus gaarsiin karta jirka waxaa lagu sifeyaa hub kasta ama qalab wax gooya oo ka kooban middida lagu dhajiyay daabka la qabsado; middida wax lagu gooyo; ama qalab kale oo la mid ah (sida hubka fiiqan, birta loo adeegsado xiiladaha dagaalka “martial arts” sida ninjaha tuura xiddigaha) ee loo adeegsado, ama diyaar u ah in loo adeegsado, keeni kara dhimasho ama dhaawac culus gaarsiin kara jirka.

Maamulaha, hadba sida uu u go'aamiyo ama u garto, wuxuu baddali karaa ama yareyn karaa ka-saaridda noocaas oo qoran muddo ka yar hal (1) sanno, hadba sida kiiska yahay, kaddib marka uu tixgeliyo waxa soo socda:

a. Sharciyada Gobolka ama Federaalka iyo xeerarka lagu dabaqi karo lana xariira ardayda qabta itaal darrida (tusaale ahaan, marka dhacdada quseyso arday itaal darran iyo dabeecad xumada ay go’aan ka gaaran koox ka kooban dad xogogaal u ah in cunugga muujiyo itaal darrida ardayga);

b. Heerka eedeynta marka la fiiriyo da'da ardayga iyo sida ay muhiim ugu tahay aadaab darrada iyo/ama ciqaabta iyo/ama caddeynta la xariirta halista suurtogalka ah ay ku leeyahiin caafimaadka iyo ammaanka dadka kale, kana mid ah caddeynta ku saabsan rabitaanka ardayga iyo la socoshada la xariirta haysashada hubka ama middida; ee sabab u noqon kara dhaawac culus oo soo gaara jirka iyo/ama

c. Taariikhda aqoonta iyo dishibiliinka ardayga, sida jawaabta ardayga ka bixiyo dishibiliin hore oo loo saaray dhibaatooyin la xariira dabeecadda.

2. **Dabeecadda Dagaalka**

Haddii ardayga uu fal ka geysto dugsiga, hantida dugsiga, meel uu ka jiro tartan ka dhexeeyo dugsiga, munaasabad dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kasta oo la xariira dugsiga ama hawl kaddibna falka:

a. yahay gaf lagu tilmaami karo in uu yahay dambi haddii uu geysto qof qaan gaaray;

kaddibna

b. waxyeelo culus u geysto jirka qof (dad) sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A)(5), ama u geysto hanti sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A)(6)

Maamulaha wuxuu saari karaa ardayga muddo gaarta ilaa hal (1) sanno. Maamulaha wuxuu ka-saaridda gaarsiin karaa sannad dugsiyeedka xiga ama wuxuu yareyn karaa ka-saaridda hadba sida lagama maarmaanka ah kiiska sida ku sifeysan hoos. Looma baahna in adayga lagu qaado dacwad ama lagu xakumo dambi taasoo keeni karta in laga saaro sida hoos timaado qodobkaan.

Maamulaha, hadba sida uu u go'aamiyo ama u garto, wuxuu yareyn karaa ka-saaridda noocaas muddo ka yar hal (1) sanno, hadba sida kiiska yahay, kaddib marka uu tixgeliyo waxa soo socda:

a. Sharciyada Gobolka ama Federaalka iyo xeerarka lagu dabaqi karo lana xariira ardayda qabta itaal darrida (tusaale ahaan, marka dhacdada quseyso arday itaal darran kaddibna dabeecad xumada ay go'aan ka gaaraan koox ka kooban dad xogogaal ah in cunugga muujiyo itaal darrida ardayga); ama
b. daruufo kale oo culus, sida, balse kuma eka, taariikhda waxbarashada iyo dishibiliinka ardayga, sida jawaabta ardayga ka bixiyo dishibiliin hore oo la saaray lana xariira dhibatooyinka dabeecadda. Haddii waqtiga ka-saaridda, ay maalmo yar ka haraan sannad dugsiyeedka marka loo firiyo tiracda maalmaha ka-saaridda, Maamulaha wuxuu qeyb ama dhamaan muddada hartay ku xisaabi karaa sannad dugsiyeedka xiga.

3. **Cabsi Gelinta Bambka**
Haddii ardayga uu cabsi gelinta bambka u geysto dhismaha dugsiga ama xerada ay ka socoto hawsha dugsiga waqtiga cabsi gelinta, Maamulaha wuxuu saari karaa ardayga muddo gaarta ilaa hal (1) sanno. Maamulaha wuxuu ka-saaridda ku fidin karaa sannad dugsiyeedka xiga ama wuxuu yareyn karaa ka-saaridda hadba sida lagama maarmaan u ah kiiska sida ku sifeysan hoos. Looma baahna in adayga dacwad lagu qaado ama lagu xakumo dambi taasoo keeni karta in laga saaro sida hoos timaado qodobkaan.

Maamulaha, hadba sida uu u go'aamiyo ama u garto, wuxuu yareyn karaa ka-saaridda noocaas muddo ka yar hal (1) sanno, hadba sida kiiska yahay, asbaabta soo socoto awgeed.

a. ardayda lagu tilmaamay in ay itaal darran yahiin sida hoos timaado IDEA, ADA, iyo Qeybta 504 Sharciga Dayactirka (Rehabilitarion Act) 1973, kaddib marka ay ku talliyaan koox aqoon u leh baahida waxbarashada ardayga; ama

b. daruufo kale oo culus, sida, balse kuma eka, taariikhda waxbarashada iyo dishibiliinka ardayga, sida jawaabta ardayga ka bixiyo dishibiliin hore oo loo saaray dhibatooyin la xariira dabeecadda.

D. "Ka-reebidda joogtada ah" waxaa loola jeedaa ardayga laga mamnuucay in uu tago dugsiga dadweynaha ee ku yaal Gobolka Ohio. Fiiri Siyaasadda 5610.01)

Haddii ardayga laga saaro in ka badan labaatan (20) maalin dugsiyeed, waqti kasta ha ahaato oo gaarsiisan sannad dugsiyeedka xiga, Maamulaha wuxuu ardayga iyo waalidiintiisa/waalidiinteeda siin doonaa magacyada, cinwaanada, nambarada telefoonada wakaaladahaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ku sugan bulshada kuwaasoo bixiya brograamyo ama adeegyo kaalmo ka geysta toosinta dabeecadaha ardayga iyo dhaqanka ku biiriyay dhacdada (dhacdooyinka) ka dambeyay ka-saaridda.

Laga bilaabo sannd dugsiyeedka 2019-2020, marka laga reebo sida sharciga ogol yahay, ka-joojinta ama ka-saaridda ka horeyso laguma qaadi karo arday ku jira mid ka mid ah darajooyinka Pre-xanaanada ilaa darajada 3aad haddii ardayga uusan geysanin ugu yaraan mid ka mid ah falalka soo socda:

a. Marka ardayga la yimaado hub ama middi awood u leh in ay dhaawac culus gaarsiiso jirka gudaha dhismaha dugsiga ama hanti kasta (kana mid ah baabuurka dugsiga) leeyahay, uu kantaroolo, ama ku shaqeeyo Guddiga, tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kasta ama hawl dugsiga leeyahay oo aan ku aalin gudaha dugsiga ama hantida uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga, ama leeyahay hub ama middi awood u leh in ay dhaawac culus gaarsiiso jirka inta lagu sugan yahay dugsiga ama hanti kale (kana mid ah baabuurka dugsiga)

leeyahay, kantaroolo, ama Guddiga ku shaqeeyo, tartanka ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kasta ama hawl uu dugsiga leeyahay kuna aalin gudaha dugsiga ama hanti uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga.

b. Ardayga fal ka geysto dugsiga, xero kale uu dugsiga leeyahay, meel ay ka jirto tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kale ama hawl dugsiyada leeyahay kaddibna falka: 1) wuxuu ahaan doonaa gaf lagu tilmaami karo dambi haddii uu geysto qof qaan gaaray; kaddibna 2) waxyeelo culus u geysto jirka qof (dad) sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A)(5), ama hanti sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A) (6).

c. Ardayga uu cabsi gelinta bambka u geysto dhismaha dugsiga ama xero kasta oo laga fulliyo hawsha dugsiga marka la geysanaayo cabsi gelinta.

d. Ardayga ku kaco dabeecad noocaas ah oo markaas lagama maarmaan ka dhigta in ardayga laga joojiyo ama laga saaro dugsiga si loo badbaadiyo caafimaadka iyo ammaanka ardayga, asxaabta ardayga, shaqaalaha iyo macalimiinta fasalka, ama shaqaalaha kale ee ka tirsan dugsiga.

Ka hor inta aan laga joojinin ama laga saarin ardayga darajooyinka Pre-K ilaa darajada 3aad, mar kasta ay suurtogal tahay, Agaasimaha wuxuu la tashan doonaa aqoonyaanka caafimaadka madaxa kaddib marka lala galo heshiis. Haddii dhacdooyinka u horseeda ka-joojinta ama ka-saaridda ardayga laga saaro dugsiga tilmaanto in ardayga u baahan yahay adeegyo dheeraad ah xagga caafimaadka madaxa, Agaasimaha ardayga ama aqoonyaanka caafimaadka madaxa Dagmada waxay waalidka ardayga ama ilaaliyaha ku kaalmeyn doonaan in uu helo bixiyeyaal ama helitaanka adeegyada noocaas, sida tixraacinta aqoonyaan madax banaan oo ka shaqeeya caafimaadka madaxa, hase ahatee kaalmada noocaas waa in aysan culeys ku noqonin Dagmada ama dugsiga ardayga xagga maaliyadda. Haddii arday ku jira darajooyinka Pre-K ilaa darajada 3aad laga joojiyo ama laga saaro, ardayga waxaa la siin doonaa isla ogeysiiska iyo dhageysiga, hababka, iyo fursadaha waxbarashada sida ku qoran siyaasadda Guddiga iyo sharciga. Ka-joojinta ama ka-saaridda ardayga ku jira darajooyinka Pre-K ilaa darajada 3aad ma soo koobi doonto mas'uuliyadda Guddgia ka saaran bixinta waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira ee la siiyo ardayga noocaas sida waafaqsan siyaasadda Guddiga iyo sharciga. Intaas kaddib, lama soo koobi doono awoodda Guddiga u leeyahay in dugsiga laga joojiyo arday ku jira darajooyinka Pre-K ilaa darajada 3aad, hase ahatee waa in loo adeego ka-joojinta gudaha dugsiga, jawigana waa in uu ahaado mid ku habboon waxbarasho lagu karmeero.

Haddii Maamulaha go'aan ku gaaro in dabeecadda ardayga saaran baabuurka dugsiga jebiso sharciyada u dagsan dugsiga, isaga/iyada waxay ardayga ka joojin kartaa axsaanka raacidda baska muddo ku habboon lana xariirta jebinta iyo wax ka qabashada dabeecadda. Ka joojin kasta oo noocaas ah waa in ay u hoggaansanto nidaamka iyo Xeerka Asluubta Ardayga/Xeerka Dishibiliinka Ardayga.

Guddiga wuxuu Maamulaha u fasaxay in uu soo jeediyo talooyin la xariira ka-joojinta/ka-saaridda ardayga laga siiyo dugsiga lagana yaabo in ay ka mid yahiin talooyinka waxbarashada kale. Maamulaha wuxuu bilaabi doonaa dacwadaha ka-saaridda ee ka soo horjeedo ardayga ku dhaqaaqay ficil mutteystay ka-saarid sida hoos timaado siyaasadda Guddiga haddii ardayga ka noqdo dugsiga ka hor inta aan la gaarin dhageysiga ama go'aanka ka-saaridda. Waa in laga saaro isla muddada la saari lahaa haddii ardayga uu ku sii qornaan lahaa.

Guddiga wuxuu si ku meel gaar ah diidi karaa in dugsiga loo ogolaado arday laga soo saaray dugsiyada dagmo kale oo ku taalo Ohio ama dibadda ka ah gobolka haddii muddada ka saaridda ardayga ay dagmada u qabatay aysan dhamaanin. Ardayga laga saaray waxaa marka hore la siin doonaa fursad oo lagu dhageysto. Qodobkaan waxaa kaloo lagu dabaqaa ardayga ay quseeyso awoodda wakiilka (power of attorny) oo awoowaha/ayeeyada cunugga ku tilmaanto in ay yahiin qareenka dhabta ah ama warqadda uu ku dhaarto una fasaxda daryeelaha (affidavit) in uu fulliyo awoowaha/ayeeyada cunugga, oo raadiya in loo ogolaado gelitaanka dugsiyada Dagmadaan sida waafaqsan Siyaasadda 5111.

Guddiga wuxuu si ku meel gaar ah diidi karaa in uu ogolaado arday laga joojiyay dugsiyada dagmo kale oo ka tirsan Ohio haddii muddada ka-joojinta ardayga ay dagmada qabatay aysan weli dhicin. Ardayga

laga joojiyay waxaa marka hore la siin doonaa fursad lagu dhageysto, Guddiga hortiisa.

Marka ardayga laga saaro Dagmadaan, Maamulaha wuxuu ogeysiis qoran u diri doonaa kulliyad kasta uu ardayga la eryay ku qoran yahay sida hoos timaado Fursadaha Diiwaangelinta Ka Dambeyso Dugsiga Sare (Postsecondary Enrollment Options) waqtiga la fulliyo ka-saaridda. Ogeysiiska qoran wuxuu muujin doonaa in taariikhda ka-saaridda ku beegan tahay in ay dhacdo iyo in Guddiga qaatay qodob ku jira Siyaasadda (Policy) 2271 ee hoos timaada R.C. 3313.613 in loo diido buundada dugsiga sare lana xariira koorsooyinka ka dambeeyo dugsiga sare oo la qaatay mudda ka-saaridda socotay.
Haddii ka-saaridda la fidiyo, Maamulaha wuxuu kuliyadda ogeysiin doonaa fidinta.

Siyaasadda Guddiga 5611 - XUQUUQDA NIDAAMKA

Guddiga Waxbarashada (Board of Edcuation) wuxuu aqoonsan yahay in ardayda leeyahiin xuquuq kooban sida hoos timaado dastuurka marka laga hadlo waxbarashadooda.

Sidaas darteed, Guddiga wuxuu dhisay hababka soo socda:

A. **Ardayga laga qaado ka-joojinta:**

Marka Maamulaha, agaasimaha, ama maamule kale ku fakaraan in ardayga la siiyo ka-joojinta dibadda-dugsiga:

1. Ardayga waxaa lagu ogeysiin doonaa qoraal in ay suurtogal tahay in laga joojiyo lana siiyo sababta loogu qaaday talaabada la soo jeediyay.

2. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad in si aan rasmi ahayn loo dhageysto si uu uga doodo sababta loo siiyay ka-joojinta iyo si uu u sharaxo falalka uu ku kacay isaga/iyada.

3. Waxaa leysku dayi doonaa in waalidiinta ama ilaaliyeyaasha lagu ogeysiiyo telefoon haddii la soo saaro ka-joojin.

4. Muddo hal (1) maalin dugsiyeed laga bilaabo ka-joojinta, maamulaha, agaasimaha, ama cidda loo xil saaray waxay ogeysiin doonaan waalidiinta, ama haayeyaasha ardayga iyo Hanti Dhowrka Guddiga (Treasurer of the Board). Ogeysiiska waxaa ku jira asbaabta ka dambeyso ka-joojinta iyo xaqa ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha u leeyahayiin in ay racfaan u gudbiyaan Guddiga ama cidda loo xil saaro; xaqa in la mattalo racfaanka; iyo xaqa in la codsado in dhageysiga lagu qabto kullanka fullinta haddii la hor keeno Guddgia. Ogeysiiska wuxuu kaloo tilmaami doonaa in haddii ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha ku talo jiro in uu racfaan u gudbiyo Guddiga ama cidda loo xil saaray, ogeysiiska noocaas ee la xariira racfaanka waxaa loo gudbin doonaa, iyadoo qoran, Xafiiska Adeeygada Caafimaadka iyo Ammaanka (Office of Health and Safety Services) muddo toban iyo afar (14) maalmo isku xiga kaddib taariikhda la soo saaro ogeysiiska ka-joojinta. Haddii gafka yahay mid ay Dagmada ku raadsato ka-reebid joogto ah, markaas ogeysiiska waxaa ku jiri doono macluumaadkaas.

5. Ogeysiiska ka-joojinta waxaa kaloo loo diri doonaa:

a. Maamulaha:

b. Diiwaanka dugsiga ardayga (waa in aan lagu darin diiwaanka joogtada).

6. Haddii ardayga uu ka tago xerada dugsiga, fasax la'aan, isla marka uu jebiyo (ama lagu tuhmo in uu jebiyay) qodob ka tirsan Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct) /Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code) ama ka hor inta maamulaha uusan fullinin dhageysi aan rasmi ahayn sida ku qoran kor, kaddibna ardayga ku guuldareysto in uu ku soo noqdo dugsiga maalin dugsiyeedka ku xiga, agaasimaha, kaaliyaha agaasimaha, Maamulaha, ama maamule kasta oo kale, wuxuu ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha siin doonaa dhageysi aan rasmi ahayn kaddib marka la codsado si looga hadlo asbaabta dhallisay ka-joojinta iyo in ardayga loo ogolaado in uu ka hor yimaado asbaabta iyo in uu sharaxo ficilkiisa/ficilkeeda, waqti kasta ka hor inta aan la gaarin muddada ka-joojinta.

Racfaanka Laga Qaato Ka-Joojinta ee loo Gudbiyo Guddiga ama Qofka Loo Xil Saaro

Ardayga jira toban iyo sideed (18) ama ka badan ama marka waalidka (waalidiinta) ardayga ama ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ardayga waxay racfaan ka qaadan karaan ka-joojinta iyaga oo u gudbiya Guddiga ama cidda loo xil saaray. Waxaa dhici karto in cid kale mattasho inta ay socdaan dhamaan dacwadaha racfaanka noocaas.

Diiwaanka waxyaabaha afka laga sheegay ee ku saabsan dhageysiga waxaa lagu hayn doonaa kullanka fullinta marka ardayga, waalidka, ama waalidka codsadaan haddii lagu haayo Guddiga hortiisa.
Habka loo dabagalo racfaanka noocaas waxaa lagu soo qori doonaa sharciyada uu soo ogolaado Maamulaha. Ogeysiiska racfaanka waa in loo gudbiyo, iyadoo qoran, Hanti Dhowrka (Treasurer) ama Maamulaha muddo toban iyo afar (14) maalin isku xiga gudahooda kaddib marka la soo saaro ogeysiiska ka-joojinta.

Inkastoo dhageysiga kullanka fullinta lagu qabto Guddiga hortiisa, Guddiga waa in uu qaado talaabo dadweynaha hortooda.

Racfaanka Loo Gudbiyo Maxkamadda

Sida hoos timaado sharciga Ohio, racfaanka laga qaato go'aanka Guddiga ama cidda loo xil saaray waxaa loo gudbiyaa Maxkamadda Dacwadaha Caadiga (Court of Common Pleas).

B. **Ardayga hoos yimaada ka-saarid:**

Marka maamulaha uu ku fakaro in uu ardayga saaro:

1. Maamulaha wuxuu ardayga, waalidka, ama haayaha siin doonaa ogeysiis qoran oo ku saabsan ka-saaridda lagu talo jiro, kana mid ah asbaabta loo rabo ka-saaridda lagu talo jiro.

2. Ardayga iyo waalidka ama wakiilka waxay fursad u haystaan in ay iska xaadiriyaan Maamulaha hortiisa ama cidda loo xil saaray si ay uga doodaan talaabada la soo jeediyay ama si ay u sharaxaan talaabadaha uu ardayga qaaday. Ogeysiiska qoran wuxuu sheegi doonaa waqtiga iyo goobta loo baahan yahay in la tago, taasoo aysan waajib ahayn in ay ka yaraato saddax (3) maalin dugsiyeed kana dambaynin shan (5) maalin dugsiyeed kaddib marka la siiyo ogeysiiska haddii Maamulaha uusan bixinin dheereyn kaddib marka ardayga ama waalidka codsanin.

3. Hal (1) maalin dugsiyeed gudaheeda, Maamulaha wuxuu ogeysiin doonaa waalidiinta, ilaaliyeyaasha, ama haayeyaasha ardayga iyo Hanti Dhowrka Guddiga (Treasurer of the Board). Ogeysiiska waxaa ku jira asbaabta ka dambeyso ka-saaridda iyo xaqa ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha u leeyahiin in ay racfaan u gudbiyaan Guddiga ama cidda loo xil saaro; xaqa in la mattalo racfaanka; iyo xaqa in la codsado in dhageysiga lagu qabto kullanka fullinta haddii la hor keeno Guddgia. Ogeysiiska wuxuu kaloo tilmaami doonaa in haddii ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha ku talo jiro in uu racfaan u gudbiyo Guddiga ama cidda loo xil saaray, ogeysiiska noocaas ee la xariira racfaanka waxaa loo gudbin doonaa, iyadoo qoran, Xafiiska Adeeygada Caafimaadka iyo Ammaanka (Office of Health and Safety Services) muddo toban iyo afar (14) maalin isku xiga kaddib taariikhda la soo saaro ogeysiiska ka-saaridda. Haddii gafka yahay mid ay Dagmada ku raadsato ka-reebid joogto ah, markaas ogeysiiska waxaa ku jiri doono macluumaadkaas.

Racfaanka Laga Qaato Ka-saaridda loona Gudbiyo Guddiga

Ardayga jira toban iyo sideed (18) sanno ama ka weyn ama waalidka (waalidiinta) ardayga ama ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) waxay racfaan ka qaadan karaan ka-saaridda uu soo jeediyay Maamulaha (Superintendent) una gudbin karaan Guddiga ama cidda loo xil saaray. Waxaa dhici karto in ay iyaga mattalaan xagga dhamaan dacwadaha racfaanka noocaas loona ogolaan doono in la dhageysto Guddiga ama cidda loo xil saaray hortooda.

Diiwaanka waxyaabaha afka laga sheegay ee ku saabsan dhageysiga waxaa lagu hayn doonaa kullanka fullinta marka ardayga, waalidka, ama waalidka codsadaan haddii lagu haayo Guddiga hortiisa.
Habka loo dabagalo racfaanka noocaas waxay ahaan doontaa sida waafaqsan sharciyada uu soo ogolaado Maamulaha. Ogeysiiska racfaanka waa in la gudbiyo, iyadoo qoran, muddo toban iyo afar (14) maalin gudahooda, kaddib marka Maamulaha gaaro go'aanka ka-saaridda, loona gudbiyo Xafiiska Adeegyada Caafimaadka iyo Ammaanka (Office of Health & Safety Services).

Inkastoo dhageysiga kullanka fullinta lagu qabto Guddiga hortiisa, Guddiga waa in uu qaado talaabo dadweynaha hortooda.

Racfaanka Loo Gudbiyo Maxkamadda

Sida hoos timaado sharciga Gobolka, go'aanka Guddiga ama cidda loo xil saaray waxaa laga qaadan karaa racfaan loo jeediyo Maxkamadda Dacwadaha Caadiga (Court of Common Pleas).

C. **Ardayda lagu qaado ka-saaridda degdegga:**

Ardayda dabeecadooda dhallisa in si degdeg ah looga saaro waxaa loola dhaqmi doonaa sida waafaqsan xuquuqda iyo hababka ku qoran Siyaasadda (Policy) 5610.03 - Ka-Saaridda Degdegga (Emergency Removal).

D. **Ardayda sida joogtada ah looga reebo:**

Ardayda dabeecadooda tahay mid u baahan in si joogto ah looga reebo waxaa loola dhaqmi doonaa sida waafaqsan xuquuqda iyo hababka ku qoran Siyaasadda (Policy) 5610.01 – Ka Reebidda Joogtada Ardayda Aan Qabin Itaal Darri (Permanent Exclusion of Non-disabled Students).

E. **Ardayda laga joojiyo raacidda baska/axsaanka gaadiidka:**

Ardayda asluubtooda awgeed u baahan in laga joojiyo raacidda baska iyo/ama adeegyada

gaadiidka waxaa loola dhaqmi doonaa sida waafaqsan xuquuqda iyo hababka ku qoran Siyaasadda (Policy) 5610.04 - Ka Joojinta Raacidda Baska/Axsaanka Gaadiidka 5610,04 (5610.04 Riding/Transportation Privileges).

Maamulaha wuxuu hubsan doonaa in dhamaan xubnaha shaqaalaha isticmaalaan hababka kore marka uu la xaajonaayo ardayda. Intaas kaddib, oraahda ku saabsan xuquuqda nidaamka dagsan waxaa la soo gelin doonaa dhamaan buugaagta ardayga taasoo u fududeyn doonto ardayda iyo waalidiintooda.

Hababkaan laguma dabaqo talooyinka dishibiliinka kale ee gudaha-dugsiga sida ka-joojinta gudaha-dugsiga. Ka-joojinta gudaha dugsiga waa mid dhamaan laga bixiyo jawi waxbarsho oo la kormeero kuna yaal gudaha dugsiga. Mana aha in hababkaan kale ee la xariira dishibiliinka in ay quseyaan ardayda ay shaqaalaha dugsiga ee loo fasaxay ka mamnuuceen dhamaan ama qeybo ka tirsan ka-qeybgalkooda hawlaha la xariiro manhajka, hawlaha ka dhexeeyo dugsiga, iyo/ama hawlaha dheeraadka ku ah manhajka kana dhexeynin dugsiga.

Sharciyada Asluubta Ardayga

Ujeedada loo soo taxo sharciyada dhaqanka ardayga iyo talaabada dishibiliinka ee laga yaabo in laga qaado jebinta waa in ardayda la ogeysiiyo waxa loo haysto dabeecadda aan la ogolaan karin, iyo ciqaabta suurtogalka ah ee soo raaci karto dabeecadda aan la ogolaan karin.

1. **Goynta Fasalka**
   Goynta waa marka amar la'aan laga maqan yahay dugsiga.

2. **Jebinta Imaashada aan ahayn Goynta Fasalka**
   Ardayga kuma dhici karo in uu u hoggaansamo sharciyada tagidda dugsiga. Sida waafaqsan SHARCIYADA LA BADDALAY EE OHIO 3321.01, cunugga da'diisa u dhexeyso lex (6) sanno iyo toban iyo sideed (18) sanno wuxuu ku jira da'da wajibka ku ah in uu tago dugsiga.

3. **Dagaalka/Gacan Qaadka**
   Dagaalka/Gacan Qaadka waa marka si wadajir ah looga qeybqaato dhacdo keenta is-taabashada jirka. Ardayga uma dhaqmi karo siyaabo ku gooddisa in ay sababto ama sababto dhaawac loo geysto jirka qof kale. Ardayga uma soo xaadiri karo si uu u daawado ama u dhiiri geliyo dagaal ama ka celiyo shaqaalaha dugsiga in ay soo farageliyaan marka dagaal dhaco, Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan. Gafkaan waa ka soocan yahay Xeerka Asluubta (Code of Conduct), Qeybta #29/Weerarka marka gacan qaadka ay ku lug leeyahiin in ka badan hal arday.

4. **Jejebinta/Khasaarada ama Burburinta Hantida Dugsiga/Qofka**
   Waxaa dhici karto in Maamulaha saaro arday ilaa hal sanno marka ardayga ku dhaqaaqo ficil oo waxyeelo culus u geysto hantida.

   Ardayda waxay mas'uul ka yahiin in ay si wanaagsan u dhowraan hantida dugsiga, saadka iyo qalabka dugsiga. Looma dul qaadan doono calaamadaha loo yeelo darbiyada, albaabada ama meelaha kale. Lama ogola in istikaro lagu dhajiyo meelaha, gaaar ahaan miisaska iyo lokarada ardayga. Ardayda khasaaro u geysata hantida dugsiga waxaa laga qaadi doonaa talaabo dishibiliin.

   Jejebinta waa marka si ula kac ah loo burburiyo ama muuqaalka laga baddalo hantida dugsiga ama shakhsiga. Ardayga ma sababi karo ama iskuma dayi karo in uu sababo burbur loo geysto hantida dugsiga ama shakhsiga. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

Ardayda iyo waalidiintooda ama ilaaliyeyaashooda waxay mas'uul ka noqon doonaa jejebin kasta, khasaaro, derbiyada wax lagu qoro ama burburinta uu ardayga ka geysto inta uu ku sugan yahay dugsiga, hantida ay leedahay ama kantaroosho dugsiga dagmada, ama inta uu ku sugan yahay tartarn ka dhexeyo dugsiyada, munaasabo ka baxsan manhajka, ama barnaamij kasta ama hawl kasta uu qabto dugsiga iyadoo aan la fiirinin goobta lagu dhigaayo. Waxaa la dalban doonaa soo celinta kharashka ku baxa dib u hagaajinta dhamaystiran ee khasaarada.

5. **Tuugonimada/Xatooyada/U Diididda Hantida Qofka ama Hantida Dugsiga**
   Xatooyada waa marka si sharci darro ah loo qaato hanta uu leeyahay qof kale.

   Ardayga ma xadi karo, iskuma dayi karo in uu xado ama uma diidi karo milkiilaha hantida gaarka loo leeyahay ama hantida dugsiga, ama ma haysan karo ama ma wareejin karo hanti luntay ama la soo xaday. In lagu guul dareysto in hantida loo soo celiyo milkiilaha ama lagu wareejiyo sarakiisha dugsiga waxay u dhigantaa jebinta xeerkaan. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

6. **Isticmaal, Haysashada, iibinta ama Qaybinta Hubka**
   Qoriga waxaa loo haysta in uu yahay hub halis ah. "Qoriga" waxaa lagu sifeyaa in uu yahay waxaana ka mid ah, hase ahatee kuma eka: hub kasta (sida goriga xabadda ka dhacdo) kaasoo loo baddali karo ama loo sameyay in loo baddalo ama si fudud loogu baddali karo in uu soo tuuro xabad taasoo ka dambeyso qarax ama shay kale oo soo tuura; frameka ama fadhiga hubka noocaas ah; yareeyaha dhawaaqa qoriga ama aamusiyaha qoriga; ama qalab kasta oo wax burburiya. (Fadlan tixraac #8 hoos si aad u heshid sifeynta "qalabka burburinta). Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

BOARD POLICY 5772 - WEAPONS (SIYAASADDA GUDDIGA 5772 - HUBKA)

Guddiga Waxbarashada (Board of Education) wuxuu ardayda ka mamnuucay in ay haystaan, keydsadaan, ama adeegsadaan hub, sida hubka la qarsado, marka ay ku sugan yahiin amaanka dugsiga iyo xaalad kasta oo hoos timaado kantaroolka iyo kormeerka Guddiga, ujeedadana tahay in lagu qabto hawlaha dugsiga sida Guddiga uu soo ogolaaday iyo amrayay kana mid ah, balse kuma eka, hantida la kireysto, la leeyahay, ama uu qandaraas ku soo qaatay Guddiga, ama munaasad dugsiga kafaalo qaaday, ama gudaha baabuur uu Guddiga leeyahay.

Macnaha erayga "hub" waa shay kasta, marka loo fiiriyo habka loo adeegsado, loogu talogalay in loo adeegsado, ama loo mattalo in uu yahay, ee awood u leh in uu dhaawac culus gaarsiiyo jirka ama khasaaro gaarsiiyo hantida, iyo halis geliya caafimaadka iyo amaanka dadka. Hubka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, hubka dabka ka dhaco, qoryaha nooc kasta iyo qaab kasta, sida qoryaha quwadda ka helo hawada ama gaaska (ha la cabbeeyo ama yaan la cabbeynin), middida, sakiinta, garuunka, hubka korantada, biraha kuus kuusan, hubka "martial arts", rasaasta, iyo waxyaabaha qarxo.

Waxyaabaha ka reeban siyaasadda waxaa ka mid ah:

A. Waxyaabaha uu horay u soo ogolaaday maamulaha dhismaha ama qofka mattalasida qeyb ka tirsan fasalka ama bandhig gaar ah uu qof qaangaaray kormeero, haddii loo adeegsado ujeedada iyo habka la soo ogolaaday (marna lama ogolaan doono in hub shaqeeya iyo rasaas ay qeyb ka noqdaan bandhigga);
B. Tiirarka masraxa ee loo adeegsado meelaha ku habboon.

Ardayda waa in ay maamulaha u sheegeen macluumaad kasta oo ku saabsan hub iyo/ama goodinta gacan qaatka ay geystaan ardayda, xubnaha shaqaalaha, ama dadka soo booqdo. In lagu guuldareysto soo

sheegidda warka noocaas ah waxay keeni karta in ardayga laga qaado talaabo dishibiliin.

Siyaasadda waxaa loo hirgelin doonaa sida waafaqsan Xeerka Dhaqanka/Xeerka Dishibiliinka Ardayga, Siyaasadda 5610, iyo Siyaasadda 5610.01 iyo nidaamka u dagsan maamulka.

Agaasimaha waxaa loo fasaxay in uu dajiyo barnaamijyada tababarka hubka iyo shardiga in ardayda ay isla markiiba u soo sheegaan agaasimaha dhismaha ama qofka isaga/iyada mattasha wararka ku saabsan hubka iyo cabsi gelinta dagaalka ay geystaan ardayda iyo/ama shaqaalaha. In lagu guul dareysto soo sheegidda waxyaabaha la ogsoon yahay waxay dhalin kartaa in ardayga laga qaado talaabo dishibiliin.

Maamulaha wuxuu arday kasta oo jebiyo siyaasadaan gaarsiin doonaa waalidiinta ardayga ama ilaaliyeyaasha iyo maxkamadda dambiga ama nidaamka gafafka dhalin yarta. Waxaa kaloo dhici karto in ardayga laga qaado talaabo dishibiliin, oo gaarta ilaa kana mid ah ka-saaridda dugsiga.

Siyaasadaan waxaa sannad kasta lagu soo daabici doonaa dhamaan buugaagta ardayga iyo shaqaalaha ee Dagmada. Daabacaadda ma aha shardi ka horeeyo hirgelinta siyaasadaan.
R.C. 2923.12, 2923.122, 3313.20, 3313.66, 3313.66118 U.S.C. 921, 20 U.S.C. 8922, 20 U.S.C. 7151

7. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Hub Halis ah Balse Aan Ahayn Qori ama Waxyaabaha Qarxa, Dab, ama Gaaska Sunta**
   Hubka halista, marka laga reebo qoriga ama qalabka burburinta, kana mid ah waxyaabaha qarxa, dabka ama gaaska sunta, waxaa lagu sifeyaa qalabka, aalada, maadada, ama waxyaabaha, dhaqaaqa ama aan dhaqaaqin, loona isticmaalo, ama lagu talogalay in loo isticmaalo, ama lagu mattalo in si diyaar ah loo adeegsado in uu geysto dhimasho, dhaawac culus jirka ama burburinta hantida ama halista loo geysto caafimaadka iyo ammaanka dadka. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, qalabka koranta ku shaqeeyo ee lagu magacaabo "taser" ama garuunka.

   Middida, sakiink, ama qalab kale oo la mid ah (kana mid ah hubka biraha fiiqan, "martial arts", sida xiddigaha la tuuro) waxaa lagu sifeyaa hub kasta ama qalab kasta oo wax gooya kana kooban middi lagu dhajiyay gacan qabad loo adeegsado, ama diyaar u ah in loo adeegsado, goynta, jeexidda, ama dooxidda, taasoo sabab u noqon karta dhimasho ama dhaawac culus oo loo geysto jirka.Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, joogto, ama si un uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

8. **Adeegsiga, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Waxyaabaha Burburinta, kana mid ah Waxyaabaha Qarxa, Dabka ama Sunta Gaaska**
   Waxyaabaha qarxa, dabka ama gaaska sunta waxaa lagu sifeyaa qalabka wax burburiya, sida bambka, garneelka, saaruuqa agu tuuro in ka badan afar ounce, saaruuqa lagu tuuro waxa qarxa ama dabka dhaliya miisaankiisuna ka badan yahay rubac ounce, miinada, ama qalabka la midka ah. Sifeyntaan waxaa kaloo ka mid ah hubkahalista ee, ama si fudud loo baddali karo, in uu rido xabbad marka baaruudka qarxo ama la adeegsado shay kale oo tuura, lagana rido dhuun dhexrooraheeda ka weyn yahay nus inji.Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

9. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Maadooyinka Tubaakada**
   Waa mamnuuc adeegsiga, haysashada ama wada-haysashada tubaakada qaab kasta ee ardayda inta ay ku sugan yahiin ama u dhaw yahiin hantida dugsiga, saran yahiin gaadiidka dugsiga ama ku jiraan hawlahauu dugsiga kafaalo qaaday. "Isticmaalka tubaakada" waxaa loola jeedaa in afka lagu haysto, la calaajiyo ama la haysto maado kasta oo laga helo tubaako, sida tubaakada aan qiiqin, si looga helo qaadirada tubaakada, iyo sidoo kale dhamaan waxyaabaha loo adeegsado tubaakada ama waxyaabaha lagu baddalo tubaakada kana mid ah sigaarka, siigaraha, tubaakada tubada, tubaakada la calaajiyo, la jiido, ama shay kasta ama maado kasta oo laga helo tubaako, marka lagu darro warqadaha loo adeegsado in lagu duubo sigaarka, sigaarka sanjabiilka ama qalabka kale ee la shido si loo gubo tubaakada. Sidoo kale, waa mamnuuca cabidda iyo/ama haysashada sigaarka

elataroonigga, "qalabka uumiga" iyo noocyada kale sigaarka, haddii laga helo nikotiin ama hadcdii kale. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

10. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Cabbitaanka Qamrada Lagu Sakhraamo**
    Ardayga ma haysan karo, ma adeegsan karo, ma qarsan karo,ma gudbin karo, ma isku dayi karo in uu gudbiyo, ama kuma “sakhraami karo” cabbitaanka qamrada, (sida maadooyinka laga helo qiyaas la cabbiri karo oo ah qamro, sida “biir u yaalka” ama dawooyinka laga iibsado miiska.). Hoos imaashada (under the influence) waxaa lagu sifeyaa marka sarkaal ka tirsan dugsiga hortiisa lagu muujiyo calaamadaha adeegsiga qaldan ee qamrada sida, balse kuma eka, dhac dhaca, indhaha gaduudan, urka qamrada, qalqalka, xasilooni darrada, xasuus la’aanta, aflagaadada, hurdada fasalka ama dabeecad kasta oo kale ee aan caadi u ahaynardayga.Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

11. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Mukhadaraadka Marka Laga Reebo Tubaakada ama Qamrada**
    Isticmaalka, haysashada, iibinta, qarsiga ama qeybinta mukhadaraad kasta oo la kantaroolo waa mamnuuc marka laga reebo daawada la soo qoro ee qofka la siiyo sida waafaqsan siyaasadaha u dagsan dagmada. Ardayga ma haysan karo, ma adeegsan karo, ma gudbin karo, iskuma dayi karo in uu gudbiyo, ma qarsan karo, ama kuma “sakhraami” karo mukhadaraad kasta oo sharci darro ah/waxyeelo geysato, waxyaabaha la jiido, kiimikada baddasha caatifadda qofka, ama maadada laga dhigo sida maadada lagu mirqaamo ama maadada baddasha caatifadda qofka.Ardayga ma haysan karo ama ma gudbin karo qalabka mukhaadaraadka iyo/ama qalabka, sida warqadaha lagu duubo.Hoos imaashada waxaa lagu sifeyaa marka sarkaal ka tirsan dugsiga hortiisa lagu muujiyo calaamadaha ku xadgudubka mukhadaraadka sida, balse kuma eka, dhac dhaca, indhaha gaduudan, urka mukhadaraadka, qalqalka, xasiloni darrada, xasuus la’aanta, aflagaadada, hurdada gudaha fasalka ama dabeecad kasta oo kale ee aan gaar ahaan caadi u ahayn ardayga. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

12. **Muujinta Jeceelka Jirka**
    Waxaa la mamnuucay muujinta jeceelka jirka sida, kumana eka, shumiska, barbaarista, dharbaaxyada, ama jiijiidka ka dhexeeyo ardayda. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

13. **Cadaabidda**

    Lama ogola in ardayga uu kadeedo,cabsi geliyo, muujiyo cadaawad, xumeeyo, yasso, kiciyo, daandaansado, dabagalo, ama cabsi geliyo qof ku sugan xerada dugsiga, hanti uu leeyahay ama kantaroolo dugsiga dagmada, ama, iyadoo aan la fiirinin goobta; goob ay ka socoto tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabad ka baxsan manhajka, ama brograam kale ama hawl kale ama carqaladeeyo jawiga dusiga. Xagga ujeedadaan, cadaabidda waxaa ka mid ah: isgaarsiinta, falalka lagu gudbiyo elataroonigga; hoos gelinta; aflagaadada; macluumaadka qoran; wararaka ama falalka sharaf tirka; fadeexada; qaadashada ama muujinta sumadaha, calaamadaha, battanada, dharka, ama labbiska; ama dhaqan kale oo laga soo jeediyo afka ama jirka sida, balse kuma eka, kuwa ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, abtirsiinada, jinsiga, waddaniyadda, diinta, itaal darrida, da'da, iyo/ama aqoonsiga jinsiga, ujeedada ama saamaynta tahay (1) in la sababo ama la rabo in la sababo in arday kale ama shaqaale kale lagu dhalliyo in uu u cabsado naftiisa; (2) la sababo ama la rabo in la sababo cadaawad dhallisa ama jawi waxbarashada oo ku dhisan xumaan loo geysto arday kale ama shaqaale kale oo ka tirsan dugsiga; (3) la sababo ama la rabo in la sababo in la carqaladeeyo hawsha waxbarashada; (4) si aan macquul ahayn loo farageliyo shaqada manhajka ardayga, shaqada lala sameeyo ee ku saabsan manhajka ama shaqada dheeraadka ku ah manhajka; ama (5) si aan macquul ahayn saameyn lagu yeesho

fursadaha waxbarashada ardayga. Waa la mamnuucay isticmaalka isgaarsiinta jirka, afka, qoraalka, ama elataroonigga si loo dhaliyo cabsi iyo/ama si loo abuuro waxbarashada ku dhisan cabsi iyo cadaawad ama jawi shaqo, iyadoo aan la muujinin hub iyo iyadoo aan dhibanaha loo geysanin weerarka jirka.

14. **Digniinta Beenta, Hanjabaadda Bambada, Carqaladeynta Dugsiga, Dabka/Dabka aan la Fasixin iyo/ama Haysashada Waxyaabaha Lagu Shiddo Dabka**

Hanjabaad kasta (afka, qoraal ama elataroonig) uu sameyo qof in uu bam soo tuuri doono ama adeegsan doono maadooyin kale ama qalab si uu wax u qarxiyo, gubo, khasaaro u geysto dhismaha dugsiga ama hantida dugsiga, ama dhibaato u geysto ardayda ama shaqaalaha waa la mamnuucay. Ardayga ma bilaabi doono mana ka qeybgeli doono dab been abuur ah ama digniinta bambka ama hanjabaad kale oo loo geysto amaanka dugsiga. Sida waafaqsan XEERKA LA BADDALAY EE OHIO 2917.31 qalalaasaha loo geysto dugsiga waxaa loo qaadan kara in ay tahay dambi culus.

Ardayga ma sababi karo in uu si la taaban karo ama maadiyan u carqaladeyo ama ma hor istaagi karo hawlaha sharciga waafqasan, nidaamka ama shaqada dugsiga isaga oo adeegsanaayo gacan qaad, xoog, qeylo, jujuub, hanjabaad, cabsi gelin, cabsi, diidmo qabooban, khayaano, la noqoshada wararka ama dabeecad kasta oo kale. Ardayga ma bilaabi karo ama ma wareejin karo warbixin ama digniin ku saabsan dab la soo sheegay ama soo socda, qarax, dambi ama musiibo kale isaga/iyada oo ogsoon in warbixinta ama digniinta noocaas ah tahay been.

Ardayga ma kicin karo mana isku dayi karo in uu kiciyo dab aan loo haysanin amar mana ku dhaqaaqi karo mana isku dayi karo in uu ku dhaqaaqo falalka dabka. Ardayga ma haysan karo waxyaabaha lagu shido dabka, taraqa ama shay kasta oo kale oo loo adeegsado in lagu shido dab. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

15. **Labiska aan Habboneyn**

Ardayda waxaa laga filayaa in ay u hoggaansamaan sharuudaha barnaamijkena waxbarashada ee u haysta in heerarka labiska ka mid yahiin qeybaha lagama maarmaanka u ah barnaamijyadooda (tusaale: safarada dibadda, kooxaha jimicsiga, barnaamijyada shaqada, shaybaarada, iwm.).

Waa mamnuuc labiska lagu muujiyo gafka ama loo adeegsaday sawiro ama luqad lagu muujiyay gaf, kana mid ah aflagaado, hadalka naceebka, qaawanaan, qamro, tubaako, mukhadaraad, qoriga xabbadka ka dhacdo, ama maado la xariirto, waa la mamnuucay. hawlaha sharci darrada waa mamnuuc

Xaaladaha loo qaadan karo in ay halis/carqalad ku yahiin ardayga soo qaata labis gaar ah ama tinta u soo sameysto moodo gaar ah, waxaa dhici karto in ardaygaas laga dalbado in uu xisadaas qaato labis kale iyo/ama waxyaabaha lagu celiyo timaha.

Ardayda ma qaadan karaan shay qariya aqoonsigooda ama mukdi geliya wijigooda, marka laga reebo asbaabta la xariirta diinta iyo/ama caafimaadka u baahan. Haddii ay ogol yahiin madaxda dhismaha, koofiyadaha iyo daboolka madaxa waa in la arki karo wijiga, iyo dhagaha.

Ardayda looma ogola in ay qaataan labbis soo saara jirkooda ama hoosta laga qaato. Ardayda looma ogola in ay haystaan ama isticmaalaan busto maalinimada dugsiga.

Ardayda waxaa lagu soo dhaweynaa in ay soo jeediyaan iyaga oo adeegsada habka u gaarka ah, isla markaasna u hoggaansama heerarka iminka jira oo ku saabsan qaadashada labbiska ku habboon meelaha dadweynaha.

16. **Qalabka Isgaarsiinta aan Fiilada Lahayn (Wireless Communications Devices) (WCD)/Madadaalada iyo Isticmaalka Farsamada**

Ardayga ma adeegsan karo qalabka isgaarsiinta aan fiilada lahaynama qalabka madadaalada waqtiyada waxbarashada haddii uusan ogolaanin macalinka.

Qalabka aan lahayn fiilada waa walab soo saara baaq la maqli karo, gariir, bandhiga fariin, ama si kale u yeera ama gaarsiiya isgaarsiin qofka iska leh. Qalabka soo socdo waa tusaalooyin ku saabsan WCDyo: telefoonada gacanta aan ku shaqeynin fiilada, kaaliyeyaasha dijitalka qofka (PDAyada), telefoonada "smartphones", qalabka WiFi ama qalabka hirarka balaaran, raadiyaha labada dhinac, akhriyeyaasha-e ama qalabka la mid ah ama qalabka soo saarka fiidiyowga, labtobyada, tabletyadaiyo qalabka kale ee u ogolaada qofka in uu qoro iyo/ama gudbiyo, waqti dhab ah ama la daahiyay, dhawaaqa, fiidiyowga ama sawirda aan dhaqaaqin, qoraalka, ama macluumaadka kale. Ardayda ma adeegsan karaan Isgaarsiinta Hawada inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama hawl uu dugsiga kafaalo qaaday si uu u galo iyo/ama u daawado bogagga internetka ee laga yaabo in laga hor istaagay ardayda ku sugan dugsiga.

Ardayda waxaa laga mamnuucay in ay adeegsadaan qalabka Isgaarsiinta Hawada si ay u qabsadaan, u duubaan ama u gudbiyaan erayada, sawirada (sida maqalka), qoraalka (sida sawirada/fiidiyowyada) ama macluumaad kaleoo ku saabsan arday kale, xubin ka tirsan shaqaalaha ama qof kale oo ku sugan dugsiga ama inta uu ku sugan yahay hawl la xariirta dugsiga, isaga oo aan horay u bixinin ogeysiis toosan ama ogolaasho toosan u haysanin qabsashada, duubidda ama gudbinta erayada ama sawirada noocaas ah. Ardayda waxaa kaloo mamnuuc ka ah in ay adeegsadaan Isgaarsiinta Hawada si ay u qabsadaan iyo/ama u gudbiyaan macluumaadka imtixaanka ama macluumaad kasta oo kale una adeegsadaan siyaabo ku dhisan been abuur, xatooyo, khayaano, ama daacad darro. Sido kale, ardayda waxaa laga mamnuucay in ay adeegsadaan Isgaarsiinta Hawada si ay u helaan macluumaadka noocaas ah.

WCDyada, sida, balse kuma eka kuwa ku shaqeeyo kaamerada, lama haysan karo, lama shiddi karo ama lama isticmaali karo waqti kasta, xaalad kasta oo ka jirta dugsiga, kana jirto filasho macquul ah in la dhowro asturnaanta qofka(musqualaha,qubeyska,qolalka sanduuqa). Haddii lala kulmo, in haysashada qalabka aan fiilada lahayn ku abuurto sii jeedin, carqaladhalista ammaanka ama sugidda hantida dugsiga (sida baabuurta dagmada ku shaqeyso), waxaa dhici karto in qalabka noocaas ahlala wareego. Sarakiisha dugsiga kama noqon doonaan mas'uul amaanka qalabka hawada ee lala wareego. Ardauda waxay farsamada dugsiga u adeegsan doonaan si waafaqsan Board Policy (Siyaasadda Dugsgia)iyo Administrative Guidelines (Tilmaamaha Maamulka). Board of Education (Siyaasadda Guddiga Waxbarashada): 5136 iyo AG 5136).

17. **Khayaanada/Been Abuurka Warqadaha iyo/ama Iska Dhigidda Qof Kale**

Ardayda waa in aysan ka qeyb qaadanin dabeecadda khayaanada, ama bixinta warar been ah. Ardayda kama been abuuri karaan saxiixyada waalidka, ilaaliyaha, ama macalinka, mana iska dhigi karaan waalidiinta, ilaaliyeyaasha, ama macalimiinta taasoo ujeedadeeda tahay in la khayaano sarakiisha dugsiga. Waxyaabahaan la mamnuucay waxaa ka mid ah ardayda kaalmeyso ama si un uga qeybqaadata jebinta sharcigaan.

18. **Dabeecadda Caasinimada/Carqaladeynta iyo/ama Isticmaalka Af Xumada**

Amar diididda waxaa lagu sifeyaa diidmada in laga jawaabo iyo/ama in uu u hoggaansamo codsiyada macquulka ah, qaanuunka, ama waxa uu ka dalbado macalinkiisa/macalinkeeda, maamulaha, tababaraha, la-taliyaha hawlaha ka baxsan manhajka, shaqaalaha ama waalidiinta ku shaqeyso iskaa wax u qabso.

Dabeecadda carqaladeynta waxaa lagu sifeyaa fal kasta oo carqaladeyso fulinta

nidaamsan ee hawsha dugsiga waxaana ka mid noqon kara dabeecadaha dibadda ka ah xerada. Ardayga ma qaadan karo dabeeca oo sida muuqata carqaladeysa nidaamka jawiga waxbarashada ama munaasabadda dugsiga kafaalo qaaday. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

Waa mamnuuc adeegsiga luqadda foosha xun, caayda ama aan habbooneyn, ha ahaato luqadda lagu hadlo, luqadda qoran ama qaabka elatarooniga, ama adeegsiga dhaqaaqa/falalka khaldan ee foosha xun ama caayda.

19. **GardareysigA/ Cabsi Gelinta/Jujuubka**

Dugsiyada Magaalada Westerville waxay u hoggaansan tahay siyaasadda ka soo horjeedo gardareysiga, sida waafaqsan ORC 3313.666.
Waa la mamnuucay kadeedka, cabsi gelinta, ama dabeecadda gardareysiga uu arday ka geysto Dugsiga Dagmada Westerville, dabeecadda noocaas waxay dhallin kartaa in ardayga laga qaado talaabo dishibiliin, sida ka-joojin iyo/ama in laga saaro dugsiga.
Kadeedka, cabsi gelinta, gardareysiga waxaa lagu sifeyaa:
ficil kasta oo lagu talogalay oo qoran, laga sheegay afka, elataroonig, la sawiray ama jir ahaan la geysto uu arday ama koox arday u muujiyo arday kale in ka badan hal jeer iyo dabeecadda waxyeelo gaarsiiso madaxa ama jirka ardayga (ardayda) kale oo, in ku filan culus, lagu celceliyo ama soo noqnoqota iyo abuurta jawi cabsi gelisa, handadaad ama jawi waxbarasha oo xumaan ku dhisan iyo/ama munaasabo uu dugsiga u kafaalo qaaday arday (ardayda) kale;

Gardareysiga, cabsi gelinta ama kadeedka waxaa kaloo ka mid ah dagaalka ka dhaca xariirka shukaansiga. Gardareysiga waa laga mamnuucay hantida dugsiga ama meelaha ku dhinac yaal dugsiga iyo munsaasabadaha dugsiga kafaalo qaado, marka la saaran yahay gaadiidka dugsiga keeno, ama meelaha baska dugsiga rasmi ahaan u joogsado.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo ardayda waa in ay la xariiraan agaasimaha dhismahooda ama qofka loo xil saaray in ay soo sheegaan asluubta lagu guul dareysto sida hoos timaado ka-reebidaan. Shaqaalaha dugsiga waa in ay maamuleyaasha dugsiga u soo sheegaan dhacdooyinka gardareysiga. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo jooga, ama si kastaba ha ahaato, ka qeybgala jebinta sharcigaan.

Madaxa guddiga waxbarashada waxaa bar ka bar sannadka la siiyaa soo koobid qoran oo ku saabsan dhamaan dhacdoyinka la soo sheegay kaddibna soo-koobidaan waxaa la soo geliyaa boggena internetka. Liiska wuxuu ku ekaan doonaa tirada falalka la xaqiijiyay ee la xariira kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga, haddii ay ka dhacday gudaha fasalka, hantida dugsiga, tagidda iyo ka soo noqoshada dugsiga, ama munaasabadaha dugsiga kafaalo qaaday.

Mar kasta, nooc kasta hawlaha kadeedka waa mamnuuc. Ma jiro arday loo ogol yahay in uu qorsheeyo, dhiiri geliyo, ama ka-qeybgalo kadeed. Kadeedka waxaa lagu sifeyaa fullinta fal ama jujuubka qof kale, sida dhibanaha, si loo fulliyo ficil kasta oo laga bilaabo fasalka, koox ama urur oo sabab u ah ama abuurta halis la taaban karo in ay waxyeelo gaarsiiso madaxa ama jirka qof kale. Ruqsadda, ogolaashada, ama qaadashada halista uu qaato qofka loo geysto kadeedka ma yareyn doonto waxyaabaha laga reebay. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo jooga, ama si kastaba ha ahaato ka qeybgala jebinta sharcigaan.

Taageero la siiyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Kadeedka W.C.S. (W.C.S. Anit-Harassment Policy) 5517, Guddiga wuxuu horumariyaa hababka ka-hortagga aqoonta (preventative educational measures) si loo ogaado dhaqamada takoorka ee sharci darrada ah. Maamulaha ama cidda loo xil saaray waxay tababar ku habboon siin doonaan dhamaan xubnaha ka tirsan bulshada dugsiga dagmada oo ku saabsan sida loo fulliyo siyaasaddaan iyo tilmaamaha la socdo. Dhamaan tababarka ku saasban siyaasadda Guddiga waxay ahaan doontaa mid ku habboon da'da iyo nuxurka.

SIYAASADDA GUDIGA 5517.01 - GARDAREYSIGA IYO NOOCYADA KALE DABEECADDA WEERARKA
Tixraaca qodobka sharciga #19

Guddiga Waxbarashada waxay ballan ku qaaday in ay dhamaan ardayda siiso jawi wax lagu barto oo amaan ah, wanaagsan, ku fiican soo saarka, oo kobciya. Guddiga waxay dhiiri gelisaa horumarinta xariirka wanaagsan ee ka dhexeeyo xubnaha bulshada dugsiga.

Kadeedka, cabsi gelinta, gardarada loo geysto ardayga, ama ha geystaan arday kale, shaqaalaha, ama dhinacyo saddaxaad, si adag ayaa loo mamnuucay mana loo dulqaadan doono. Ka reebanaantaan waxaa ka mid ah dabeecadda dagaalka, dagaalkajirka, afka, iyo ku xadgudubka nafsiga, iyo dagaalka laga kiciyo xariirka ballanka gudahiisa. Guddiga Waxbarashada uma dulqaadan doonto baaqyada, faalada, cago jugleynta, ama falalka sababa ama ku cago jugleya dhaawaca loo geysto jirka ama xaqira qofka. Siyaasadaan waxaa lagu dabaqaa dhamaan hawlaha ka socdo Dagmada, kana mid ah hawlaha ka socdo hantida dugsiga ama marka loo socdo ama laga soo noqonaayo dugsida, iyo kuwa ka dhaca dibadda hantida dugsiga haddii ardayga ama shaqaalaha uu ku sugan yahay hawsha ama munaasabadaha dugsiga mas'uulka ka yahay, dugsiga ogolaaday ama la xariirta dugsiga, sida safarada dibadda ama munaasabadaha atleetikada marka ardayda hoos yimadaan kantaroolka dugsiga, saran yahiin baabuurka dugsiga, ama marka qof ka tirsan shaqaalaha dugsiga ka qeybgalo shaqada dugsiga.

Siyaasadaan waxaa la soo saaray kaddib lala tashtay waalidiinta, shaqaalaha Dagmada, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, ardayda, iyo xubnaha bulshada sida ku qoran R.C. 3313.666 iyo Siyaasadda Modelka Guddiga Waxbarashada Gobolka (State Board of Education's Model Policy).

Kadeedka, cabsi gelinta, ama gardareysiga waxaa lagu macneyaa:

A. Fal kasta oo si ula kac ah loo qoro, laga sheego afka, elataroonig, ama fal kasta oo jirka loo adeegsado uu arday ama koox arday u muujiyaan arday kale in ka badan hal mar, markaasna dabeecaddaas dhibaato u geysato madaxa ama jirka ardayga (ardayda) kale taasoo in ku filan darran, lagu celceliyo, ama lagu adkeysto kaddibna abuurta jawi waxbarasho oo cabsi gelisa, u cago jugleysa, ama xumeyso ardayga (ardayda) kale; ama.

B. Gacan qaadka ka jira xariirka shukaansiga.

"Falka elataroonigga" waxaa loola jeedaa falka la geysto marka la adeegsado telefoonka gacanta, kombuyutar, warqad, qalabka isgaarsiinta qofka, ama qalabka isgaarsiinta elataroonigga kale.

Dabeecadda dagaalka waxaa lagu sifeyaa sida aadaab darrada lagu celceliyo in ku filan, ama in ku filan culus, sida darran u saameyso fiyoobida waxbarashada, jirka, ama caatifadda ardayga. Dabeecadda noocaan ah waa qaab ka mid ah qaababka cabsi gelinta iyo kadeedka, inkastoo aan loo baahneyn in ay ku saleysnaato astaamaha sharciga badbaadiyo, sida kacsiga, isirka, midabka, qaranka asal ahaan loo dhashay, xaaladda guurka, itaal darrida, ama kacsiga qofka. Waxaa ka mid ah, balse kuma eka, dabeecadaha sida dabagalka, gardareysiga/gardareysiga internetka, cabsi gelinta, handadaadda, qasabka, aflagaadada, dulmiga, cago jugleynta, iyo jujuubka.

Kadeedka, cabsi gelinta, ama gardarada waxaa kaloo loola jeedaa falalka lagu gudbiyo elataroonigа [sida internetka, emailka, telefoonka gacanta, qalabka dijitalka qofka haysto (PDA), ama qalabka gacanta lagu qaato ee hawada mara] uu arday (ardayda) ama koox arday u muujiso arday (ardayda) kale in ka badan hal mar iyo dabeecadda dhibaatada u geysata madaxa amajirka arday kale taasoo in ku filan culus, lagu adkeysto, saamaysa dad badan kaddibna ardayga (ardayda) kale ku dhalisa jawi waxbarasho ku dhisan cabsi gelin, cago jugleyn, ama ku xadgudub.

Arday kasta ama waalidka/ilaaliyaha ardayga aaminsan in iyada/isaga ahaaday ama yahay dhibane loo geystay dabeecadda dagaalka waa in uu isla markiiba xaaladda u soo sheego maamulaha dhismaha amakaaliyaha maamulaha ama Agaasimaha. Ardayga wuxuu kaloo arrimaha u soo sheegi karaa macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga ee mas'uul ka noqon doono in ay ogeysiyaan maamulaha ku habboon ama sarkaalka Guddiga. Ashtakada ka soo horjeeda maamulaha dhismaha waa in loo gudbiyo Agaasimaha. Ashtakada ka soo horjeedo Agaasimaha waa in loo gudbiyo Madaxa Guddiga.

Arday kasta waxaa lagu dhiri gelinaa, xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha waxaa laga rabaa, in uu soo sheego xaalad kasta ay iyaga aaminsan yahiin in ay tahay dabeecad dagaal oo loo geystay arday. Waxaa dhici karto in warbixin la gaarsiiyo kuwa kor lagu aqoonsaday.

Waxaa isla markiiba la baari doonaa dhamaan ashtakooyinka ku saabsan dabeecadda dagaalka ee laga yaabo in ay jebin karaan siyaasadaan. Agaasimaha dhismaha ama maamulaha ku habboon wuxuu diyaarin doonaa warbixin qoran oo ku saabsan barista kaddib marka la dhamaystiro. Warbixinta noocaas waxaa ka mid ah natiijadaha ka soo baxa xaqiiqada, go'aanka haddii falalka kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga la xaqiijiyay, iyo, marka falalka la mamnuucay la xaqiijiyay, tallada faragelinta, kana mid ah falka dishibiliinka waxaa lagu darri doonaa warbixinta. Meelaha ku habboon, warbixinta waxaa lagu soo lifaaqin doonaa oraahyada qoran ee marqaatiga.

Haddii baarista ay ka soo baxdo in lala kulmay kadeed, cabsi gelin, iyo/ama gardareysi/gardareysiga internekta lagu geystotalaabo elataroonig ama wax kale, waxay dhalin doontaa in si degdeg ah oo ku habboon wax looga qabto iyo/ama laga qaado talaabo dishibiliin. Tan waxaa ka mid noqon kara ka-joojinta ama ilaa ka-saaridda ardayda, ilaa ruqseynta shaqaalaha, ka reebidda waalidiinta, martida, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, iyo qandaraasleyaasha, iyo ka-qaadida mansab kasta oo rasmi ah iyo/ama in xubnaha Guddiga laga codsado in ay is casilaan. Waxaa kaloo dhici karto in shakhsiyaadka lagu wareejiyo sarakiisha hirgelinta sharciga.

Haddii, inta uu socdo baaritaanka ficilka la soo sheegay ee ku saabsan kadeedka, cabsi gelinta iyo/ama gardareysiga/gardareysiga internetka, Agaasimaha ama maamulaha ku habboon aaminsan yahay in aadaab darrada la soo sheegay laga yaabo in ay abuurtay jawi waxbarasho ku dhisan cadaawad lagana yaabo in ay tahay kadeed takoor sharci darro ah oo ku saleysan Dabaqadda la Badbaadiyo (Protected Class), Agaasimaha wuxuu falka gardareysiga iyo/ama kadeedka u sheegi doonaa mid ka mid ah Saraakiisha u Hoggaansamida Ka Soo Horjeeda Kadeedka (Anti-Harassment Compliance Officer) si loo baaro sida waafaqsan hababka ku qoran Siyaasadda (Policy) 5517 - Ka Soo Horjeedka Kadeedka (Anti-Harassment).

Ka aargudashada qof kasta, oo soo sheego, ama loo meeleeyo in uu soo sheegay, soo gudbiya ashtako, ama si kale uga qeybgalo baaritaan ama baaritaan ku lug leh eedeynta dabeecadda dagaalka waa la mamnuucay mana loo dulqaadan doono. Aar gudashada noocaas waxaa loo qaadan doonaa jebin culus oo loo geysto siyaasadda Guddiga taasoo ka madax banaan haddii ashtakada la caddeyn karo. Waa in aar gudashada la tuhunsan yahay loo soo sheego isla sida dabeecadda weerarka. Aargudashada waxay dhallin kartaa in laga qaado talaabo dishibiliin sida lagu muujiyay kor.

Sidoo kale, waa mamnuuc in si ula kac ah loo soo jeediyo warbixin been ah oo ku saabsan kadeedka, cabsi gelinta, gardareysiga iyo/ama dabeecadda dagaalka mana loo dulqaadan doono. In si ula kac ah loo sameeyo warbixin been ah waxay dhallin karta in qofka laga qaado talaabo dishibiliin sida kor lagu tilmaamay.

Haddii arday ama shakhsi kale aaminsan yahay in ay jirto dabeecad dagaal, iyadoo aan la fiirinin haddii ay hoos timaado sifo gaar ah, iyada/isagawaa in uu soo sheego una ogolaado maamulka in uu go'aan ka gaaro talaabada ku habbon ee laga qaado.

Dagmada waxay fullin doontaa xiiladaha faragelinta (AG 5517.01) si ay dhibanaha ama qofka kale uga badbaadiso kadeedka cusub ama dheeraadka ah, cabsi gelinta, ama gardareysiga iyo aargudashada ka dambeyso warbixinta noocaas.

Siyaasadaan looma tarjumi karo in wax lagu yeeleeyo xuquuqda Baddalaaddii Kowaad (First Amendment) ee ardayda (taasoo ah, in la mamnuuco isdhaafsiga madaniga ee sida wanaagsan looga fakaray, ama dooda, la fuliyo waqtiyo iyo meelo ku habboon inta lagu jiro maalin dugsiyeeda waxaana badbaadiyo sharciga Gobolka iyo Federaalka).

Qofka soo ashtakooday waxaa la ogeysiin doonaa wixii ka soo baxay baarista, iyo sida ku habboon, talaabada dib u toosinta ee laga qaaday. Baarista kaddib haddii, la xaqiijiyo falalka gardarada ee ka soo horjeedo arday gaar ah, agaasimaha dhismaha ama maamulaha ku habboon wuxuu ogeysiin doonaa haayahawaalidka/ilaaliyaha dhibanaha wixii meesha ka soo baxay. Marka la gaarsiinaayo ogeysiiskaas waa in laga taxadiro in la xushmeeyo xuquuqda asturnaanta sharciga ee qofka geystay kadeedka noocaas ah, cabsi gelinta, iyo/ama gardarada.

Baarista kaddib haddii, falalka kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardarada uu geysto arday gaar ah la xaqiijiyo, agaasimaha dhismaha ama maamulaha ku habboon wuxuu qoraal ahaan ogeysiin doonaa waalidka/ilaaliyaha qofka geystay dhibaatada wixii ka soo baxay. Haddii ciqaabta dishibiliinka la saaro ardayga noocaas ah, ogeysiiska waxaa la soo raacin doonaa sharaxaadda dishibiliinka noocaas ah.

Ashtakooyinka

Ardayda iyo/ama waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda waxay soo gudbin kaaraan warbixin ku saabsan kadeedka, cabsi gelinta, ama gardarada la tuhunsan yahay. Warbixinada noocaas ah waa in ay ahadaan kuwo macquul ah oo la taaban karo waana in lagu soo daro shakhsiga (shakhsiyaadka) ku lugta leh, tirada inta jeer iyo meelaha ay ka dhacday dabeecadda la soo sheegay, qofka bartilmameedka u aha kadeedka la tuhunsan yahay, cabsi gelinta, iyo/ama gardarada, iyo magacyada arday kasta iyo shaqaalaha marqaatiga ka aha. Waxaa dhici karto in warbixinta noocaas ah loo gudbiyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha dugsiga, waxaana isla markiiba loo gudbin doonaa agaasimaha dhismaha si uu u fiiriyo, baaro, ugana qaado talaabo.

Ardayda, waalidiinta/ilaaliyeyaasha, iyo shaqaalaha dugsiga waxay soo gudbin karaan ashtakooyin aan rasmi ahayn ama aan la ogeyn cidda soo gudbisay oo ku saabsan dhaqan ay iyaga u haystaan in uu ku dhisan yahay kadeed, cabsi gelin, iyo/ama gardareysi, iyaga oo afka uga sheego macalin, maamulaha dugsiga, ama shaqaale kale oo ka tirsan dugsiga. Ashtakada noocaas ah ee aan rasmiga ahayn waa in ay macquul tahay lana taaban karo waana in lagu soo darro shakhsiga (shakhsiyaadka) ku lug leh, tirada inta jeer iyo meelaha ay ka dhacday dabeecadda, qofka bartilmameedka u ahaa kadeedka la tuhunsan yahay, cabsi gelinta, iyo/ama gardarada, iyo magacyada ardayga laga yaabo in uu ku lug leeyahay ama shaqaalaha marqaatiga. Xubinta shaqaalaha dugsiga ama maamulaha loo gudbiyo ashtako aan rasmi ahayn ama aan la aqoonin cidda soo dirtay waa in uu isla markiiba ashtakada ka sameeyo qoraal kuna daro macluumaadka la siiyay. Warbixintaan qoran waxaa isla markiiba gudbin doono xubinta shaqaalaha dugsiga iyo/ama maamulaha, waxayna u gudbin doonaan agaasimaha dhismaha ama qofka isaga/iyada mattasha si ay u fiiriyaan, baaraan, kana qaadaan talaabo.

Dadka sameya ashtakooyinka aan rasmiga ahayn sida kor ku qoran waxay codsan karaan in shaqaalaha dugsiga iyo maamulaha (maamuleyaasha) la gaarsiiyo ashtakada asturaan magacooda. Waa la fiirin doonaa ashtakooyinka aan la ogeyn qofka soo gudbiyay waxaana laga qaadi doonaa talaabo macquula si arrintaas looga hortaggo, ilaa laga qaadaayo talaabada nooxaas ah in (1) aysan kashifin isha soo gudbisay ashtakada, iyo in (2) la waafajiyo xaqa uu ardayga (ardayda) lagu eedeyay in uu galay falka kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardarada, uu leeyahay in la mariyo sida sharciga u dagsan

Marka qofkasoo jeediyo ashtakada aan rasmiga ahayn codsado in la qariyo, baarista ashtakada noocaas ah waa in loo soo koobo sida ku habboon lana tixgeliyo qarinta ashtakada. Xadidaadda noocaas ah ee loo sameeyo baarista waxaa ka mid noqon kara in ashtakada lagu soo koobo fiirin fudud oo laga sameyo ashtakada taasoo hoos timaado helitaanka warar dheeraad ah iyo/ama la noqoshada ardayga soo gudbiyay ashtakada xaaladda ah in warbixintiisa (warbixinteeda) la qariyo.

Asturnaanta/Qarsoodiga

Dugsiga Dagmada wuxuu xushmeyn doonaa asturnaanta ashtakoodaha, shakhsiga (shakhsiyaadka) lagu soo eedeyay ashtakada, iyo marqaatiyada ilaa inta suurtogalka ah, sida waafaqsan waajibaadka sharciga ah ee saran Guddiga in ay baarto, qaado talaabo ku habbon, iyo in ay u hoggaansanto waajibaadka ka saran waxyaabaha la ogaado ama daaha laga qaado. Dhamaan diiwaanka la soo saaro sida hoos timaado siyaasadaan iyo tilmaamaha maamulka la xariira waxay ahaan doonaan sir ilaa heerka sharciga ogol yahay.

Sharuudaha Warbixinta

Ugu yaraan sannad barkii, Maamulaha wuxuu Madaxa Guddiga siin doonaa war kooban oo qoran oo ku saabsan dhamaan dhacdooyinkii la soo sheegay wuxuuna warka kooban soo gelin doonaa bogga internetka Dagmada (haddii uu mid jiro). Liiska waxaa lagu soo koobi doonaa tirada falalka la xaqiijiya sida kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardarada, ha ka dhaceen gudaha qolka fasalka, hantida dugsiga, inta loo socdo ama laga soo noqonaayo dugsiga, ama marka lagu sugan yahay munaasabadaha uu dugsiga kafaalo qaaday.

Eedaha ku saabsan dambiga edeb darada iyo xumaanta loo geysto cunugga ee la tuhunsan yahay waxaa loo sheegi doonaa wakaaladda hirgelinta sharciga ee ku habboon iyo/ama Adeegyda Badbaadinta Cunugga (Child Protective Services) sida waafaqsan sharciga. Shaqaalaha Dagmada waxay la shaqeyn doonaan baaritaanka ay qaadaan wakaaladaha noocaas ah.

Ka Hortagga

Shaqaalaha Dugsiga Dagmada, ardayga, ama qofka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso looma qabsan karo dacwadda madaniga la xariira burburinta ka dhallata soo sheegidda dhacdo sida waafaqsan siyaasadaan iyo R.C. 3313.666 haddii qofkaas soo sheego dhacdo la xariirta kadeed, cabsi gelin, iyo/ama gardareysi dhakhso lagu dhaqaaqo, daacad laga yahay, loona hoggaansamo hababka ku qoran siyaasaddaan. Ka xijaabidda dacwadda laguma dabaqi karo shaqaale, arday, ama qofka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso ee loo arko in uu si ula kac ah u sameyay warbixin been ah oo ku saabsan kadeed, cabsi gelin, iyo/ama gardaro.

Ogeysiinta

Sannad kasta, ogeysiiska siyaasadaan waxaa la garsiin doonaa, waxaana lagu soo daabici doonaa meelo la arki karo gudaha dhamaan dhismooyinka waaxyada dugsiga gudaha Dagmada waxaana lagala doodi doonaa ardayda, lana soo gelin doonaa buugaagta macalinka, ardayga, iyo waalidka/ilaaliyaha. Ugu yaraan hal mar sannad dugsiyeed kasta, waalidka haaya ardayga ama ilaaliyaha ardayga waxaa loo diri doonaa oraah qoran oo sharaxda siyaasadda iyo ciqaabta ka dambeyso jebinta siyaasadda.

Waxaa dhci karto in oraahda la soo raaciyo kaararka warbixinta ardayga ama in lagu soo diro elataroonig ahaan.

Ardayda ku sugan Dagmada iyo waalidiinta haysa ama ilaaliyeyaasha waxaa, elataroonig ahaan, la siin doonaa siyaasadda iyo sharaxaad ku saabsan sida gardareysiga u culus yahay.

Bostarada xuquuqda Gobolka iyo Federalka ee ku saabsan takoorka iyo kadeedka ayaa iyagana lagu soo dhajin doonaa dhismo kasta. Dhamaan dadka cusub ee la shaqaaleeyo waxaa laga rabaa in ay fiiriyaan kaddibna saxiixaan siyaasadaan iyo hababka ashtakada la xariira.

Waxbarashada iyo Tababarka

Iyadoo taageersan siyaasadaan, Guddiga waxay horumarisay talabooyinka waxbarashada ka-hortagga si ay si wanaagsan ula socoto dabeecadda dagaalka, kana mid ah gardarada iyo gacan qaadka ka dhaca gudaha xariirka shukaansiga. Maamulaha ama qofka loo magacaabay wuxuu tababar ku habboon siin doonaa dhamaan xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada ee la xariirto hirgelinta siyaasadaan iyo

tilmaamaha maamulka. Dhamaan tababarada ku saabsan siyaasadda Guddiga iyo tilmaamaha maamulka iyo dabeecadda weerarka iyo guud ahaan gardarada, waxay ahaan doonaan kuwo ku habboon da'da iyo nuxurka.

Sannad kasta, Dagmada waxay dhamaan ardayda ku qoran Dagmada siin doontaa tababarka ku habboon da'da ee ku saabsan siyaasadda Guddiga, sida wada hadalka qorka ama afka xagga ciqaabta la xariirta jebinta siyaasadda ilaa heerka maaliyadda Gobolka ama Federaalka ku habboon yahiin ujeedadaan.

Ardayda ku jirta darajooyinka todobo (7) ilaa toban iyo labo (12) waxaa la siin doonaa tababar ku habboon da'dooda oo ku saabsan waxbarashada ka-hortagga gacan qaadka shukaansiga, waxaana ka mid ah sida loo aqoonsado calaamadaha digniinta gacan qaadka shukaansiga iyo astaamaha lagu yaqaan xariirka caafimaadka qaba. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha, ka codsada agaasimaha dhismaha ama qofka mattaloin la baaro qoraalada tababarka ka-hortagga dagaalka ee laga isticmaalo dugsiga, waxaa la siin doonaa fursad ay ku fiiriyaan qoraalada muddo macquul ah.

Dagmada waxay tababaro, tababaro gaaban, iyo/ama koorsooyin ku saabsan siyaasadaan siin doontaa shaqaalaha dugsiga iyo dadka iskaa wax u qabso ku shaqeeyo ee xariir toos ah la leh ardayda, ilaa xad maaliyadda Gobolka ama Federaalka ku habboon yahiin ujeedadaan. Waqtiga shaqaalaha dugsiga geliyeen barnaamijyadaan tababarka waxaa loo xisaabi doonaa sharuudaha waajibka waxbarashada sii socota.

Sida waafaqsan Siyaasadda Guddiga 8462, Maamulaha wuxuu fiirinta ee ku saabsan gardareysiga iyo qaababka kale kadeedka ku dari doonaa tababarka loo baahan yahay xagga ka hortagga ku xad gudubka cunugga, dagaalka, iyo ku xadgudubka maadada iyo horumarinta koriimada wanaagsan ee dhallinta.
Agaasimaha wuxuu soo saari doonaa nidaamka maamulka si loo hirgeliyo siyaasadaan. Nidaamka waxaa ka mid noqon doono soo sheegidda iyo hababka baarista, hadba sida loogu baahdo. Waa in la raaco habka ashtakada uu dajiyo Maamulaha.

R.C. 3313.666, 3313.667
Siyaasadda Qaabka Guddiga Waxbarashada Gobolka (2007)
La Baddalay 6/9/14

SIYAASADDA GUDDIGA 5517 - KA HORTAGGA KADEEDKA
Tixraaca qodobka sharciga #19

Oraahda Siyaasadda Guud

Waa siyaasadda Guddiga Waxbarashada in ay xajiso jawiga waxbarashada iyo shaqada oo ka madax banaan dhamaan qaababka kadeedka sharci darrada, kana mid ah kadeedka jinsiga. Ballankaan waxaa lagu dabaqaa dhamaan hawlgalada, barnaamijyada, iyo hawlaha Dugsiga Dagmada. Dhamaan ardayda, maamuleyaasha, macalimiinta, shaqaalaha, iyo dhamaan shaqaalaha dugsiga kale waxay qeybsadaan mas'uuliyadda iska ilaalinta, niyad jebinta, iyo soo sheegidda nooc kasta oo ka mid ah kadeedka sharci darrada ah. Siyaasaddaan waxaa lagu dabaqaa dabeecadda sharci darriada ee ka dhacda hantida dugsiga, ama meel kale haddii dabeecadda noocaas ay dhacdo hawl uu mas'uul ka yahay Guddiga.

Guddiga wuxuu si xooggan u hireglin doonaa mamnuuca ka soo horjeedo kadeedka takoorka ee ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, jinsiga (sida jihada jinsiga iyo aqoonsiga labka dhedigga), itaal darrida, da'da, diinta, abtirsiinada, amamacluumaadka geneetikada (wadajir ahaan, "Dabaqadaha la Badbaadiyo"), ee badbaadin ka hela sharciyada xuquuqda madaniga Federaalka (halkaan lagu tilmaamo "kadeedka sharci darrada"),iyo wuxuu dhiirigeliyaa kuwa ku jira bulshada Dugsiga Dagmada iyo sidoo kale dhinacyada saddaxaad, ee dareensan in la xumeyay in ay raadsadaan kaalmo si loo saxo dhibaatooyinka noocaas. Guddiga wuxuu baari doonaa dhamaan eedeynta kadeedka iyo, marka la soo qaado kiisaska maadiyan la caddeyn karo kadeedka sharci darrada, Guddiga wuxuu qaadi doonaa talaabo degdeg ah si uu u soo gabogabeeyo kadeedka, hor istaago in aysan dib u dhicin, iyo hagaajiyo waxyeeladeeda. Dadka loo arko in ay ka qeybqaateen kadeedka sharci darrada waxaa laga qaadi doonaa tialaabada dishibiliinka ku habboon.

Xagga siyaasadaan, "bulshada Dugsiga Dagmada" (School District community) waxaa loola jeedaa ardayda, maamuleyaasha, iyo aqoonyaanka iyo shaqaalaha la qariyo, iyo sidoo kale xubnaha Guddiga, wakiilada, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, qandaraasleyaasha, ama dadka kale ee hoos yimaada kantaroolka iyo kormeerka Guddiga.

Xagga siyaasadaan, "dhinacyada saddaxaad" waxaa ka mid ah, balse kuma eka, martida iyo/ama dadka soo booqda hantida Dugsiga Dagmada (tusaale ahaan dadka qudbadaha ka jeediya, ka-qeybgaleyaasha kooxaha cayaartoyda iska soo horjeeda, waalidiinta), iibiyeyaasha ganacsiga la sameeya, ama raadiya in ay ganacsi la sameyaan, Guddiga, iyo dadka kale ee xariirka la sameeyo xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada munaasbadaha la xariira dugsiga (ha ku sugnadeen hantida Dugsiga Dagmada ama haddii kale).

Jebiinta Kale ee Siyaasadda Ka Soo Horjeeda Kadeedka

Guddiga wuxuu kaloo qaadi doonaa talaabo degdeg ah si uu talaabo dishibiliin uga qaado shakhsiyaadka ka qeybgala talaabadaha la mamnuucay ee soo socda.

A. In laga aargutto qof soo gudbiyay warbixin ama soo gudbiyay ashtako sheegata kadeed sharci darro ah, ama sida marqaati ka qeybgalay baarista kadeedka.

B. Soo gudbinta warbixin xun ama la ogsoon yahay in uu been yahay ama ashtakada kadeed aan sharci ahayn.

C. Tixgelin la'aanta, in aan in ku filan la baarin, ama dib u dhigidda baaritaanka eedeynta kadeedka sharci darrada, marka mas'uuliyadda soo sheegidda iyo/ama eedeynta baarista kadeedka qeyb ka yahiin waajibaadka kormeerka saaran qofka.

Sifeynta

Gardareysiga

Gardareysiga wuxuu gaaraa heerka kadeedka sharci darrada marka hal qof ama ka badan si joogto ah iyo si ku celcelis ah waxyeelo gaarsiiyaan jirka ama dhibaato ku abuuraan madaxa mid (1) ka mid ah ama ka badan ardayda ama shaqaalaha iyo in gardareysiga ku saleysan yahay hal (1) ama ka badan Kooxaha la Badbaadiyo (Protected Classes) taasoo ah, sifooyinka ay badbaadiyaan sharciyada xuquuqda madaniga Federaalka. Waxaa lagu sifeyaa sida dabeecad aan la rabin laguna celceliyo qoraal ahaan, afka, ama dabeecadda jirka, kana mid ah cabsi gelinta, aflagaadada, ama baaqa liididda, uu geysto qof qaangaaray ama arday, taasoo darran ama in ku filan balaaran si ay u abuurto jawi cabsi gelin, cadaawad, ama xumaan xagga aqoonta ama shaqada; ku abuurta fahmo darro ama dullinimo; ama si aan macquul ahayn u farageliso dugsiga qofka ama shaqada uu qabto ama ka qeybgalo; kuna lug leh:

A. dheesha;

B. cabsi gelinta;

C. cabsi gelinta;

D. dabagalka;

E. dabagalka-internetka;

F. gardareysiga internetka;

G. dagaalka gacan qaadka;

H. xattooyada;

I. kadeedka jinsiga, diinta, ama isirka;

J. liididda dadweynaha hortooda; ama

K. burburinta hantida;

"Kadeedka" waxaa loola jeedaa cabsi gelinta, aflagaadada, ama baaqa liididda, isticmaalka farsamada, ama qoraalka, afka ama dhaqaajinta jirka ee loo jediyo arday ama shaqaale ka tirsan dugsiga taasoo:

A. gelisa ardayga ama shaqaalaha dugsiga cabsi macquul ah uu ka qabo in waxyeelo la gaarsiiyo qof ahaantiisa/ahaanteeda ama burbur loo geysto hantidiisa/hantideeda;

B. natiijadeeda tahay in ay maadiyan farageliso shaqada waxbarashada ardayga, fursadaha, ama manaafacaadka, ama shaqada uu qabto shaqaalaha; ama

C. natiijadeeda tahay in ay maadiyan carqaladeyso nidaamka uu ku shaqeeyo dugsiga.

Kadeedka Jinsiga

Sida waafaqsan Title VII of the Civil Rights Act (Cutubka VII ee Sharciga Xuquuqda Madaniga) ee 1964 iyo Title IX of the Educational Amendments (Cutubka IX Baddalaadda Waxbarashada) ee 1972, "kadeedka jinsiga" waxaa lagu sifeyaa:

Baaqa jinsiga aan la soo dhaweynin, codsiyada axsaanka jinsiga, ama dabeecadda afka ama jirka lana xariira jinsiga, marka:

A. Aqbalaadda dabeecadda noocaas waxaa loo sameyaa si dadban ama si toosan qodob ama xaalad la xariirta shaqada qofka, ama xaaladda fasalka, brograamka waxbarashada, ama hawsha.

B. Gudbinta ama diidmada dhaqanka noocaas uu qofka geysto waxaa loo adeegsadaa sida aasaaska shaqada ama go'aanka wabarashada ee saameya qofka noocaas ah;

C. Ujeedada dabeecadda noocaas ama saamaynta faragelinta ku leedahay shaqada qofka ama shaqada waxbarashada qofka; abuurista jawiga cabsi gelinta, cadaawadda, ama u gafida shaqada, iyo/ama jawiga waxbarashada; ama faragelinta awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograamka waxbarashada ama hawsha.

Kadeedka kacsiga waxaa ka mid noqon kara dabeecaadda qofka ha ahaado nin ama ha ahaato naag loona geysto qof la jaad ah ama ka jaad ah.

Falalka la mamnuucay ee la midka ah kadeedka jinsiga waxay qaadan karaan qaabab kala duwan. Tusaalooyinka noocyada dabeecadda lagu tilmaami karo kadeedka jinsiga waxaa ka mid ah, balse kuma eka:

A. Baaqa jinsiga aan la soo dhaweynin, casumaadyada, dalabyaada, iyo shukaansiga.

B. Xariirka jirka iyo/ama jinsiga aan la rabin.

C. Cabsi gelinta ama hoos gelinta in shaqada qofka, mushaarka, darajada aqoonta, barmoosinta, shaqada fasalka ama hawlaha, xaaladda aqoonta, ka-qeybgalka cayaaraha ama brograamyada dheeraadka ku ah manhajka ama munaasbadaha, ama xaaladaha kale shaqada ama waxbarashada waxyeelo la gaarsiin doono haddii aan la ogolaanin baaqyada jinsiga.

D. Warar jinsi oo afka laga sheego balse la soo dhaweynin, sida faalada sawirada jinsiga ee ku saabsan jirka qofka, labbiska, muuqaalka, ama hawlaha jinsiga; isticmaalka aan la soo dhaweynin liididda luqadda jinsiga, kaftanka ama hoos geliska; dhawaaqyada soo jeedinta aflagaadada aan la soo dhaweynin ama foorida; dirista telefoonada fisqiga.

E. Waxyaabaha ku baaqa jinsiga, sawirada, cajalooyinka fiidiyowga, duubitaanka maqalka ama suugaanta, laga helo jawiga shaqada ama waxbarashada, ee laga yaabo in ay ceebeyso ama u gafto dadka.

F. Taabasho aan la rabin aan habbooneyn, salaaxid, ama qajaruufo; dhaqaaq ceyb ah.

G. Sasaanka dhaqanka, sideedaba ahaan karto mid qarsoon, laga dhadhansan karo jinsiga iyo loogu talogalay in ay abuurto ama dhalliso fahmo darro iyo/ama liididda loo geysto qof kale.

H. Wararka tashiila hawlaha jinsiga qofka ama taariikhda jinsiga, ama wararka ku saabsan hawlaha jinsiga qofka ama taariikhda jinsiga.

I. In shaqaalaha Dagmada ama xubin kale oo qaangaaray kana tirsan bulshada Dugsiga Dagmada si aan habbooneyn u soo galo booska u gaarka ah iyo nolosha ardayga.

J. Weerarka afka, aan afka ahayn ama jirka, cabsi gelinta, ama cadaawadda ku saleysan jinsiga ama noocyada jinsiga aan lugta ku lahayn jinsiga.

Ma aha in dhamaan dabeecadaha u muuqdo sida jinsiga yahiin kadeedka jinsiga sharci darrada. Dhaqanka ku saleysan jinsiga ama ku saleysan jaadka qofka waa in uu ahaado mid darran, balaaran, oo joogto ah ilaa ay si xun u saameyso, yareyso, ama u diido qofka in uu shaqeysto ama waxbarto, ama ilaa heer ay ka abuurto jawi waxbarasho ama shaqo oo ku dhisan cadaawad ama xumaan, ama ilaa heer loogu talogalay in ay, ama dhalliso in ay u diido ama yareyso awoodda ardayga u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto brograamka waxbarashada ama hawlaha.

XASUUS: Macalin kasta, maamule, tababare, ama madax kasta oo ka tirsan dugsiga oo jinsi kala qeybgala arday wuxuu kaloo dambiile ka yahay eedeynta "dagaalka jinsiga" sida ku qoran Xeerka la Baddalay Ohio (Ohio Revised Code) 2907.03. Arrinta ogolaashada ma aha munaasab xagga eedeynta dambiga noocaas.

Kadeedka Isirka/Midabka

Kadeedka isirka la mamnuucay waxaa lala kulmaa marka dhaqanka jirka, afka, ama aan laga soo jeedinin afka lana soo dhaweynin ku saleysan yahay isirka qofka ama midabka iyo marka ujeedada dhaqanka ama dhalliso in ay farageliso shaqada ama waxbarashada qofka; abuurto jawi shaqo ama/iyo waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf; ama farageliso awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograamka waxbarashada ama hawsha. Kadeedka noocaas waxaa lala kulmi karaa marka dhaqanka ku beegan yahay sifooyinka isirka ama midabka qofka, sida aflagaadada isirka, naaneesta sida dadban loola jeedo noocyada, waxyaabaha lagu yaqaan qofka, iyo/ama tixraaca xun ee la xariira caadada isirka.

Kadeedka Diinta (Caqiidada)

Kadeedka diinta la mamnuucay waxaa lala kulmaa marka dhaqanka jirka, afka, ama aan laga soo jeedinin afka lana soo dhaweynin ku saleysan yahay diinta ama caqiidada qofka iyo marka ujeedada dhaqanka ama dhalliso in ay farageliso shaqada ama waxbarashada qofka; abuurto jawi shaqo ama/iyo waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf; ama farageliso awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograamka waxbarashada ama hawsha. Kadeedka noocaas waxaa lala kulmi karaa marka dhaqanka ku beegan yahay sifooyinka hiddaha diinta qofka, labbiska, ama magacyada dambe, iyo/ama ku lug leedahay aflagaadada loo geysto diinta.

Kadeedka Asal Qaranka

Kadeedka asal qaran/abtirsiino ee la mamnuucay waxaa lala kulmaa marka dhaqanka jirka, afka, ama aan laga soo jeedinin afka lana soo dhaweynin ku saleysan yahay asalka qaranka qofka ama abtirsiino iyo marka ujeedada dhaqanka ama dhalliso in ay farageliso shaqada ama waxbarashada qofka; abuurto jawi shaqo ama/iyo waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf; ama farageliso awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograamka waxbarashada ama hawsha. Kadeedka noocaas waxaa lala kulmi karaa marka dhaqanka ku beegan yahay sifooyinka asal qaranka qofka ama abtiirsiinada, sida faalada xun ee ku saabsan hiddaha, habka hadalka, luqadda, magacyada dambe, ama aflagaadada isirka.

Kadeedka Itaal Darrida

Kadeedka itaal darrida la mamnuucay waxay dhacdaa marka dhaqanka jirka, afka, ama aan afka laga soo jeedinin lana soo dhaweynin ku saleysan tahay itaal darrida qofka iyo marka ujeedada dhaqanka tahay ama dhalliso in ay farageliso shaqada qofka ama waxbarashada qofka; abuurto jawi shaqo ama/iyo waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf; ama farageliso awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograamka waxbarashada ama hawsha. Kadeedka noocaas waxaa lala kulmi karaa marka dhaqanka ku beegan yahay sifooyinka xaaladda itaal darrida qofka,

sida faalada xun ee laga bixiyo sasaanka hadalka, dhaqaaqa, naafonimada jirka ama cilladaha/muuqaalka, ama waxa la midka ah.

Soo Sheegidda iyo Ashtakooyinka Dabeecadda Kadeedka

Ardayda iyo dhamaan xubnaha kale bulshada Dugsiga Dagmada iyo dhinacyada saddaxaad waxaa lagu dhiirigelinaa in ay isla markiiba dhacdooyinka dhaqanka kadeedka u soo sheegaan macalinka, maamulaha, kormeeraha, ama sarkaalka kale Dagmada si Guddiga wax uga qabto dhaqanka ka hor inta aysan meel xun gaarin, balaaranin, ama joogto noqonin. Macalin kasta, maamule, kormeere, ama shaqaale ka tirsan Dagmada ama sarkaal la gaarsiiyo ashtakada noocaas waa in uu u gudbiyo Sarkaalka u Hoggaansamida Ka Soo Horjeeda Kadeedka ee Dagmada (District's Anti-Harassment Compliance Officer) marka ugu horeyso ee isaga/iyada u roon.

Xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada, kana mid ah ardayda, ama dhinacyada saddaxaad ee aaminsan in si sharci darro ah loo kadeeday waxay xaq u leeyahiin in ay adeegsadaan habka ashtakada Guddiga ee hoos ku qoran. Bilaabidda ashtakada, ha ahaato rasmi ama yeysan ahaanin rasmi, ma aha in ay si sun u saamayn doonto shaqada ama ka qeybgalka brograamyada waxbarashada ama brograamyada dheeraadka ku ah manhajka ee qofka soo jeediyay ashtakada. Inkastoo aysan jirin waqtiyo go'an oo lagu bilaabo ashtakooyinka kadeedka sida hoos timaado siyaasadaan, dadka waa in ay ku dadaalaan in ay soo gudbiyaan ashtakada sida ugu dhakhsiyaha badan kaddib marka lala kulmo dhaqanka inta la ogsoon yahay xaqiiqadaha lana heli karo marqaatiyada suurtogalka ah.

Haddii, inta uu socdo baaritaanka gardareysiga la soo sheegay, daneecadda weerarka iyo/ama kadeedka sida waafaqsan Siyaasadda 5517.01 - Gardareysiga iyo Qaababka Kale Dabeecadda Weerarka, Agaasimaha aaminsan yahay in dabeecad xumada la soo sheegay abuurtay jawi shaqo oo cadaawad ku dhisan iyo dhalliso kadeedka takoorka aan sharciga ahayn sida ku saleysan Protected Class (Dabeecadda La Badbaadiyo), Agaasimaha waa in uu falka gardareysiga,dabeecadda dagaalka iyo/ama kadeeddka u soo sheego Anti-Harassment Compliance Officers (Saraakiisha U Hoggaansamida Ka Soo Horjeeda Kadeedka) ee baari doono eedeynta sida waafaqsan siyaasadaan. Inta Compliance Officer (Sarkaalka u Hoggaansamida) baaraayo eedeynta, Agaasimaha wuxuu joojin doonaa baaritaankiisa/baaritaankeeda 5517.01 si uu u sugo warbixinta qoran ee Sarkaalka u Hoggaansamida. Sarkaalka u ogeysiin doontaa xaaladda baaritaanka 4362 kaddibna wuxuu isaga/iyada siin doonaa koobiga warbixinta qoran ee ka soo baxda.

<u>Saraakiisha u Hoggaansamida Ka Soo Horjeesashada Kadeedka</u>

Guddiga waxay dadka soo socdo u magacaawday in ay Dagmada uga shaqeyaan sida "Saraakiisha Ka Hortagga Kadeedka". Waxaa halkaan lagu magacaabaa "Saraakiisha u Hoggaansamida".

Agaasimaha Fullinta, Ilaha Aadanah/Shaqaalaha/Xariirka Shaqada
614-797-5700
936 Eastwind Drive
Westerville, OH 43081

Magacyada, mansabyada, iyo macluumaadka xariirinta shakhsiyaadkaan waxaa sannad kasta hal mar lagu soo daabici doonaa buugga waalidka iyo shaqaalaha iyo bogga internetka Dugsiga Dagmada.

Saraakiisha u Hoggaansamida waxaa la heli karaa saacadaha dugsiga/shaqadaa caadiga si loogala hadlo arrimaha la xariira kadeedka sharci darrada si ay u kaalmeyaan ardayda, xubnaha kale bulshada Dagmada, iyo dhinacyada kale ee raadsada taageero ama waano marka qof kale laga helo warar ku saabsan dhaqan "aan la soo dhaweynin" ama in ay si aan rasmi ahayn u soo dhexgalaan iyaga oo mattala qofka ku sugan xaaladahaas halkaas ay arrimaha dhallinin soo gudbinta ashtako rasmi ah iyo halka dhamaan dhinacyada ay heshiis ku yahiin in ay ka qeybgalaan habka aan rasmiga ahayn.

Saraakiisha u Hoggaansamida waxay ogolaan doonaan ashtakooyinka kadeedka sharci darrada ee toos uga timaada xubin ka socda bulshada Dugsiga Dagmada ama qof soo booqda Dagmada, ama helaan ashtakooyin horaantii loo gudbiyay maamulaha dhismaha dugsiga. Kaddib marka si toos ah la helo ashtakada ama la mariyo maamulaha dhismaha, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu bilaabi doonaa habka aan rasmiga ahayn ama habka rasmiga (taasoo ku xeran codsiga qofka soo sheegay kadeedka xaaladda kadeedka la soo sheegay), ama Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu qof cayiman u magacaabi doonaa in uu fulliyo hawshaas. Haddii ashtakada rasmi tahay, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu talooyin u diyaarin doonaa Maamulaha ama wuxuu kor ka eegi doonaa diyaarinta talooyinka noocaas uu soo diyaariyo qofka mattala. Dhamaan xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada waa in ay dhacdooyinka kadeedka iyaga loo soo sheego gaarsiiyaan Sarkaalka u Hoggaansamida muddo labo (2) maalin la shaqeeyo gudahooda kaddib marka uu ogaado dhacdada.

Shaqaale kasta oo ka tirsan Guddiga oo toos u arka kadeedka sharci darrada loo geysto arday waxaa waajib ku ah, sida waafaqsan siyaasadaan, in uu waxyaabaha uu arkay u sheego mid ka mid ah Saraakiisha u Hoggaansamida muddo labo (2) maalin la shaqeeyo gudahooda. Intaas kaddib, shaqaale kasta oo ka tirsan Guddiga ee arka fal kadeed sharci darro ah waxaa laga filaa in uu soo farageliyo si uu u joojiyo kadeedka, haddii xaaladaha ka dhigaan faragelinta wax halis ah, halkaas oo loo baahan yahay in xubinta shaqaalaha isla markiiba ogeysiiso shaqaalaha kale ee ka tirsan Guddiga iyo/ama saraakiisha hirgelinta sharciga xaafadda, sida lagama maarmaanka ah, in uu joojiyo kadeedka. Sidaas darteed, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattala waa in uu la xariiro ardayga, haddii uu jiro toban iyo sideed (18) sanno ama ka badan, ama waalidiinta ardayga haddii uu ka yar yahay toban iyo sideed (18) sanno, muddo labo (2) maalin dugsiyeed si loogu sheego iyada/isaga/iyaga ujeedada Guddiga ka leedahay in ay baarto aadaab darrada la soo sheegay, sida waajibka saaran Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattala in uu fulliyo baaritaan lana raaco dhamaan hababka ku qoran ashtakada rasmiga.

Habka Baaritaanka iyo Ashtakada

Shaqaale kasta ama xubin kasta oo ka tirsan bulshada Dugsiga Dagmada ama dhinac saddaxaad (tusaale ahaan, qofka soo booqda Dagmada) oo aaminsan in isaga/iyada loo geystay kadeed sharci darro ah ama aargudasho wuxuu xalka ashtakada u isaga/iyada qabto ka raadsan kartaa hababka aan rasmiga ahayn ama rasmiga ah sida ku sharaxan hoos. Intaas kaddib, habka baarista sheegashooyinka kadeedka ama aargudashada iyo habka soo jeedinta go'aanka ku saabsan haddii sheegashada kadeedka sharci ahaan la mamnuucay ama aargudashada maadiyan hoos lagu soo bandhigay.

Bacdamaa xasaasiyad ku wareegsan tahay ashtakooyinka kadeedka sharci darrada iyo aargudashada, waa dabacsan yahiin waqtiyada lagu bilaabo hawsha ashtakada; hase ahatee, shakhsiyaadka waa in ay ku dadaalaan in ay soo gudbiyaan ashtako muddo soddon (30) maalin gudahooda kaddib marka lala kulmo dabeecadda inta xaqiiqada laga ogsoon yahay lagana heli karo marqaatiyada suurtogalka ah. Kaddib marka la bilaabo hawsha ashtakada rasmiga, baaritaanka waxaa lagu dhamaystiri doonaa waqtiga loo qabtay (caadi ahaan, muddo toban iyo shan (15) maalin la shaqeeyo laga bilaabo marka la helo ashtakada).

Hababka aan rasmiga ahayn iyo kuwa rasmiga ah ee ku qoran hoos looguma talogelin in lagu farageliyo xuquuqda qofka in uu dabagalo ashtakada sharci darrada kadeedka ama aargudashada un gudbiyo Waaxda Waxbarashada Mareykanka (United States Department of Education), Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights), Guddiga Xuquuqda Madaniga Ohio (“OCRC”).

Habka Ashtakada Rasmiga

Ujeedada habka ashtakada aan rasmiga ahayn waa in la joojiyo dabeecadda aan habbooneyn iyo in go'aanka lagu baaro laguna fududeeyo hab aan rasmi ahayn, haddii ay suurtogal tahay. Habka ashtakada aan rasmiga ahayn waxaa loo sameyay si fursad aan rasmi ahayn loo siiyo ardayga, xubin kale oo ka tirsan bulshada Dugsiga Dagmada, ama dhinac saddaxaad oo aaminsan in iyada/isaga si sharci darro ah loo kadeeday ama looga aargutay. Habkaan aan rasmiga ahayn looma baahna in uu u

horseedo gudbinta ashtakada rasmiga, waxaana loo adeegsan doonaa meesha dhinacyada [qofka la soo sheegay in uu yahay bartilmaameedka kadeedka iyo qofka la soo sheegay in uu yahay kadeedaha (kadeedeyaasha)] ku heshiyeen in ay ka qeybgalaan hawsha noocaas.

Shaqaalaha, xubnaha kale ee ka tirsan bulshada Dugsiga Dagmada, ama dhinacyada saddaxaad ee aaminsan in si sharci darro ah loo kadeeday ama laga aargutay waxay dhakhso ugu dhaqaaqi karaan habka ashtakada rasmiga iyo dadka xallinta ka raadiya habka aan rasmiga ahayn waxay codsan karaan in la soo afjaro habka aan rasmiga ahayn waqti kasta si loogu gudbo habka ashtakada rasmiga.

Hase ahatee, waa la baari doonaa dhamaan ashtakooyinka kadeedka ee ku lugta leh shaqaalaha dagmada, xubin kale oo qaangaar ah kana tirsan bulshada Dugsiga Dagmada, ama dhinac saddaxaad oo ka soo horjeeda arday. Sidoo kale, eedeynta kasta oo la xariirta dagaalka jinsiga waxaa loo baari doonaa si rasmi ah.

Sida talaabada hore ee la qaado, haddii qofka dareensan yahay in isaga/iyada si sharci darro ah loo kadeedo, isaga/iyadana awood u leedahay iyo dareensan tahay nabad geliyo in ay sidaas sameyso, qofka waa in uu u sheego ama ogeysiiyo kadeedaha in dabeecaddaas aan la soo dhaweynin iyo in la joojiyo. Waa in isgaarsiinta tooska noocaas loo isticmaalin daruufaha xallinta dagaalka jinsiga. Qofka soo ashtakooda waa in uu ka hadlo dabeecadda kadeedka la soo sheegay sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah kaddib marka ay dhacdo. Saraakiisha u Hoggaansamida waxay diyaar u yahiin in ay taageeraan iyo la talliyaan dadka marka ay qaadaan talaabadaan hore ama in ay farageliyaan qofka ay mattalaan haddii sidaas laga codsado. Qofka ay dhibeyso ama aan rabin in uu kadeedaha ogeysiiyo ashtakada uu isaga/iyada qabto lagama reebin in uu soo gudbiyo ashtakada aan rasmiga ahayn ama ashtakada rasmiga. Intaas kaddib, xagga qaar ka mid ah noocyada kadeedka sharci darrada, sida kadeedka jinsiga, Sarkaalka u Hoggaansamida waxaa dhici karto in uu kala talliyo isticmaalka habka ashtakada aan rasmiga ahayn.

Qofka aaminsan in isaga/iyada si sharci darro ah loo kadeeday wuxuu soo gudbin karaa ashtako aan rasmi ahayn, ama afka ama qoraal ahaan: (1) macalinka, shaqaale kale, ama maamulaha dhismaha; (2) si toos ah mid ka mid ah Saraakisha u Hoggaansamida; iyo/ama (3) Maamulaha ama shaqaale kale oo ka tirsan heerka Dagmada.

Dhamaan ashtakooyinka waa in loo gudbiyo mid ka mid ah Saraakiisha Ashtakada kaasoo keligii/keligeed fududeyn doonto xallinta aan rasmiga ahayn sida lagu sharaxay hoos, ama magacaabi doonto qof kale in uu fududeeyo xallinta aan rasmiga ahayn.

Habka ashtakada aan rasmiga ahayn ee Dugsiga Dagmada waxaa loo handasay in shaqaalaha, xubnaha kale ee ka tirsan bulshada Dugsiga Dagmada, ama dhinacyada saddaxaad ee aaminsan in si sharci darro ah loo kadeeday, fursado loo handasay in xal loo helo arrimaha ay qabaan. Sida ku xeran xaaladda ashtakada iyo rabbitaanka qofka sheegta kadeedka sharci darrada, xallinta aan rasmiga ahayn waxay ku lug leedahay balse kuma eka, mid ama ka badan kuwa soo socda:

A. In qofka loo sheego sida dabeecadda aan la soo dhaweynin loo gaarsiiyo qofka lagu eedeeyay kadeedka.

B. Qeybinta koobiga siyaasadda ka soo horjeedo kadeedka si loo xasuusiyo dadka ku sugan dhismaha dugsiga ama xafiiska meesha uu ka shaqeeyo ama tago qofka wax laga weydiiyo dabeecadiisa.

C. Haddii labada dhinnac ku heshiyaan, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu iskuduwi karaa ama wuxuu fududeyn karaa shir dhex mara qofka sheegta in la kadeeday iyo qofka lagu eedeyay kadeedka in uu ka shaqeeyo xallinta dhexmarta labada dhinac. Shirka noocaas ma aha mid ku habboon daruufaha ku lugta leh dagaalka jinsiga.

Inkastoo aysan jirin waqti loo qabto oo lagu xalliyo ashtakada aan rasmiga ahayn, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattalo wuxuu adeegsan doonaa awoodda uu isaga/iyada leedahay in ay iskudaydo in ay xalliso dhamaan ashtakooyinka aan rasmiga ahayn muddo toban iyo shan (15) la shaqeeyo gudahooda kaddib marka la helo ashtakda aan rasmiga ahayn. Dhinacyada aan ku qanacsaneyn natiijadaha ka soo baxa habka ashtakada aan rasmiga ahayn waxay ku dhaqaaqi karaan in ay soo gudbiyaan ashtako rasmi ah. Iyo, sida kor ku qoran, dhinacyada waxay codsan karaan in la joojiyo habka aan rasmiga ahayn waqti kasta si loogu gudbo habka astakada rasmiga ah.

Dhamaan waxyaabaha la soo saaray ee qeybta ka ah habka ashtakada aan rasmiga ahayn waxaa reeban doono Saraakiisha u Hoggaansamida sida waafaqsan siyaasadda reebashada diiwaanka Guddiga iyo/ama siyaasadda Diiwaanka Ardayga (Fiiri siyaasadda 8310 iyo Siyaasadda 8330).

Habka Ashtakada Rasmiga

Haddii ashtakada aan lagu xallinin habka ashtakada aan rasmiga ahayn, haddii mid ka mid ah dhinacyada codsaday in habka ashtakada aan rasmiga ahayn la soo af jaro si loogu gudbo habka ashtakada rasmiga, ama haddii qofka doorto in uu horaanta soo gudbiyo ashtako rasmi ah, waa la fullin doonaa ashtakada rasmiga.

Qof aaminsan in isaga/iyada loo geystay dhaqan/kadeed/aargudasho halkaan lagu tilmaamo sida "Ashtakoodaha", wuxuu ashtako rasmi ah, ha ahaato afka ama qoraal ahaan, u gudbin karaa macalinka, agaasimaha, Sarkaalka u Hoggaansamida, Maamulaha, ama shaqaale kale oo ka tirsan Dagmada. Bacdamaa xasaasiyad ku wareegsan tahay ashtakooyinka kadeedka sharci darrada iyo aargudashada, waa dabacsan yahiin waqtiyada lagu bilaabo hawsha ashtakada; hase ahatee, shakhsiyaadka waa in ay ku dadaalaan in ay soo gudbiyaan ashtako muddo soddon (30) maalin gudahooda kaddib marka lala kulmo dabeecadda inta xaqiiqada laga ogsoon yahay lagana heli karo marqaatiyada suurtogalka ah. Haddii Ashtakoodaha ogeysiiyo macalinka, agaasimaha, Maamulaha, ama shaqaale kale oo ka tirsan Dagmada, afka ama qoraal ahaan, xagga ashtako kasta ama kadeed ama aargudasho, shaqaalahaas waa in uu macluumaadka noocaas u sheego Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattalo muddo labo (2) maalin la shaqeeyo gudahooda.

Inta ay socoto hawsha, Sarkaalka u Hoggaansamida waa in uu dhinacyada ogeysiiyo xaaladda baaritaanka iyo habka go'aan gaarista.

Dhamaan ashtakooyinka rasmiga waa in lagu darro macluumaadka soo socda ilaa heer laga helo: aqoonsiga qofka la aaminsan yahay in uu ka qeybgalay, ama ka qeybgala, gafka aadab darrada/kadeedka/aargudashata; sharaxaad tafatiran oo ku saabsan xaqiiqada ashtakada ku saleysan tahay; liiska marqaatiyada suurtogalka ah; iyo go'aanka uu doono Ashtakoodaha.

Haddii Ashtakoodaha uusan rabin ama uusan awoodin in uu oraah qoran bixiyo sida macluumaadka kor ku qoran, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu tafaasiisha noocaas ku weydiisan doonaa wareysiga afka. Markaas kaddib, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu diyaarin doonaa soo koobid qoran oo ku saabsan wareysiga afka, kaddibna Ashtakoodaha waxaa la weydiin doonaa in uu xaqiijiyo saxnaanta eeda la soo sheegay kaddib marka la saxiixo warqadda.

Kaddib marka la helo ashtakada rasmiga, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu ka fakari doonaa haddii loo baahan yahay in talaabo la qaado inta lagu dhex jiro marxaladda baaritaanka si Ashtakoodaha looga badbaadiyo kadeed dheeraad ah ama aargudasho, sida, balse kuma eka, in Ashtakoodaha iyo/aama kadeedaha la soo eedeyay laga baddalo shaqada loo dhiibo ama jadwalka. Marka lagu hawlan yahay gaarista go'aanka, Sarkaalka u Hoggaansamida waa in uu la tashto Ashtakoodaha si loo qiimeeyo sida uu raali uga yahay talaabada la qaaday. Haddii Ashtakoodaha uusan rabin in uu ogolaado isbaddalka la soo jeediyay, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu weli qaadi karaa talaabadaha iyada/isaga u arko in ay ku habboon tahay kaddib marka uu la tashto Maamulaha.

Muddo labo (2) la shaqeeyo gudahooda kaddib marka la helo ashtakada, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattalo wuxuu bilaabi doonaa baaritaanka rasmiga si loo ogaado haddii Ashtakoodaha loo geystay gaf/kadeed/aargudasho.

Isla markaas, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu ogeysiin doonaa qofka lagu soo eedeysay in uu ka qeybgalay dhaqanka kadeedka ama aargudashada, oo halkaan lagu tilmaamay in uu yahay "Eedeysanaha", in ashtako la soo gudbiya. Eedeysanaha waxaa la ogeysiin doonaa xaaladda eedeynta, waxaa la siin doonaa koobiga tilmaamaha maamulka munaasabka ah, sida siyaasadda Ka Soo Horjeeda Kadeedka ee Guddiga. Qofka la soo dacweyay waa in sidoo kale la ogeysiiyo fursadda uu u leeyahay in uu jawaab qoran ka soo gudbiyo ashtakada shan (5) maalin oo la shaqeeyo gudahooda.

Inkastoo kiisaska qaar u baahan yahayiin waqti dheeraad ah, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattala wuxuu iskudayi doonaa in uu dhamaystiro baaritaanka eedeymaha ama kadeedka/aargudashada muddo toban iyo shan (15) maalin la shaqeeyo gudahooda kaddib marka uu helo ashtakada rasmiga. Baaritaanka waxaa ka mid noqon doono:

A. wareysiyada lala yeesho Ashtakoodaha;

B. wareysiyada lala yeesho Qofka Dacwadda loo Qabo;

C. wareysiyada lala yeesho marqaatiyada kale ee sida macquulka ah laga yaaboin ay hayaan macluumaad la xariira eedeynta;

D. tixgelinta warqado kasta ama macluumaad uu soo bandhigo Ashtakoodaha, Eedeysanaha, ama marqaati kale oo sida macquulka ah la aaminsan yahay in ay muhiim u yahiin eedeynta.

Gabogabada baarista, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattala wuxuu diyaarin doonaa iyo wuxuu diyaarin doonaa wuxuun Maamulaha u gudbin doonaa warbixin soo koobta caddeynta la soo aruuriyay inta ay socoto baaritaan taasoo bixisa talooyin ku saleysan baaritaanka iyo sifeynta kadeedka sharci darrada sida ku saleysan caddeynta iyo sifeynta kadeedka sharci darrada sida ku qoran siyaasadda Guddiga iyo sharciga Gobolka iyo Federaalka haddii Ashtakoodaha loo geystay kadeed sharci darro ah. Talooyinka Sarkaalka U Hoggaansamida waa in ay ku saleysan yahiin iskudarka xaaladaha, kana mid ah da'da iyo heerarka biseelka kuwa ku lugta leh. Si loo ogaado haddii lala kulmay kadeedka takoorka ama aargudasho, waxaa la adeegsan doonaa heerka caddeynta badan. () Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu la tashan doonaa qareenka sharciga Guddiga ka hor inta uusan dhamaystirin warbixinta ku socoto Maamulaha.

Haddii aysan jirin xaalado yareeya, muddo shan (5) maalin la shaqeeyo gudahooda laga bilaabo marka la helo warbixinta Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattala, Maamulaha waa in uu soo saaro go'aan kama dambays ah oo ku saabsan haddii ashtakada kadeedka tahay mid jirta ama waa in uu codsado baaritaan dheeraad ah. Koobiga go'aanka kama dambayska Maamulaha waxaa la siin doonaa Complainant (Ashtakoodaha) iyo Respondent (Eedeysanaha).

Haddii Maamulaha codsado baaritaan dheeraad ah, Maamulaha waa in uu sheego macluumaad dheeraad ah ee loo baahan in la soo aruuriyo, iyo baaritaanka dheeraadka ah waa in lagu soo dhamasytiro muddo shan (5) maalin la shaqeeyo gudahooda. Gabogabada baaritaanka dheeraadka ah, Maamulaha waa in uu soo saaro go'aan kama dambays ah oo qoran sida lagu sharaxay kor.

Go'aanka Maamulaha wuxuu ahaan doonaa kama dambays.

Guddiga wuxuu reebtay xaqa uu u leeyahay in uu baaro iyo in uu xalliyo ashtako ama warbixin ku saabsan kadeedka sharci darrada/aar gudashada iyaoo aan la fiirinin haddii xubinta bulshada Dugsiga Dagmada ama dhinaca saddaxaad ku eedeeyo kadeedka sharci darrada/aargudashada dabagalo ashtakada. Guddiga wuxuu kaloo reebtay xaqa uu u leeyahay in la fulliyo baaritaanka ashtakada rasmiga uu fulliyo qof

dibadda ka ah sida waafaqsan siyaasadaan ama habka kale sida Guddiga ama cidda mattasha u aragto in ay ku habboon tahay.

Asturnaanta/Qarsoodiga

Dugsiga Dagmada wuxuu adeegsan doonaa dhamaan dadaalka macquulka ah in la badbaadiyo xuquuqdaashtakoodaha, shakhsiga (shakhsiyaadka) lagu soo eedeyay ashtakada, iyo marqaatiyada ilaa inta suurtogalka ah, sida waafaqsan waajibaadka sharciga ah ee saran Guddiga in ay baarto, qaado talaabo ku habbon, iyo in ay u hoggaansanto waajibaadka ka saran waxyaabaha la ogaado ama daaha laga qaado. Dhamaan diiwaanka la soo saaro sida hoos timaado siyaasadaan iyo tilmaamaha maamulka la xariira waxay ahaan doonaan sir ilaa heerka sharciga ogol yahay.Hase ahatee, lama ballan qaadi kaaro in la qariyo. Dhamaan dadka soo ashtakooda ee ku dhaqaaqa habka baaritaanka rasmiga waxaa la ogeysiin doonaa in ay dhici karto in aqoonsigooda loo kashifo Qofka Dacwada Loo Haysto.

Inta baarista rasmiga socoto, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka isaga/iyada mattasha wuxuu dhamaan xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada iyo dhancyada saddaxaad ee la wareysto fari doonaa muhiimadda ay leedahay xajinta qarsoodiga. Qof kasta oo la wareysto sida qeyb ka tirsan baaritaanka kadeedka waxaa laga filaa in uusan kashifin macluumaadka uu isaga/iyada ogtahay ama isaga/iyada bixiso inta uu socdo baaritaanka.

Dhamaan diiwaanada dadweynaha la sameyay sida qeyb ka tirsan baaritaanka ashtakada waxaa hayn doono Sarkaalka u Hoggaansamida sida waafaqsan siyaasada haynta diiwaanada Guddiga Dugsiga. Diiwaanada loo haysto in ay yahiin diiwaanada waxbarashada ardayga sida waafaqsan *Sharciga Xuquuqda iyo Asturnaanta Waxbarashada Qoyska* ama sida hoos timaado sharciga diiwaanada ardayga Ohio waxaa loo hayn doonaa si waafaqsan qodobada sharciyada Federaalka iyo Gobolka.

Xayiraadda iyo Kor ka Eegidda

Guddiga wuxuu si xooggan u hirgelin doonaa waxyaabaha reeban ee ka soo horjeeda kadeedka, wuxuuna qaadi doonaa tallaabo ku habboon oo loogu talogalay in lagu joojiyo kadeedka iyo hor istaago kadeed hor leh. Iyadoo la dhowraayo mabaadiida nidaamka dagsan, jebinta siyaasadaan waxay dhalin kartaa in la qaado talaabo dishibiliin, taasoo gaari karta ilaa kana mid ah shaqo ka fadhiisinta shaqaalaha ama ka-joojinta/ka-saaridda ardayga. Dhamaan talaabada dishibiliinka waxaa la waafajin doonaa sharciga Gobolka lagu dabaqi karo iyo qodobada iskujirka waanwaanta heshiiska (heshiisyada) munaasabka ah. Marka la saaro dishibiliin, Maamulaha wuxuu tixgelin doonaa iskudarka daruufaha ku lugta leh xaajada, sida da'da iyo heerarka bislaanta kuwa ku lugta leh. Kiisaska, marka kadeedka sharci darrada aan maadiyan la taaban karin, Guddiga wuxuu ku fakari karaa haddii loo baahan yahay in dhaqanka la soo sheegay la mariyo dishibiliin sida waafaqsan siyaasadaha kale Guddiga, sida waafaqsan qodoobada heshiiska (heshiisyada) waanwaanta wada tashiga munaasabka ah.

Marka Guddiga ogaato in horay la qaaday talaabo lagu laga qaaday subin ka tirsan bulshada Dugsiga Dagmada, dhamaan cunaqabadeynta ku xiga uu Guddiga iyo/ama Maamulaha saaro waxaa si macquul ah loogu talogeli doonaa in ay soo afjarto dhaqanka noocaas, ka hortagto in ay soo noqonin, lana toosiyo waxyeeladeeda.

Aar Gudashada

Talaabo kasta oo aargudasho ah oo ka soo horjeedo qof soo gudbiyay warbixin ama soo gudbiya ashtako ku andaconeysa kadeed sharci darro ah, ama sida marqaati uga qeybgalay baaritaanka kadeedka waa laga mamnuucay.

Eedeynta La Midka ah Dhaaqanka Dambiga: Xumeynta Cunugga/Aadaab Darrada Jinsiga

Sharciga gobolka wuxuu rabaa in maclinka dugsiga ama shaqaalaha dugsiga ee ogsoon in cunugga itaalk darran aan weli gaarin labaatan iyo kow (21) ama cunugga ka yar toban iyo sideed sanno (18) uu dhibaato la kulmay ama cabsi ka qabo in la gaarsiiyo dhaawac xagga jirka ama madaxa, itaal darri ama xaalad sida macquulka ah tilmaanta xumaan ama dayac loo geysto cunugga in uu isla markiiba wakaaladda adeegyada caruurta ee dagmada u soo sheego waxa uu og yahay ama tuhunsan yahay. Haddii, inta uu socdo baaritaanka kadeedka, Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattalo haysto sabab uu ku aaminsan yahay ama tuhunsan yahay in dhaqanka la soo sheegay sida macquulka ah tilmaanto ku xadgudub ama dayaca Ashtakoodaha, waa in warbixin laga sameeyo waxa la ogaaday sida waafaqsan sharciga Gobolka iyo Siyaasadda Guddiga.

Sharciga gobolka wuxuu qaar ka mid ah xariirka ka dhexeeyo macalinka iyo ardayga ku sifeyaa "dagaalka jinsiga." Haddii Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattalo aaminsan yahay in Ashtakoodaha uu ahaa dhibanaha dambiga la geystay sida ku sifeysan Xeerka Dambiga Ohio, aqoonta noocaas waa in isla markiiba la ogeysiiyo hirgelinta sharciga xaafadda.

Warbixin kasta oo la gaarsiiyo wakaaladda adeegyada caruurta dagmada ama hiregelinta sharciga xaafadda ma joojin doonto Sarkaalka u Hoggaansamida ama waajibka qofka mattala iyo mas'uuliyadda ka saaran in uu sii wado baaritaanka ashtakada kadeedka. Inkastoo Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka mattala la shaqeyn karo wakaaladaha dibadda si loo fulliyo baaritaan isbarbar socda, marna ma dhici doonto in ku lug yeelashada wakaaladaha dibadda saameyaan baaritaanka kadeedka haddii aysan jirin sabab wanaagsan kaddib marka lala tashto Maamulaha.

Eedeynta ku Lugta leh Dabeecadda ku Xun Shaqada Tababarka/Ka Joojinta

Maamulaha wuxuu adeegsan doonaa foomamka loo sameeyay in uu Waaxda Waxbarashada Ohio siiyo warbixin ku saabsan arrimaha aadaab darrada ay geystaan xubnaha shaqaalaha qarsoon ee shattiga haysta laguna xakumay weerarka jinsiga, kaddibna, sida waafaqsan Siyaasadda 8141, waxay shaqaalaha noocaas ka joojin doonaan dhamaan waajibaadka ka saaran ama ku lugta leh daryeelka, haynta, ama kantaroolka cunug waqtiga inta ay socoto talaabada dambiga loo soo xeray qofkaas, loogu yeeray iyo/ama lagu eedeyay.

Waxbarashada iyo Tababarka

Guddiga, oo taageersan Anti-Harassment Policy (Siyaasadda Ka Soo Horjeedka Kadeedka) wuxuu horumariyaa talaabadaha waxbarashada ka-hortagga si loo abuuro dareenka laga qabo dhaqanka sharci darrada takoorka. Maamulaha ama qofka mattala waa in uu macluumaad ku habboon siiyo dhamaan xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada ee la xariira fullinta siyaasadaan iyo in uu tababar siiyo ardayda Dagmada iyo shaqaalaha halka ay ku habboon tahay. Dhamaan tababarka, iyo dhamaan macluumaadka, la bixiyo ee ku saabsan siyaasadda Guddiga iyo guud ahaan kadeedka, waxay ahaan doonaan kuwo ku habboon da'da iyo nuxurka.

R.C. 4112.02

20 U.S.C. 1400 et seq., Dadka la siiyo Waxbarashada Itaal DarridaSharciga Hagaajinta ee 2004 (IDEIA)
20 U.S.C. 1681 et seq.
29 U.S.C. 621 et seq., Sharciga Takoorka Da'da xagga Shaqada ee 1967
42 U.S.C. 2000d et seq.
42 U.S.C. 2000e et seq.
29 U.S.C 6101, Sharciga Takoorka Da'da ee 1975
29 U.S.C. 794, Sharciga Dayactirka ee 1973, la baddalay

42 U.S.C. §12101 et seq., Sharciga Mareykanka Itaalka Darran ee 1990, sida loo baddalay.
42 U.S.C. 1983
Baarista iyo Falanqeynta Ururka Guddiga Dugsiga Qaranka – Maajo, 2008

La Baddalay 6/9/14

20. **Waxyaabaha Qoriga Loo Ekeysiiyay**
Waxyaabaha hubka loo ekeysiiyay waa shay kasta oo u shabaha qori balse aan lahayn sifada qaraxa qoriga balse isticmaali kara qalabka moolada cabbeynta ama cadaadiska hawada oo lagu tuuro shay ama maado (sida qoryaha lagu cayaaro, qoryaha bb, qoryaha shay laga tuuro, qoryaha hawada iyo qoryaha kubadaha la midabeyay). Ardayga ma haysan karo, gacmaha kuma qaban karo, ama ma gudbin karo waxyaabaha u shabaha qoriga, kaasoo adeegsigiisa aan xariir la lahayn nidaamka waxbarashada. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

21. **Dhaqanka Jinsiga aan La Soo Dhaweynin/Kadeedka Jinsiga/Dagaalka Ballanka**
Baaqyada jinsiga aan la rabin iyo/ama kadeedka jinsiga, waxaa ka mid noqon kara codsiyada axsaanka jinsiga, dhaqanka jirka ama afka ama xariirka nooca jinsiga, kana mid ah kadeedka ku saleysan ahaashada ninka ama naagta taasoo abuurta jawi shaqo ama waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf, tusaale ahaan, kumana eka duridda, qabsashada, dharbaaxyada, boodboodka, jiijiidka, taabashada, ku rugashada, iyo/ama baaqyada ku jira faalada ama dhawaaqyada aflagaadada ama foorida, telefoonada fisqiga ama fariimaha qoranama cadaadiska si qofka uga qeybgalo jinsiga. Kadeedka kacsiga waxaa ka mid noqon kara dabeecaadda qofka ha ahaado jinsi kasta ahaato naag loona geysto qof la jaad ah ama ka jaad ah. Lama ogola baaqa jinsiga aan la rabin iyo/ama kadeedka jinsiga, waana la mamnuucay. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

Shukaansiga Xoogga waxaa lagu sifeyaa sasaan ka mid ah dabeecadda marka qofka uu adeegsado ama uu ku hanjabo in uu geysan doono ku-xadgudub xagga jirka, kacsiga, afka, ama shacuurta si uu u kantaroolo shukaansiga qofka. Qofka shukaansanaayo waa qof kasta, iyadoo aan la fiirinin jaadka uu yahay, kaasoo xarrir soke la leh qof kale, aasaasiyana waxaa lagu yaqaan filashada jeceelka ha ahaado lama filaan, dhab, ama muddo dheer. Lama ogola shukaansiga xoogga ah waana la mamnuucay. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

22. **Dhaawaca Culus ee soo Gaara Jirka**
Waxaa dhici karto in Agaasimaha uu muddo hal sanno ka saaro dugsiga ardayga dhibaatada culus u geysto jirka qof kale ama khasaaro. Dhibaatada culus ee loo geysto jirka dadka waxaa lagu sifeyaa: cudur kasta oo ku yimaada madaxa ama xaalad kasta oo oculus ee caadi ahaan u baahan in qofka la seexiyo isbitalka ama in qofka madaxa laga daweeyo muddo dheer; dhibaato kasta oo loo geysto jirka soona raaci karto halista dhimashada; dhibaato kasta oo loo geysto jirka soona raaci karto itaal darri joogto ah, ha ahaato qeyb ama dhamaan, ama ku lug yeelata xoogaa itaal darri ku meel gaar ah oo la taaban karo; dhibaato kasta oo ku timaado jirka oo ku lug yeelata xoogaa burbur joogto ah ama lug yeelato xoogaa burbur ku meel gaar aha o oculus; ama dhibaato kasta oo ku timaado jirka oo ku lug yeelata xanuun darran oo socda muddo dhalisa dhibaato la taaban karo ama ku lug yeelato xanuun aan istaagin oo socda muddo dheer. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

23. **Meelaha Aan La Geli Karin**
Ardayda waxaa laga mamnuucay meelaha aan la geli karin. Meelaha aan la geli karin waxaa lagu sifeyaa meelaha, gudaha ama dibaada dhismaha dugsiga, sida sarakiisha dugsiga ugu talogaleen sif ahaan ama waqtiga maalinimada, kana mid ah ka tagidda dhismaha dugsiga iyadoo aan la haysanin fasax inta uu socdo dusiga.

24. **Khamaarka**

Ardayda waxaa laga mamnuucay khamaarka. Khamaarka waxaa lagu sifeyaa cayaaraha la cayaaro si loo helo lacag ama fa'iido, sida, kumana eka, dhagaxyada kor loo tuuro, kaararka ama cayaarta turubka ee loo yaqaan bokarka. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

25. **Ka Dhigidda Badeeco**

Ardayda kama iibin karaan arday kale badeeco iyadoo aan fasax laga haysanin agaasimaha dhismaha ama qofka isaga/iyada mattala. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

26. **Jebinta Sharciyada Dugsiga**

Ardayga kuma guul dareysan karo in uu u hoggaansamo sharciyada iyo xeerka dugsiga ee loo dajiyay si loo sugo ammaanka loona fuliyo hawsha dugsiga.

Ardayda waxaa la siin doonaa kaararka aqoonsiga (I.D.) waxaana ka mid noqon doono magacooda, nambarka ID-ga ardayga iyo sawir. Kaararkaan waa in la qaatomar kasta inta uu ardayga ku sugan yahay dhismaha dugsiga, saacadaha dugsiga, hantida dugsiga ama marka uu tagaayo munaasabad kasta uu dugsiga kafaalo qaado. I.D.-ga waa in la soo celiyo haddii uu codsado shaqaale ka tirsan dugsiga ama sarkaal ka tirsan hirgelinta sharciga.

27. **Jebinta Sharciyada Baska**

Ardayga kuma guul dareysan karo in uu hoggaansamo sharciyada iyo xeerarka u dagsan baska dugsiga xeerka sida habboon loo dajiyay si loo sugo amaanka loona fuliyo hawsha dugsiga.

28. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta, ama Qeybinta Cayaaraha Dabka**

Waa mamnuuca adeegsiga, haysashada, iibka ama qeybinta dabka, kana mid ah balse aan ku ekeyn garnelada loo yaqaan "cherry bombs". Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

29. **Weerarka**

Ardayga ma geysan karo dhaawaca jirka ama uma dhaqmi karo siyaabo geysan karta hanjabaad si uu qof kale u gaarsiiyo dhaawaca jirka. Ardayga uma imaan karo in uu daawado iyo/ama kiciyo dagaal, mana ka hor istaagi karo shaqaalaha dugsiga in ay soo fargeliyaan, marka dagaal dhaco. Mamnuucaan waxaa soo gala ardayda kaalmeyso, joogta, ama si un uga qeybgala jebinta sharcigaan.

30. **Asluubta Aqoonta/ Aadaab Darrada**

Asluubta aqoonta waa mabda' muhiim ah oo ka jira Dugsiyada Magaalada Westesterville. Waxaa muhiim ah in ardayda la siiyo xirfadaha ay u baahan yahiin si ay u yeeshaan asluub ay ku soo bandhigaan waxa ay bartaan, isla sida ay muhiim ugu tahay ardayda in ay yeeshaan asluubta ay ku noqdaan muwaadiniin, bulsho ahaan, mas'uul ah. Ardayda waxaa laga filaa in ay soo saaraan hawl asal ah iyagoo aan ka qeybgelin aadaab darrada aqoonta. Aadaab darrada aqoonta waxaa lagu sifeyaa hawl kasta oo u badan in ay carqaladeyso asluubta aqoonta dugsiga dagmada, ama baddasho habka waxbarashada. Tusaalooyinka aadaab darrada aqoonta waxaa ka mid ah, balse kuma eka, la wareegidda shaqada qof kale, isbiirsiga (wada shaqeynta aan la fasixin), koobiyeynta shaqada arday kale, haysashada alaab aan la ogoleyn, iyo/ama dabeecad kale uu ardayga si xaq darro ah uga hor maro ardayda kale. Aadaab darrada aqoonta waxay ahaan kartaa mid lagu talogalay iyo/ama mid aan lagu talogelin. Waa lala kulmi karaa aadaab darrada aan lagu talogelin taasoo ugu wacan in aan lala soconin sharciyada gafka, qaladka laga fahmo sharuudaha koorsada ama tababarka leysu diro, ama diyaarin la'aan. Waxaa

muhiim ah in la xasuusto in aadaab darro kasta oo la xariirto aqoonta, ama ha lagu talogalo ama yaan lagu talogelin, waa jebin la jebiyay Xeerka Aadaabta Ardayga (Student Code of Conduct).

Raadomta/La Wareegidda

Sarakiisha Dugsiga waxay tixgelin doonaan da'da ardayga,ujeedada iyo cuslaanta jebinta la tuhunsan yahay marka la tixgelinaayo baaxadda iyo/ama qodqodidda baarista. Dhamaan baarista waxaa loo fulin doonaa ilaa inta ay lagama maarmaan u tahay in la baaro jebinta sharciga iyo xeerka u dagsan dugsiga.

Sarakiisaha dugsiga waxay baari karaan ardayga, waxaana ka mid ah, kumana eka, in ardayga uu dibadda u soo saaro jeebabkiisa ama iska-saaridda kabaha, waxyaabaha qofka leeyahay, kana mid ah kumana eka isgaarsiinta hawada iyo qalabka wax lagu keydsado, lokarada, miiska iyo/ama baabuurka (inta baabuurka fadhiyo hantida dugsiga) iyadoo aan fasax laga qaadanin ardayga. Waxaa la qaadi karaa talaabada noocaas ah marka sarakiisha dugsiga qabaan tuhun macquul ahin raadinta soo saari doonto jebinta sharciyada dugsiga, alaab la soo xaday ama shay ama maado laga yaabo in ay tahay sharci darro, halis u ah ardayga ama dadka kale, ama carqalad ku ah amaanka iyo nidaamka jawiga dugsiga. Ku guul dareysiga in si macquul ah loola shaqeeyo baarista macquulk ah waxaa loo qaadan doonaa diidmo waana jebinta Xeerka Dhaqanka Ardayga.

Ciqaabta ka Dambeyso Jebinta Sharciyada Dugsiga

Jebinta uu ardayga u geysto mid ka mid ah ama in badan oo ka mid ah Xeerka Dhaqanka Ardayga waxay dhalin doontaa talaabo dishibiliin. Diiwaanka talaabada dishibiliinka waxaa lagu hayn doonaa dugsiga la tago. Talaabada waxaa ka mid noqon kara, kumana eka: canaan laga soo jeediyo afka iyo/ama mid qoran; ka qaadidda fasaxa meesha baabuurka la dhigto; ka qaadidda shatiga lagu wado baabuurka; xabsi, dishibiliinka dugsiga kaddib, tafasiisha shaqada; adeegga bulshada; la wareegga waxyaabaha aan ku habbooneyn dugsiga; ka qaadidda axsaanka hawlaha manhajka iyo/amakuwa dheeraadka ku ah manhajka; lumista mansabyada hoggaaminta; lumista axsaanka lagu tago ama looga qeybgalo shirarka, xafladaha/xuska; xafladaha qalin jebinta; lumista tixgelinta saacadaha waxbarashada (darajooyinka); lumista abaal marinta, warqadaha, ama aqoonsiga; barnaamijka taakuleynta; xarunta barashada kale; ka joojinta dibadda dugsiga; ka saaridda degdegga; u diridda faragelinta, ka bixinta; ka saaridda joogtada ah iyo/ama ku wareejinta madaxda sharciga ee ku habboon.

Ardayda jebisa sharciyada dugsiga waxaa la siin doonaa ciqaab kala duwan hadba lagu sifeyay Siyaasadda Xeerka Asluubta (Code of Conduct) iyo sida ay u arkaan in ay ku habboon tahay sarakiisa dugsiga. Ujeedada ciqaabta waa in la hagaajiyo dabeecadda ardayda.

Dishibiliinka Ardayda Itaalka Darran

Waxaa la raaci doonaa hababka ka joojinta ama ka saaridda ardayda itaalka darran in aysan tagin ama ka qeyb gelin hawlaha manhajka iyo kuwa la socdo manhajka sida waafaqsan Sharciga Waxbarashada Dadka Itaalka Darran (Individuals with Disabilities Education Improvement Act) ee 2004, Qeybta 504 ee Sharciga Dayactirka ee 1973, Xeerka La Baddalay ee Ohio, iyo Heerarka Lagu Hawlgalka 2008 ee Wakaaladaha Waxbarashada Ohio (2008 Operating Standards for Ohio Educational Agencies) una adeegga Caruurta Itaalka Darran (Children with Disabilities) lana baddalay 2014 (Sharciyada 3301-51-01 ilaa 3301-51-09 iyo 3301-51-11 ee Xeerka Maamulka Ohio.

Ciqaabta Guddiga Sifeysay

1. **Tubaakada**

Talaabadaha dishibiliinka ee la xariira hirgelinta siyaasadaan waxay lagama maarmaan u yahiin horumarinta iyo xajinta jawi ku dhisan caafimaad, amaan ah oo ka madax banana tubaakada. Hirgelinta siyaasadaan ay ku dhaqaaqaan shaqaalaha waa in ay waafaqsan tahay iyo waa in ay xaq tahay lana fahmo kala duwanaanta koriimada ee u dhexeyso ardayda dugsiga hoose, dhexe iyo sare. Sidaas darted, sida uu rabo ORC 3313.751 (C)waxaa hoos lagu soo qoray talaabadaha dishibiliinka soo socda ee la xariira jebinta sharcigaan xagga cabidda sigaarka ama isticmaalka ama haysashada tubaakada, K-12.

GAFKA KOWAAD	Ilaa 2 Maalin OSS
GAFKA LABAAD	Ilaa 5 Maalin OSS
GAFKA SADDAXAAD	Ilaa 10 Maalin OSS

OSS = Ka Joojinta Dugsiga

Waxaa dhici karto in Agaasimaha ama qofka isaga/iyada mattashobaddalo ka-joojinta la siiyay ardayga haddii ardayga uu raali ku noqdo in uu tago kliinikada lama-isticmaali karo tubaadka ee loogu talogalay in lagu kaalmeeyo ardaygain uu joojiyo qiiqa.

2. **Mukhadaraadka marka laga reebo Tubaakada**

Haddii ardayga haysto, qarsado, ama iibiyo, ama la go'aansado in dabeecadda ay xariir la leedahay, isticmaalka sharci darrada ama marka si khaldan loo isticmaalo mukhadaraadka, khamrada (kana mid ah cabbitaanka laga helo qiyaas la cabbiri karo oo khamro ah kana mid ah, kuna ekeyn, "cabbitaanka u dhaw biirka" ama dawoyinka laga iibsado miiska) ama maadada la aaminsan yahay in ay tahay ama mattasha kiimikada baddasha caatifadda qofka, ama maado sarkhaamiso ama baddasha dareenka qofka, qalabka mukhadaraadka (paraphernalia) ama qalabka sida tubooyinka, waxa lagu qabto baranbarada, cirbadaha, cirbadaha leysku durro, warqadaha la duubo, qaadada kokaynka, qalabka, ama shay kasta oo kale oo caadi ahaan ama dhab ahaan loo adeegsado baako gelinta, qaadidda, siinta ama adeegsiga mukhadaraadka sharci darrada ah, ardayga waxaa laga joojin doonaa iyo/ama waxaa lagu talin doonaa in laga saaro taasoo u hoggaansan nidaamka dagsan iyo Xeerka Dhaqanka Ardayga #10 & #11.. Talaabadaha dishibiliinka waxaa loo fulin doonaa sida soo socota:

Gafka 1^{aad}– 10 maalin oo laga joojiyo dugsiga(la yareen doono ilaa shan (5) haddii ardayga uu ka qeybgalo qiimeyn iyo qorshaha faragelinta lagu taliyo ee la socdo sida uu qodob-qodob u soo qoro khabiirka aqoonta u leh caafimaadka madaxa/aqoonyaanka caafimaadka.)

Gafka 2^{aad}– 10 maalin oo laga joojiyo dugsiga(lagu taliyo in laga saaro)
Marka kiiska ku saabsan yahay haysasho si loo iibiyo ama loo gudbiyo mukhadaraadka sharci darrada, khamrada ama qalabka mukhadaraadka oo la aaminsan yahay in ay tahay ama laga dhigo sida mukhadaraadka, maamulaha ama qofka isaga/iyada mattalowuxuu ku talin doonaa in ardayga gudbiyay ama ku talo jiray in uu gudbiyo maadada noocaas ah in gafka ugu horeeyba laga saaro dugsiga.

Haddii la ogaado in ardayga haysto ama kantaroolo mukhadaraadka sharci darrada ah ama maado la aaminsan yahay in ay tahay ama laga dhigo sida kiimiko baddasha caatifada, maado sakhraamisa ama baddasha caatifada,iyo/ama uu isla maadadaas u sii gudbisay dad kale, waxaa dhici karto in la ogeysiiyo sarakiisha hirgelinta sharciga lagana

codsado in ay qaadaan talaabada ku habboon. Waxaa la sameyn doonaa dadaal si waalidiinta/ilaaliyeyaasha loo ogeysiiyo rabitaanka dugsiga in la ogeysiiyo saraakiisha hirgelinta sharciga iyo in waalidka (waalidiinta) la siiyo fursad ay meesha ku yimadaan marka sarakiisha hirgelinta sharciga ay wareysi ka qaadi doonaan ardaygooda.

Ciqaabta Dugsiga

1. **Adeegga Bulshada**

   Talo ahaan, go'aaminta in adeegga bulshada la siiyo ama la saaro arday lagu helay in uu jebiyay Xeerka Dhaqanka Ardayga iyo, haddii ay sidaas tahay, nooca iyo muddada adeegga bulshada la siiyo ama la saaro, Agaasimaha ama qofka uu Agaasimaha u xil saaro ayaa fiirin doono xaaladaha gaarka ah ee ardayga, nooca iyo cuslaanta Xeerka Dhaqanka uu ardayga jebiyay, iyo qodobada ka sii darri kara ama yareeyn kara. Maamulaha ama qofka mattala Maamulaha, hadba sida ay u gartaan, waxay dalban karaan in la saaro shardiga adeegga bulshada baddalkii la saari lahaa ka-joojin ama ka-saarid. Maamulaha ama qofka mattalo Maamulaha wuxuu la shaqeyn doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/ardayda si loo aqoonsado goobta adeegga bulshada. Ma aha in la siiyo adeegga bulshada inta ay socoto maalin dugsiyeedka.

2. **Xabsiga Ardayda**

   Ardayga looma diidi karo qado si loo ciqaabo. Ma aha in xabsiga macquulka ah, marka la gaaro dhamaadka maalin dugsiyeedka, yahay mamnuuc, hase ahatee xabsiga noocaas ah kama badan karo soddon (30) daqiiqo ardayda dugsiga hoose, afartan iyo shan (45) daqiiqo ardayda dugsiga dhexe, iyo hal (1) saac ardayda dugsiga sare. Marka ardayga ku jira dugsiga hoose la geliyo xabsiga gaaban dhamaadka maalinta, waa in horay loo ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha. Arday kasta oo lagu qaado baska dugsiga lagama reebi doono in uu raaco baska xabsiga daradiis haddii aan waalidiinta/ilaaliyeyaash aan horay loo siinin ogeysiis.

3. **Dishibiliinka Dugsiga Kaddib**

   Waxaa dhici karto in ardayda hoos timaado talaabada dishibiliinka la siiyo dishibiliinka dugsiga kaddib. Ardayda waxaa laga rabaa in ay keenaan buugaagta iyo alaabta barashada ee loo baahan yahay. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waa in ay qaataan mas'uuliyadda gaadiidka oo idil. Agaasimaha dhismaha/qofka loo magacaabay wuxuu adeegsan doonaa garashadiisa marka uu go'aansan doono maalmaha iyo waqtigyada dishibiliinka dugisga kaddib.

4. **Ka Saaridda Degdegga**

   "Ka Saaridda Degdegga" waxaa loola jeeda in ardayga laga saari kaaro hawlaha manhajka ama hawlaha dheeraadka ku ah manhajka haddii go'aan lagu gaaro in ardayga uu halis sii socoto ku yahay naftiisa, dadka, ama hantida ama jeediyo cabsi gelin joogto ah si uu u carqaladeeyo hawsha waxbarashada iyo/ama munaasabadaha dugsiga-mas'uulka ka yahay.

5. **Luminta Axsaanka Hawsha Dheeraadka Manhajka**

   "Lumista Axsaanka Hawsha ka Baxsan Manhajka" waxaa loola jeedaa ka saaridda qaar ka mid ah ama dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka marka ardayga uu ka qeybgalo ama uu xaq u leeyahay in uu ka qeybgalo haddii aan si kale loo sheegin. Ka saaridda hawl gaar ah waa mid buuxda waxaana lagu dabaqaa dhaqanka, ku-celceliska, safarada dibadda, tartanka, iyo dhamaan hawlaha kale ee la xariira hawsha ka baxsan manhajka sida ay farto Qeybta IV Xeerka Asluubta ee loogu talogalay Ardayda Ka Qeybgasha

Hawlaha Ka Baxsan Manhajka.

6. **Talada Fargelinta Waalidka**

Xaaladaha marka ardayga uu si ku celcelis ah u jebiyo Xeerka Dhaqanka Ardayga, Agaasimaha ama qofka uu Agaasimaha u xil saaro wuxuu baddali karaa ka-joojinta/ka-saaridda haddii waalidiinta ka soo qeybgalaan barnaamijka fargelinta lagu heshiiyo sida, balse kuma eka, fasalada la siiyo waalidka, la-talinta qoyska iyo/ama dishibiliinka dugsiga kaddib.

7. **Xarunta Waxbarashada Kale**

Alternative Learnging Center (ALC-Xarunta Waxbarashada Kale) waa fursad waxbarasho lagu meeleyn karo ardayga taasoo, marka ay habboon tahay, ahaan karto fursad lagu baddali karo ka-joojinta dibadda dugsiga. Meeleyntaan waxay ardayga siisaa fursad uu ku tago dugsiga kana helo 100% saacadaha shaqada uu qabto una suurtogelisa ardayga in wax ku barto jawi la kantaroolo, kana dheer qaabka waxbarashada caadiga ah. ALC waa xarunta waxbarashada ay macalimiinta iyo maamuleyaasha u adeegsadaan sida qalab lagu baddalo dabeecadda ardaydena.

8. **Ka-Joojinta**

Dhamaan ka-joojinta waxay hoos timadaa Awoodda Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybta 3313.66 taasoo amaan gelisa nidaamka ka-joojinta iyo ka-saaridda ardayga dugsiyada dadweynaha. "Xanibaadda" waxaa lagu sifeyaa ka-saariddadugsiga ku meel gaarka ah ee loo geysto ardayga kana mid ah hawlaha manhajka ama dheeraadka ku ah manhajka muddo aan ka badneyn toban (10) maalin dugsiyeed. Haddii in ka yar toban (10) maalin ka haraan sannad dugsiyeedka, cunuggaa, inta uu socdo todobaadka buuxa nasashada kuleylaha, waxaa dhici karto in laga dalbado in uu ka qeybgalo brograamka adeegga bulshada ama dhowr saac la siiyo ciqaab kale ilaa qeybta ka hartay muddada ka-joojinta.Ardayda waxay shaqeysan karaan 75% xagga shaqada lagu siiyo darajada inta ay ku sugan yahiin xanibaadda, marka laga reebo imtixanaadka samastarka/kama dambayska ama mashaariicda, la siin doono buundo buuxdo.

9. **Ka-Saaridda**

Dhamaan ka-joojinta waxay hoos yimadaan awoodda Xeerka La Baddalay ee Ohio 3313.66 taasoo amaan gelisa nidaamka ka-saaridda ardayda dugsiyada dadweynaha. “Ka-Saaridda” waxaa lagu sifeyaa marka ardayga laga saaro dugsiga waxaan ka mid ah hawlaha manhajka iyo hawlaha ka baxsan manhajka muddo ka badan toban (10) maalin dugsiyeed iyo ilaa inta ugu badan sida u faro Sharciga La Baddalay ee Ohio. Ardayga kuma qaadan doono buundo shaqada laga baaqdo inta ay socoto ka-saaridada

Maamulaha wuxuu dugsiga ka joojin karaa ama ka saari karaa ardayga:

a) Dhaqan xumada ka dhacda meel ka baxsan hantida ay leedahay ama kantaroosho dagmada balse la xariirta hawlaha ama dhacdooyinka ka dhacay hantida ay leedahay ama kantaroosho dagmadaas; iyo

b) Aadaab darrada, iyada aan la fiirinin meesha ay ka dhacdo, ee loo geysto sarkaal ka tirsan dagmada ama shaqaale ama hantida sarkaalka noocaas ah ama shaqaale.

Jebinta Sharciyada Dugsiga/Talada Ka-Saaridda

Hoos waxaa ku qoran sharci jebinta laga yaabo in loo arko in ay culus yahiin in ku filan una baahan karta in lagu taliyo ka-saarid. Liiskaan ma aha mid tafatiran oo ku saabsan dhamaan dhaqan xumadalaga yaabo in ay mutestaan la-tallin in laga saaro. Sharci jebinta soo socota waxaa loo soo bandhigay tusaale ahaan wuxuuna ku saabsan yahay dabeecad xumada keeni karta in Agaasimaha loo jeediyo talo in ardayga uu ka saaro dugsiga. Intaas waxaa dheer, waxaa ka mid ah ardayda kaalmeyso ama si un uga qeybgasha jebinta sharciyada Xeerka Dabeecadda Ardayga.

1. Jebinta yaryar ee lagu celceliyo kuwaasoo ardayga horay loo siiyay ka-joojin muddo toban iyo shan (15) maalin ka badan.
2. Burburinta ama jejebinta ula kaca ah ee loo geysto hantida dugsiga ama hantida dad kale marka lagu sugan yahay xerada dugsiga ama dibadda.
3. Gudbinta, iibinta, ama iskudayidda gudbinta waxyaabaha sharci darrada/waxyeelada sida mukhaadaraadka, cabbitaanka, kiimikada baddasha miirka, ama maadada laga dhigo sida kiimiko baddasha miirka.
4. WeerarWeerar ula kac ah oo lagu qaado macalin, maamule ama shaqaale kale oo ka tirsan dugsiga.
5. Ku celcelinta jebinta sharciyada u dagsan cabbitaanka khamrada iyo mukhadaraadka xun.
6. Handadaadda ku saabsanhubka ama qalabka qarxa.
7. Si ula kac ah marka loo bilaabo ama looga qeybgalo nooc kasta oo ah digniin been ah ama hanjabaad la xariirta caafimaadka iyo/ama amaanka ardayda ama shaqaalaha.
8. Fal kasta oo ula kac ah oo ku saabsan dab ama shididda dab aan amar loo haysanin.
9. Haysashada iyo/ama gudbinta shay kasta oo loo qaadan karo in uu yahay hub halis ah.
10. Jebinta sharci kasta siyaabo si la taaban karo halis ku ah caafimaadka ardayga, shaqaalaha ama qofka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso.
11. Dhaqanka dagaalka taasoo ah gafka dambiga haddii uu geysto qof qaan gaaray; kaddibna waxyeelo culus gaarsiiya jirka qof (dad) ama hanti.

Ka SaariddaMuddo Hal Sanno Kalendarka

Qoriga

Waxaa dhici karto in Agaasimaha uu ka saaro dugsiga muddo hal sanno ardayga qori ku haysto dugsiga; hanti kasta ay leedahay ama kantaroosho Guddiga Waxbarashada; ama iyadoo aan la fiirinin goobta, marka lagu sugan yahay tartan kasta oo ka dhexeyo dugsiga, munasabad ka baxsan manhajka, ama barnaamij kasta ama hawl uu dugsiga leeyahay, marka qof kale uu horaantii qoriga la yimaado dugsiga, hantida, ama tartanka, munaasabadda, barnaamijka ama hawsha.

Middiyada

Waxaa dhici karto in Agaasimaha uu ka saaro dugsiga muddo hal sanno ardayga middi ku haysto dugsiga; hanti kasta ay leedahay ama kantaroosho Guddiga Waxbarashada; iyadoo aan la fiirinin goobta, marka lagu sugan yahay tartan ka dhexeyo dugsiga, munasabad ka baxsan manhajka, ama barnaamij kasta ama hawl uu dugsiga leeyahay, marka qof kale uu horaantii middida la yimaado dugsiga, hantida, ama tartanka, munaasabadda, barnaamijka ama hawsha.

Falalka Waxyeelada Culus Gaarsiiya Dadka ama Hantida

Waxaa dhici karto in Agaasimaha uu ka saaro dugsiga muddo hal sanno ardayga geysta fal dambi ah marka gafkaas uu geysto qof qaangaar ah taasoo dhibaato culus u geysasta jirka qofka ama hantida, sida ku sifeysan XEERKA LA BADDALAY EE OHIO 2901.01, inta ardayga ku sugan yahay

dugsiga; ku sugan yahay hanti kasta oo kale uu Guddiga Waxbarashada leeyahay ama kantaroolo, ama ku sugan yahay tartan ka dhexeyo dugsiga, munaasabad ka baxsan manhajka, ama barnaamij kasta ama hawl uu dugsiga leeyahay.

Cabsi Gelinta Bambada

Waxaa dhici karto in Agaasimaha uu dugsiga ka saaro ardayga hanjabaadda bambada u geysto dhismaha dugsiga ama xero kasta oo ay ka socot hawlaha dusiga.

Ka-Saaridda Joogtada ah

Macnaha soocidda joogtada ah waxaa loola jeedaa in ardayga laga mamnuucay in uu tago dugsiga dadweynaha Gobolka Ohio.Guddiga Waxbarashada wuxuuraadsan kara in si joogto ah loo saaro ardayga,toban iyo lex jirka (16) ah ama ka weyn, marka lagu xakumo in uu geystay ama lagu tilmaamo cunug galay mid ama ka badan falalka soo socda:

1. Gudbinta ama iskudayidda in la gudbiyohub wax dila ama garneel halis ah oo lagu tuuro hantida dugsiga ama munaasabadda dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddalay Ohio Qeybta 2923.122;
2. In hantida dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga lagu haysto hub wax dila ama wax qarxa oo halis ah taasoo jebineysa Xeerka La Baddalay ee Ohio, Qeybta 2923.122;
3. Qaadashada hub qarsoon inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama munaasabadda sugan taasoo jebisa Ohio Revised Code Section (Qeybta Koocdka La Baddalay ee Ohio) 2923.122;
4. Ogaan in hantida dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga lagu haysto shay aan laga sooci karin hub (xattaa haddii shayga laga ridi karo dab) lana muujiyo in ardayga uu haysto shayga iyo in shayga yahay hub ama ogaan uu u muujiyo ama lulo shayga kaddibna muujiyo in uu yahay hub, taasoo jebineysa Xeerka La Baddalay Ohio Qeybta 2923.122;
5. In mukhadaraad la geeyo ama si darran looga ganacsado ama maado la kantaroolo lagu iibiyo hantida dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga taasoo jebineysa Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybta 2925.03;
6. Dilka, dilka foosha xun, dilka ula kaca ah ee loo geysto qofka, dilka aan lagu talogelin kana dhaca hantida dugsiga ama ka dhaca meel ay ka socoto hawsha dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybaha 2903.01, 2903.02, 2903.03, ama 2903.04;
7. Weerar dambi culus ama weerar culus oo la geysto inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga taasoo jebineysa Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybaha 2903.11 ama 2903.12;
8. Kufsi, qasabka kacsiga, ama galmo dambi culus inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga ama marka dhibanaha yahay shaqaale ka tirsan dugsiga taasoo jebineysa Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybaha 2907.02, 2907.05, 2907.12;
9. Haysashada mukhadaraad inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga taasoo jebineysa Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybta 2925.11, haddii jebintaas aysan ahayn gaf hoos yimaada qodobkaas.

Daruufaha Gaarka Ardayda Itaalka Darran

Waxaa dhici karto in ardayda itaalka darran ee ku kacda fal ku lug leh hub, mukhadaraad, ama dhaawac culus oo loo geysto jirka (sida ku sifeysan hoos) la geeyo meel kale oo wax lagu barto muddo ku meelgaar ah. Xatta haddiidabeecadda ardayga loo garto in aysan ahayn mid muujisa itaal darridiisa ama itaal darrideeda, ka saaridda waxaygaari kartaa ilaaafartan iyo shan (45) maalin dugsiyeed. Haddii dabeecadda loo garto in aysan ahayn mid muujisa itaal darrida ardayga, waxaa dhici karto in ardayga la saaro dishibiliin isla sida loo saaro ardayga sida caadiga wax u barto.

Erayga "serious bodily injury" (dhaawaca culus ee loo geysto jirka) waxaa loola jeedaa dhaawaca jirka ee ku lugta leh:

1. Halis muuqata oo keeni karta dhimasho;
2. Xanuun aad u badan oo soo gaara jirka;
3. Nabaro muddo dheer socda oo la arki karo; ama
4. Luminta muddo dheer socoto ama naafonimo soo gaarta hawsha ay qabatao qeyb ka tirsan jirka, xubin, ama awoodda madaxa.

18 U.S.C. 1365(h)(3)

Agagaarka Ammaanka Dugsiga

Xeerka Dhaqanka Ardayga wuxuu mar kasta ku taliyaa dabeecadda ardayga, ha lagu sugnaado xerada dugsiga, marka la raaco gaadiidka dugsiga, inta ay socdaan hawlaha manhajka iyo/ama hawlaha ka baxsan manhajka meel kastaiyo waqti kasta inta lagu sugan yahay safarada dugsiga ee la xariira. Criminal Code (Sharciga Dambiga) 2901.01(C) wuxuu “school safety zone” (dhulka ammaanka dugsiga) ku sifeyaa dhismaha dugsiga, xerooyinka dugsiga, hawsha dugsiga, baska dugsiga iyo meelaha u dhaw dugsiga. Intaas waxaa dheer, in ay ka mid yahiin ardayda kaalmeysa ama si un uga qeybqaadata jebinta sharciyada xeerka.

Guddiga ma u dulqaadan doono dabeecadda dagaalka, carqaladeynta ama aan habbooneyn ay ku kacaan ardayda iyo waa la mamnuucay dabeecadda noocaas sida ku qoran Xeerka Asluubta Ardayga (Code of Student Conduct).

1. **Hubka Halista**
   Ardayga ma haysan karo, ma keydsan karo, ma samaysan karo, ma qaadan karo, ma gudbin karo, ma qarsan karo ama ma isku dayyi kar in uu haysto, qaato, gudbiyo ama qarsado hub halis ah, qori, middi, waxyaabaha qarxa ama qalab halis ah, ama waxyaabaha "loo ekeysiiyay" hubka, qori, middi, waxyaaabaha qarxa ama qalab halis ah. Hubka “u muuqda” sida hubka, qoryaha, middiyada, waxa qarxa, ama qalabka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, shay kasta uu qof kasta oo macquul ah u qaadan karo sida xaaladda tahay hub halis ah, qori, middi, waxa qarxa ama qalab halis ah.

   Loolama jeedo in waxyaabaha ku jiro sharcigaan, mana ka reebi karto Agaasimaha in uu arday ka joojiyo, in ay ardayga ka saaraan dugsiga sida waafaqsan sharciga Ohio kuna saabsan haysashada, gudbinta, ama qarsiga hub, waxa qarxa, ama qalab kale oo halis ah inta lagu sugan yahay agagaarka amaanka dugsiga sida aan lagu sifeynin halkaan.

2. **Walaaltinimada/Bulshada Gabdhaha/Hawlaha Burcadnimada**
   Waa mamnuuc sida sharciga u sharaxo in xubin laga noqdo ama laga qeybgalo urur ama hawlaha walaaltinimo, bulshada gabdhaha, ama koox kale oo qarsoodi ah, Dugsiga Dagmada oo idil. Gaar ahaan, Guddiga ma u dulqaadan doono nooc kasta burcadda ama hawlaha la xariira burcadnimada in ay ka dhacaan hantida Dagmada ama inta ardayda hoos yimaadaan badbaadinta Guddiga.

   Ardayga ma geysan karo fal/dabeecad, ha laga sheego afka ama yaan laga sheegin (tusaale ahaan, balse kuma eka, istustuska, gacan ku salaamidda, labiska) uu ardayga ama shaqaale ka tirsan dugsiga u arki karaan in ay tahay caddeyn ku saabsan ka tirsanaanta ama ku biiridda koox burcad ah. Ardayga ma geysan karo fal, ha laga sheego afka ama yaan laga sheegin afka, oo lagu horumariyo danaha burcadda ama hawlaha burcadda, kana mid ah, balse kuma eka: (1) in dadka kale lagu qalqaaliyo ka tirsanaanta burcadda ama hawsha la xariirta burcadda; (2) qof kasta laga codsado in uu kharash ku bixiyo badbaadinta ama cabsi gelinta ama qofka loo hanjabo. Erayga “burcad”, sida loo adeegsaday siyaasadaan, waxaa loola jeedaa koox ka kooban labo (2) qof ama ka badan kuwasoo ujeedadooda ama hawlahooda yahiin ku kaca falal sharci darro ah ama jebinta

sharciyada ama siyaasadaha u dagsan dugsiga dagmada.

Gaadiidka Dugsiga

LAMA ogola in joogitaanka dad ama baabuur aan loo fasixin gudaha dhulka ama xerada Dugsiga Dagmada Westerville. In ruqsad la'aan la soo galo waxay la mid noqon kartaa dambiga soo jiiridda, taasoo dambi hoose sida hoos timaado Qeybta 2911.21, Xeerka Ohio La Baddalay, iyo Qeybta 509.05, Sharciyada Koodada Magaalada Westerville. (O.R.C 3313.20; O.R.C.2911.21; Magaalada Westerville, Codified Ordinances (Ammarada Koodka) 509.05)

Dabeecadda Ardayga Inta la Saaran Yahay Basaska Dugsiga

Gaadiidka waa adeeg uu bixiyo Guddiga Waxbarashada Westerville waana in ay ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha u arkaan sida axsaan la siiyo. Kuwa raaca basaska dugsiga waa in ay mar kasta u dhaqmaan sida waafaqsan sharciyada la soo dhajiyay iyo Xeerka Dhaqanka Ardayga (Student Code of Conduct) mar kasta.

Ardayda dugsiga sare waa in ay muujiyaan kaararka aqoonsiga dugsiga marka la weydiiyo ama marka ay saaran yahiin basaska dugsiga. In aan lala soo bixin kaararka aqoonsiga marka laga codsado waxay dhalin kartaa in la lumiyo axsaanka gaadiidka.

Mas'uuliyadda Saaran Ardayda

Ardayda waxaa laga filaa in ay:

- Mar kasta u dhaqmaan si nidaamsan inta ay saran yahiin baska.
- U hoggaansamaan tilmaamaha ama amarada wadaha.
- Soo koraan ama uga dagaan baska meesha uu baska u istaago iyaga. Meesha uu baska u istaago iyaga, ardayda waxaa loo qaban doonaa meel amaan ah oo ku dhaw gurigooda. Ardayda waa in aysan u dhaqaaqin gurigooda ilaa baska uu ka dhaqaaqo.
- Adeegsadaan meesha baska istaago ee loogu talogalay. Haddii loo baahdo in wax laga baddalo meesha baska istaago ama meesha looga dago, waa in la soo bandhigo warqad ay soo saxiixeen waalidka/ilaaliyaha iyo maamulaha kaddibna ogolaasho laga helo wakiilka gaadiidka.
- Si buuxdo uu aamusaan marka laga gudbaayo waddada trenka iyo meelaha kale ee halista ah sida wadaha u tilmaamo.
- Isla markiiba raacaan baska marka laga fasaxo dugsiga.
- Warqad ka soo qaataan waalidkooda ama ilaaliyehooda kana soo saxiixaan maamulaha haddii loo baahdo in ardayda ay baska uga dagaan meel ka duwan meesha uu caadi ahaan baska u istaago.
- ODE Gaadiidka Cunugga iyo Sharciyada Ammaanka OAC 3301-83-08(C) (12) wuxuu leeyahay "caruurta waxay baska ku qaadan karaan waxyaabaha ay ku qaadan karaan dhabta keliya".
- Lama ogola waxyaabaha lagu taraaraxo, xoolaha iyo/ama nooc kasta oo ka mid ah xoolaha guriga lagu haysto; dadka itaalka darran waxaa la ogolaan doonaa in ay wehliyaan xoolaha u adeega.

Mas'uuliyadda Saaran Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha

Waalidiinta waxaa laga filaa in ay:

- Mas'uul ka ahadaan amaanka iyo dishibiliinka ardayda marka ay u socdaan iyo marka ay ka soo noqdaan meelaha laga qaado iyo meesha baska istaago.
- Ka fogow in aad gashid baska dugsiga haddii aadan haysanin ogolaasho.

- Caruurta tagaan meesha baska istaago shan (5) daqiiqo ka hor waqtiga laga soo qaado sida u qoran jadwalka waaxda gaadiidka.
- Lacag ahaan mas'uul ka yahiin khasaaro kasta u cunugooda u geysto baska.
- Xushmeyaan in shaqaalaha aan la weydiisanin in ay ka qeybqaataan muranka ka dhexeyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo/ama ardayda ka hor inta aan la gaarin soo qaadidda ama kaddib marka lagu soo celiyo meelaha laga qaado.
- Xushmeyaan baahida loo qaabo in wadaha uu ku mashquulo wadidda iyo in uu dhowro jadwalka. Fadlan ka fogaaw in aad wadaha kala murantid mashaakilka baska inta u saaran yahay waddada. Tan waxay dib u dhigtaa jadwalka baska. Wac Waaxda Gaadiidka ee laga helo telefoonka 797-5950.

Sharciyada Amaanka Baska Dugsiga

1. Ardayda waa in ay fahdiistaan mar kasta.
2. Marna lama ogola dagaalka/turunturada/riixidda ama falalka kale sida gacan qaadka (tani waxay kaloo tixraacdaa gardareysiga sida ku sharaxan qeybta 5517,01 – "GARDAREYSIGA IYO NOOCYADA KALE DABEECADDA DAGAALKA").
3. Lama ogolaan doono luqadda aflagaadada/jir ka hadalka.
4. Marna looma dulqaadan doono dabeecadda aan habbooneyn.
5. Lama ogola tuurista shay marka lagu sugan yahay gudaha ama dibadda baska.
6. Lama ogola in gudaha baska wax lagu cuno/cabbp marka laga reebo marka ay jiraan asbaab caafimaad.
7. Lama ogola qeylo ama dhawaaq xad dhaaf ah.
8. In aan la xushmeynin dadka kale iyo/ama in aan la raacin tababarka wadaha soo socda waxay dhallin doontaa dishibiliin.
9. Fal kasta oo kale ee carqaladeeyo amaanka ama dadka ama hantida waxay dhalin doontaa dishibiliin.
10. Ardayda waa in ay mar kasta u hoggaansamaan Code of Student Conduct (Xeerka Dhaqanka Ardayga).

Sharciyada Lagu Soo Dhajiyay Dhamaan Basaska

"HA LUMININ AXSAANKA LAGUU SIIYAY RAACIDDA"

1. Ilaali dhaqana sida waxa ka jira gudaha fasalka.
2. Muuji xushmad, ha isticmaalin aflagaado.
3. Waxba ha ku cunin ama ha ku cabbin gudaha baska.
4. Ilaali nadaafadda Baska.
5. La shaqeey wadaha.
6. Ha cabbin sigaar/uumi.
7. Waxba ha burburinin.
8. Ha iska qaadin sawiro/fiidiyowyo ama ha ka qaadin dad kale.
9. Ha shidin maqalka adiga oo adeegsada samaacadaha dibadda.
10. Fadhi kursigaada.
11. Madaxa, gacmaha iyo cagaha waa in aad gelisid gudaha baska.
12. Wadaha baska waxaa loo ogol yahay in uu rakaabka u qeybiyo kuraasta

Haddii lala kulmo dhacdo inta la saaran yahay baska taasoo dalbata in ardayga laga joojiyo dugsiga sida uu rabo Xeerka Dhaqanka Ardayga, waxaa soo hormari doono hirgelinta Xeerka Dhaqanka Ardayga, ardaygana waxaa laga joojin doonaa dugsiga.

Ka-Joojinta/Ka-Saaridda Basaska Dugsiga

Waxaa muhiim ah in la yeesho dabeecad wanaagsan inta la saaran yahay baska taasoo ugu wacan ahamiyadda la siiyo amaanka ardayda iyo wadaha. Marka ardayga uusan muujinin dabeecad wanaagsan marka uu saaran yahay baska, dabeecad xumada waxay dhalin kartaa in

laga joojiyo iyo/ama laga saaro baska. Ardayda doorata in ay jebiyaan sharciyada baska waxaa la siin doonaa Ogeysiiska Digniinta Dishibiliinka. Koobiyada warbixinta waxaa loo qeybin doonaa dhamaan dhinacyada ku lug leh waxaana dhici karto in ardayga laga joojiyo axsaanka uu ku raaco baska. Jebinta sii socoto ee sharciyada baska waxay dhalin kartaa in laga saaro baska.Shaqaalaha dugsiga waxay ku dadaali doonaan in ay badbaadiyaan xuquuqda ardayga iyaga oo adeegsada hababka u dagsan marka la adeegsado ka-joojinta ama ka-saaridda.

Ardayda iyo waalidiintooda ama ilaaliyeyaashooda waxay mas'uul ka noqon doonaan jejebinta, khasaaraha ama burburinta uu ardayga u geysto baska dugsiga. Waxaa la dalban doonaa soo celinta kharashka ku baxa dib u hagaajinta dhamaystiran ee khasaarada.

Baddalaadda Gaadiidka ama Meesha loo Socdo

Haddii isbaddal ku yimaado gaadiidka uu ardayga ku qoran yahay ama meesha uu ku dago, waa in waalidka ardayga uu soo diro xasuusin gaaban oo ka hadleyso isbaddalkaan, waana in ogolaasho laga soo qaato agaasimaha dhismaha iyo wakiilka gaadiidka. Ogolaashada isbaddaladaas waa in laga soo qaato gaadiidka waxayna ku saleysan tahay hadba sida loo helo boos.

Si aad u heshid wararka ugu dambeeyo ee ku saabsan gaadiidka, wac gaadiidka telefoonka 797-5950 ama booqo bogga internetka www.wcsoh.org.

CAAFIMAADKA ARDAYDENA

Dawooyinka – Siinta Dawooyinka Ardayda

Waalidiinta waa in ay go'aan ka gaaraan tallada qofka u soo qoro cunugga haddii jadwalka daawada la habeyn karo si looga maarmo in daawada la siiyo saacadaha dugsiga.

Dugsiyada Magaalada Westerville ma iibsadaan mana laga helo asbariin, dawooyinka kale ee aan la qorin ama dawooyinka la qoro ee la siiyo ardayda. Xeerka La Baddalay ee Ohio 3313.713 wuxuu rabaa in shaqaalaha dugsiga:

A. Siiyaan ardayda dhamaan dawooyinka la qoro iyo kuwa aan la qorin marka waalidiinta/ilaaliyeyaasha codsadaan in shaqaalaha dugsiga siiyaan dawooyinka noocaas ah. Si ay u codsadaan kaalmo xagga daawada, waalidka/ilaaliyaha waa in uu:

    1. Dhamaystiro foomka ku habboon ee la xariira daweynta. Hoos ka fiiriyo soo koobida foomamka. Dhamaan foomamka dawooyinka waa in ay soo saxiixaan waalidka iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee loo fasaxay in uu qoro.
    2. Waalidka/ilaaliyaha ama qofka kale ee mas'uulka ah marka waalidka ka codsado waa in uu daawada toos u keeno dugsiga. Tani waa in horay loo qorsheeyo.
    3. Daawada waa in ay ku jirto dhallo calaameysan, lagu soo qoray taariikhda; magaca ardayga; iyo qiyaasta saxsan. (Waxaa dhici karto in farmashiyaha bixiso dhalo dheeraad ah marka dawooyinka la qaato muddo dheer.) Haddii ay tahay daawo aan la soo qorin, waa in ay ku jirto weelka asalka.
    4. Uusan soo dirin in ka badan qiyaasta labo ilaa afar (2-4) todobaad oo daawo ah halkii mar;
    5. La keeno oraah la baddalay lagana soo saxiixay waalidka/ilaaliyaha iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee awoodda u leh in uu qoro xagga baddalaadda qiyaasta loo baahan yahay in la siiyo; waxaa kaloo loo baahan yahay in la soo baddalo qoraalka ku qoran warqadda ku dhagan dhallada dawooyinka la qoro.

B. Haddii aad rabtid in cunugaada uu haysto qalabka lagu neefsado saacadaha dugsiga, waxaa loo baahan yahay in bixiyaha daryeelka caafimaadka ee qori kara in uu soo buuxiyo kaddibna adiga soo saxiixdid “Self-Medication for Asthma Inhalers Authorization Form” (Form 5330 F3).

C. Haddii aad rabtid in cunugaada qaato Epinephrine Auto Injector (daawada loo qaato xasaasiyadda anaphylaxis) saacadaha dugsiga, Qorshaha Talaabada Laga Qaado Xasaasiyadda iyo Ruqsadda in Ardayga Haysto iyo Isticmaalo Epinephrine Auto Injector (Form 5330F4a iyo Form 5330F4b) ayaa loo baahan yahay in uu buuxiyo bixiyaha daryeelka caafimaadka awoodda u haysta in uu qoro kaddibna laga saxiixo waalidka/ilaaliyaha sida waafaqsan Xeerka La Baddalay ee Ohio, Qeybta 3313.718/ Dugsiga waa in uu haysto keyd ah qiyaasta cirbadda Epinephrine Auto Injector. Haddii qiyaas la isticmaalo inta dugsiga socdo ama inta lagu sugan yahay dugsiga, waxaa la wici doonaa 911.

D. Haddii aad rabtid in cunugaada uu naftiisa siiyo dawooyinka aan la soo qorin (laga iibsado miiska) inta uu joogo dusiga, waa in uu waalidka ama ilaaliyaha soo buuxiyo Foomka 5330 F1a laguna haayo faylka caafimaadka ardayga ee yaala dugsiga.

E. Haddii cunugaada u baahdo in la siiyo Daryeelka Sokorowga inta uu ku sugan yahay dugsiga, waa in Foomka5330 Fdm1 uu soo buuxiyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee qori kara daawada, kaddibna laga soo saxiixo waalidka/ilaaliyaha. WCS waxay aqoonsan tahay in takhaatiirta qinjirada qabaan habab u gaar ah oo fasaxa Daryeelka Sokorowga Dugsiga. Foomamkaan waxaa lagu baddali karaa Foomka 5330 Fdm1 kaddib marka la fiiriyo iyo kaddib marka Kalkaalinta Dugsiga u aragto in la ogolaan karo. Ardayda kaalmo uga baahan Shaqaalaha Dugsiga si loo siiyo Insulin (kana mid ah kor ka eegidda ardayga) waxay u baahan yahiin in ay soo buuxiyaan foomka "Ammarka Siinta Insulin”. Guddiga Waxbarashada wuxuu xil iska saaray in uu hubiyo in arday kasta oo ku qoran Dagmada oo qaba sokorow helo daryeelka sokorowga loo baahan yahay kuna habboon sida waafaqsan ammarka uu saxiixo takhtarka daweeya ardayga. Muddo toban iyo afar (14) maalin gudahooda kaddib marka Dagmada hesho ammar uu soo saxiixay takhtarka daweeyo ardayga, Guddiga wuxuu waalidka ama ilaaliyaha ardayga ogeysiin doonaa in ardayga laga yaabo in uu xaq u leeyahay qorshaha Section 504 Plan ee ku saabsan sokorowga ardayga.

Soo Koobidda Foomamka La Xariira Dawooyinka- * Foomamka dawooyinka waxaa laga heli karaa kalkaaliyaha dugsigaada, ama bogga internetka Dugsiyada Magaalada Westerville: www.westerville.k12.oh.us(*Riix Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha; kaddibna meesha lagala xariiro Adeegyada Caafimaadka)

1. Codsiga SiintaLoo Isticmaalo Sida Daawada La Qoro (5330 F1):
    - Foomkaan wuxuu ogolaadaa in dawooyinka lagu keydiyo dhismaha kliinikada iyo in ay siiyaan shaqaalaha dhismaha.
2. Ogolaashada in Ardayga Haysto iyo Adeegsado Qalabka Neefta (5330 F3) (5330 F3):
    - Foomkaan wuxuu ardayda u ogoladaa in ay naftooda isa siyaan qalabka lagu neefsado iyaga oo aan kaalmo ka helin shaqaalaha dugsiga.
3. Ogolaashada in Ardayga Haysto iyo Adeegsado Daawada Epinephrine uu Qofka Isku Duro (5330F4a):
    - Foomkaan wuxuu ardayda u ogolaadaa in ay naftooda isa siyaan daawada degdegga “epinephrine” iyaga oo aan kaalmo ka helin shaqaalaha dugsiga, hase ahatee wuxuu kaloo rabaa in qiyaas “keyd” ah lagu haayo kliinikada dugsiga.
    - Foormka 5335 F4b waa in la soo raaciyo Foomka 5330 F4a
4. Qorshaha Falka Xasaasiyadda (5335 F4b):
    - Foomkaan wuxuu ogoladaa wuxuuna talo gaar ah siiyaa tixraaca: in daawada shaqaalaha dugsiga ee tababarka u haysto ay siin karaan daawada “epinephrine”.
5. Ogolaashada WCS Xanaanada Sokorowga (5330 Fdm1)

- Foomkaan wuxuu cunugaada u ogolaadaa in uu insuliin iyo xanaanada sokorowga ku qaato dugsiga.

6. Fadlan tixraac Siyaasadda 5330 soona buuxi foomka 5330 F1a si aad u ogaatid hababka ku habboon Ardayga Naftiisa Siiya Daawada.
   - Foomka 5330 F1a waa foomka ka dhaafidda, taasoo u ogolaata ardayga in uu 100% mas'uul ka noqdo una madax banaan yahay maamulka daawada laga qaato **Miiska Farmashiyaha**.
7. Tilmaanta Ilaha Taageerada Ardayda Qabta Xasaasiyadda Halista ku ah Nolosha (5335)
   - Warqadaan waxay tafatirtaa hawsha dugsiga oo lagu taageero ardayda qabta xasaasiyadda halista nafta.

Fadlan la soco, kaddib marka aad fiirisid tilmaamaha, Kalkaaliyaha Dugsiga iyo ama qofka Agaasimaha magacaabo in ay u baahan karaan caddeynta ku saabsan tilmaamaha lagana keeno bixiyaha daryeelka caafimaadka ka hor inta aan la siinin daawo.

Cudurka iyo Hababka Degdegga

Waxaa si xoogan loo dhiiri gelinaa in la soo gudbiyo Macluumaadka Xariirinta Degdegga iyo foomamka Macluumaadka Caafimaadka horaanta sannad dugsiyeed kasta. Waa foomamka elataroonigga laga helo Xariirinta Waalidka PowerSchool (PowerSchool Parent Portal) ee hoos yimaada "Ecollect Forms".. Dadka ku qoran foomka degdegga keliya ayaa qaadi kara ardayda haddii aan ogolaasho hore laga haysanin maamulaha dhismaha. Inta lagu jiro sannad dugsiyeedka, waxaa dhici karto in lala kulmo isbaddalo ku saabsan cinwaanada iyo nambarada telefoonka ku yaal foomamka degdegga. Haddii lala kulmo isbaddal, fadlan casriyey Foomka Ecollect adiga oo adeegsada PowerSchool Parent Portal kaddibna ogeysii Kalkaalinta Dugsgia (School Nurse).

Ardayda ku xanuunsata inta lagu sugan yahay dugsiga waa in ay soo ogeysiiyaan kliinikada. Ardayda waxaa lagula talinaa in ay si toos ah u wacaan ama fariin qoran u diraan waalidka/ilaaliyaha, bacdamaa ay habboon tahay in qiimeynta calaamadaha iyo ogeysiinta xariirka ku habboon laga fuliyo gudaha xafiiska/kliinikada.Shaqaalaha dugsiga waxay iskudayi doonaan in ay ogeysiyaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha ama qofka ku qoran foomka degdegga ardayga in uu ardayga u sameeyo qorshe uu ku tago guriga. Ma qaadaneyno mas'uuliyadda daweynta ka baxsan kaalmada kowaad.

Dhamaan kiisaska cudurka ama dhaawaca, waxaa la filaa in waalidka/ilaaliyaha ama qofka xariirka degdegga uu soo qaadi doono ardayga sida ugu dhaqsiyaha badan kaddib marka la waco. Haddii uu ardayga u baahdo in lagu qaado baabuurka degdegga, sarkaalka qaabilsan degdegga ayaa go'aan ka gaari doono isbitaalka ardayga loo qaadi doono.

Waalidiinta waxaa laga rabaa in ay ruqsadda caafimaadka keenaan si ardayga u soo noqdo in uu cayaaro kaddib marka uu la kulmo dhaawac dhalliya calaamadaha jugta madaxa, sida waafaqsan R.C. 2305.23, 3313.20, 3313.539 and Policy 5340, Shilalka Ardayga.

Talaalka

Sharciyada u dagsan Gobolka ayaa raba in waalidiinta/ilaaliyeyaasha soo gudbiyaan caddeyn qoran muddo toban iyo afar (14) maalin kaddib marka dugsiga bilowdo,in cunugooda qaatay dhamaan talaalada uu isaga/iyada u baahan tahay si ay u sii joogaan dugsiga. Haddii, kaddib marka ay dhamaato muddada toban iyo afarta maalin (14) ee axsaanka ah, waalidka/ilaaliyaha uusan soo gudbinin caddeyn qoran, ardayga waxaa laga saari doonaa dugsiga ilaa laga soo gudbiyo caddeynta noocaas ah. Muddada ka saaridda, maqnaashada cunugga waxaa loo diiwaan gelin doonaa sida maqnaasho aan la fasaxin waxaana dhici karto in lala socodsiiyo Adeegyada Cunugga. Tallaalka loo baahan yahay sida waafaqsan Sharciga la Baddalay Ohio 3701.13 iyo

3313.671 waxaa laga heli karaa bogga internetka dagmada, ama waxaa laga heli karaa xarunta diiwaan gelinta dagmada ama kliinikadaha dhismaha.

Baaritaanka Tiibishada (TB)

Ardayda lagu qoro Dugsiyada Magaalada Westerville ee ka yimaada waddan shisheeye waa in ay muujiyaan warar qoran in baaritaanka maqaarka PPD yahay negatiifo iyo/ama raajada-x tahay negatiifo, laguna sameeyo Mareykanka. Haddii waalidka/ilaaliyaha uusan awoodin in uu keeno warqadaha qoran ee loo baahan yahay, ardayga waxaa laga rabaa in uu soo dhamaysto PPD kale ama raajada-x lana fiiriyo. Waxaa loo baahan yahay warqadahaan ka hor inta aan lagu dhaqaaqin diiwaan gelinta. Dugsiyada Westerville waxay raacaan sharuudaha warbixinta ee ku jira O.R.C. 3313.71.

Arrimaha Caafimaadka Ardayga ee soo Noqnoqda

Haddii cunugga uu qabo arrin caafimaad, waalidiinta/ilaaliyeyaasha waa in ay keenaan sharaxaad qoran oo ku saabsan arrinta lana geliyo diiwaanka caafimaadka dugsiga ee cunugga, lana casriyeeyo macluumaadka waqtiyo joogto ah, hadba sida loogu baahdo. Waxaa dhici karto in loo baahdo in dokumentiyo laga keeno bixiyaha xanaanada caafimaadka cunugga.

Ardayda u baahan jimicsiga ama waxyaabaha ka reeban ee la xariira cimilada in ka badan labo maalin waxay u baahan yahiin in ay ogolaasho ka soo qaataan takhtarkooda.

Xaaladaha Leysku Daarto

Haddii cunugga xanuunsan yahay, fadlan xasuuso in cunugga uu ka madax banaan yahay qandho, iyadoo aan la siinin dawooyinka hoos u dhiga qandhada, muddo 24 saac ka hor inta uusan ku soo noqonin dugisga.

Cunugga waxaa loo soo diri doonaa guriga, haddii isaga/iyada lagu arko heerkul gaara 100 digrii ama ka badan, mattag, shuban, lagu arko gubniin aan la baarin, ama lagu tuhmo in uu qaabo xaalad leysku daarto,kana mid ah injirta madaxa gasha. Waalidka/ilaaliyaha waa in uu soo qaado ardayga qaba cudurada leysku daarto mana raaci karo gaadiidka dugsiga. Laguma taliyo in ardayda qabta cudurada leysku daarto raacaan baska dugsiga ama gaadiidka kale uu dugsiga ku qaado ardayda. Waalidka/ilaaliyaha ama qofka degdeg ahaan lagala soo xariiro ayaa laga rabaa in ay ardayga u qaadaan guriga.

Injirta Madaxa

Injirta madax (Pediculosis) waxay u muuqataa in ay tahay mid sannadka oo idil inta badan lagu arko bulshadaha. Bacdamaa waalidiinta ka cayaari karaan door muhiim xagga kantaroolka injirta, waxaan rabnaa in aan idinku kaalmeyno in aad xogogaal noqotaan.

Sidee Ayaad Ku Qaadataa?
Injirta madaxa waa xaalad badanaa lala kulmo, si fudu loo daweyn karo oo guud ahaan aan la xariirin dhibaato caafimaad oo oculus. Badanaa qofka wuxuu injirta madaxa qaadsiyaa qofka kale marka ay toos ahaan dadka u xariiraan iyo marka ay wada isticmaalaan waxyaabaha shakhsiga sida shanlada, buraashka, koofiyadaha ama fasaleetiga. Caruurta waa in looga diggo in aysan caruurta kale la wadaagin koofiyadaha, dharka ama waxyaabaha leysku qurxiyo. Dad badan waxay u maleyaan in injirta madaxa lagu arko dadka aan nadiifka ahayn. Marka la soo qaado injirta madaxa, tan MA AHA RUN. Qabeys badan ma kaa hor istaagi karo mana kaa saari karo mar haddii ay injirta kugu dagto.

Waxa Loo Baahan in la Raadiyor:
Mid ka mid ah calaamadaha caadi ahaan loo baahan yahay in isha lagu haayo waa cuncun badan

iyo xogidda maqaarka madaxa. Injirta madaxa waa cayayaan dhedheer qiyaas ahaan (--) dheer, midabkoodana wuxuu u dhexeyaa dambas cad ilaa maroon qafiif ah. Injirta ma laha baalal, sidaas darteedna, ma duuli karaan. Ma boodaan, hase ahatee, si aad fudud ayay u dhaqaqaan; tan waxay aad u adkeysaa in laga helo tinta cunugga. Bacdamaa ay adag tahay in la arko wax garguurta, baaritaanka injirta madaxa waxay badanaa ka kooban tahay helitaanka qanjaciilka (ukumanka daadsan). Qanjaciilka waxay u qaab ek yahiin dhibicda shaaha, qiyaas ahaan cabirkooda waa (‘), waxayna ku kala duwan yahiin midabka, maroon jaalo ah ilaa caddaan. Mid kasta injirta madaxa waxay ku dhagan tahay hal tin waxayna leedahay maado aan biyaha soo mari karin, maado sida shimentada. Sidaas darteed, lama dhaqi karo qanjaciilka ama lagama shanley karo tinta sida wasakhda cadcad ee loo yaqaan “dandruff” ama wasakhda kale ee marmar u eg sida qanjaciilka sida isha u aragto. Qanjaciilka waxaa badanaa lagu arkaa tinta ku taal meesha dambe qoorta ama meesha ka dambeeyso dhagaha. Waxaa waxtar leh in la adeegsado muraayadda wax weyneyso iyo iftiinka cad (ku roon iftiinka maalinimada) marka la raadinaayo qanjaciilka.

Maxay Sameyn Karaan Waalidiinta?
Injirta aad ayaa leysu qaadsiiyaa waana adag tahay in la hor istaago, hase ahatee haddii waalid kasta qaato mas’uuliyadda lagu fiiriyo tinta qoyska oo idil, lana feero inta badan, waxaa la kantarooli karaa in aysan faafin. Haddii aad tuhunsan tahay in cunugaada uu qabo injirta madaxa, balse aadan hubin, la xariir dugsiga cunugaada. Haddii aad ogsoon tahay in cunugaada uu qabo injirta madaxa, la xariir takhtarkaada, dugsiga, kalkaaliyaha ama farmashiistaha xagga daweynta. Yeysan kula noqonin ceyb in aad ogeysiisid dugsiga cunugaada si talaabooyin looga qaado kantaroolka injirta. Sidoo kale, ogeysii waalidiinta caruurta uu cunugaada la cayaaro. Wadashaqeynta waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay kaalmo ka geysan kartaa ka hortagga in injirta ku faafto caruurta kale sida cunugaada.

Ardayda waa in ay ku soo noqdaan dugsiga marka la dhamaysto daweynta lana aqoonsan karin jiritaan nool. Jiritaanka nool waxaa lagu sifeyaa jiritaanka injir nool, ama marka aan horumar laga gaarin ka-saaridda qanjaciilka. Dawyenta waxaa lagu gaari karaa muddo hal habeen, waxaana loo ogolaan karaa ku soo-noqosho maalinta xigta. Qof weyn waa in uu ardayga u soo raaco dugsiga lana kulmo kalkaaliyaha ama xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha marka lagu soo noqdo dugsiga. Ardayga waxaa baari doono xubin ka tirsan dugsiga oo tababar ku qaatay habka baaritaanka. Haddii arday lagu helo in uu qabo injir nool, waalidka/ilaaliyaha wuxuu ardayga ku celin doonaa guriga si uu uga daweeyo. Dillaaca cayayaanka waxaa loola jeedaa in ay jiraan cayayaan nool ama horumarka aan laga gaarin saaridda qanjaciilka. Habka ka-saaridda qanjaciilka wuxuu qaadan karaa dhowr maalin. Waa in aad maalin kasta shanleysid iyo in aad ka-saartid qanjaciilka aad ku aragtid.

Tababarka Guriga

Haddii takhtar uu go’aamiyo in cunugga uusan awoodin in uu tago dugsiga kana maqnaan doono muddo toban iyo kow (11) maalin isku xiga ama ka badan, isaga/iyada waxay xaq u yeelan kartaa in tababar lagu siiyo guriga. Waxaa la qaban doonaa shir faraglinsi loo go’aansado xaq u yeelashad tababarka guriga. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, la xariir xafiiska dugsiga.

Ceymiska Shilka Ardayga iyo Ceymiska **Khasaarada La Geysto**

Ceymiska Dugsiga Dagmada Westerville ma bixiyo ceymiyo dhaawacyada soo gaara ardayga. Inkastoo dagmada qaadeyso talaabado ku habboon si loo hubsado amaanka ardayda, haddana waxaa dhaca shilal.Dagmada soo socota ma bixiso kharashka caafimaadka la xariira taasoo ka dhallata marka ardayda soo gaarto dhaawac iyaga oo ku sugan xerada dugsiga, munaasabadaha dugsiga kafaalo qaado ee ka basan dugsiga, iyaga oo saaran gaadiidka dugsiga kafaalo qaado, ama hantida dugsiga ama hantida aan ahayn dugsiga ka hor ama kaddib saacadaha dugsiga. Tan macnaheeda waxay tahay in waalidka (waalidiinta)/ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) mas’uul ka yahiin biilasha la xariira dhaawacyada cunugga ka soo gaara dugsiga.

Dugsiga ma laha ceymiska shilka soo gaara ardayga. Hase ahatee, qoysaska u baahan ceymis, waxay heli karaan macluumaadka ku saabsan ceymiska shilka cunugga. Sida adeegga la siiyo waalidka/ilaaliyaha, dugsiga waxaa laga heli karaa ceymis, sidaas darteed, waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinaa in ay ceymis u helaan cunugooda. Fadlan xasuuso tan ma aha barnaamij uu dugsiga dagamada kafaalo qaaday. Dugsiga dagmada wuxuu ogolaan doonaa qeybinta macluumaadkaan si uga fa'iideystaan ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha. Qeybinta macluumaadkaan uma dhiganto kafaalo qaadidda tan ama qorshe kasta oo ah ceymiska ardayga. Dagmada sinna looma siiyo magdhaw xagga macluumaadka. Go'aan kasta ha ahaado mid lagu iibsado ceymis waa in uu ku saleysan yahay qiimeynta waalidka ka sameeyo khatarta dhaawaca ama cudurka iyo sida qorshaha ugu filan yahay in uu la kulmo baahidooda marka la soo qaado cudur ama dhaawac ku jira ceymiska.

Dagmada ma laha ceymiska hantida ay leeyahiin dadka kale. Haddii shay uu ka lumo ardayda (tusaale ahaan, balse aan ku ekeyn, sida qalabka muusikada) ama hantidooda si kale loo xado, iyaga ayay saaran tahay mas'uuliyadda lagu baddalo hantidaas. Waalidiinta waxaa la xasuusinaa in loo baahan yahay in ceymis la geliyo ardayda-cayaartooyda iyo in caddeynta ceymiska la keeno si loogu ogolaado.

Mideynta Maamulka Cayayaanka [Integrated Pest Management (IPM)] iyo Ogeysiinta

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville wuxuu adeegsadaa habka Maamulka Cayayaanka (IPM). IPM waxay adeegsataa isku darka kiimikada iyo waxyaabo kale, oo aan ahayn cayayaan dishada, hababka lagu kantaroolo cayayaanka. Waalidiinta iyo xubnaha bulshada, ee raba in la soo ogeysiiyo isticmaalka cayayaan dishada, waxay ogeysiiska hore iyo isticmaalka cayayaan dishada degdegga ka heli karaan boggena internetka dagmada.

IMAASHADA DUGSIGA

Ardayda ku qoran Dugsiyda Magaalada Westerville waxaa laga rabaa in ay tagaan maalin kasta uu dugsiga furan yahay sida waafaqsan sharciga. Ardayda waa in ay ku jiraan dhamaan fasalada lagu qoray iyo meelaha wax lagu barto maalin kasta.

Sifeynta Imaashada

Maqnaashada la fasaxay: Maqnaashada ay ugu wacan tahay marka qofka xanuunsado, xanuunka ku dhaca qoyska, karantiilka guriga, dhimashada qaraabada, shaqada guriga marka ay maqan yahiin waalidiinta ama ilaaliyeyaasha,xuska fasaxyada diinta, fasaxa qoyska ee horay loo ogolaaday ama xaaladaha degdegga ama sabab khaas ah uu maamulaha siiyay ogolaasho.

Maqnaashada uusan xaqiijinin waalidka/ilaaliyaha/, ama maqnaashada la ogsoon yahay, oo ogolaasho laga haysto waalidka/ilaaliyaha, sababtana tahay mid uusan dugsiga ogoleyn. Ardayda dugsiga sare waxaa la siin doonaa 75% dhibcaha la shaqeysto hawsha la siiyo buundada lana fasixin. Ardayda Dugsiga Hoose iyo Dhexe waxay qaadan doonaan 100% dhibcaha ay shaqeystaan inta ay ku maqan yahiin fasax la'aan.

Goynta Dugsiga: Marka si ula kac ah iyo amar la'aan laga maqan yahay dugisga. Ardayga lama siin doono buundo xagga shaqada uu gaffo marka uu gooyo dugsiga.

Goynta fasalka: Marka si ula kac ah iyo amar la'aan laga maqan yahay fasalka. Ardayga lama siin doono buundo xagga shaqada uu gaffo marka uu gooyo fasalka.

Maqnaashada La Fasaxay

Shaqada gadaal laga sameeyo waa in lagu dhamaystiro muddo la'eg tirada maalmaha la maqan yahay gudahooda marka sidaas la sameyn karo. Haddii shaqada aan gadaal laga sameynin, ardayga waxaa la siin doonaa darajo uu ku dhaco shaqada aan la dhamaystirin. Marka laga hadlo shaqada la gaffay taasoo ugu wacan fasaxa qoyska, fadlan tixraac qeybta imaashada "Shaqada Gadaal Laga Sameeyo" ("Make-up Work").

Waxaa dhici karto in loo fasaxo maqnaashada taasoo ku saleysan mid ama ka badan sharuudaha soo socdo:

Xanuun ku Yimaado Shakhsiga: Waa la fasaxi doonaa cunugga marka uu ku maqan yahaay in uu xanaano caafimaad ka qaato bixiyaha xanaanada caafimaadka ee shattiga haysta. Waxaa dhici karto in mas'uuliinta ogolaashada weydiistaan shahaadada takhtarka haddii isaga/iyada ay u aragto in loo baahan yahay.

Xanuunka Qoyska: Maqnaashada sida hoos timaado shardigaan laguma dabaqi karo caruurta da'dooda ka yar tahay 14 sanno.

Karantiilka Guriga: Marka cunugga uu xaaladaan uga maqan yahay dugsiga, maqnaashada waxay la'eg tahay dhererka karantiilka, sida ay u dajiyaan sarakiisha caafimaadka ee ku habboon.

Dhimashada Qaraabada: Maqnaashada ka dhalata xaaladaan waxay ku eg tahay muddo saddax (3) maalin haddii cunugga soo dalbanaayo uusan muujinin sabab macquul ah in loo baahan yahay maqnaasho dheer.

Shaqada Guriga Marka Waalidiinta ama Ilaaliyeyaasha Maqan Yahiin: Maqnaasho kasta oo ka dhalata xaaladaan ma gaari doonto muddo ka dheer muddada ay waalidiinta/ilaaliyeyaasha maqan yahiin. (Tan waxaa lagu dabaqaa ardayda jirta 14 sanno ama ka badan.)

Xuska Fasaxyada Diinta: Cunug kasta oo diin qaba waa la fasaxi doonaa haddii ujeedada maqnaashadiisa/maqnaashadeeda ahayd in la xuso maalin la xuso diinta sida waafaqsan diintiisa/diinteeda ama waxa uu aaminsan yahay cunugga.

Adeegga Sarkaalka Xaafadda: Ardayga wuxuu u adeegi karaa sida sarkaalka xaafadda marka la qabanaayo doorashada hore, doorashada khaska ama doorashada guud sida waafaqsan barnaamijka u dagsan Siyaasadda 5725

Fasaxa Qoyska Maqnaashada ka dhallata ardayga ka soo safra masaafo, in ku filan in uu ka maqnaado dugsiga. Maqnaashada safarka la fasaxay waxaa la ogolaan doonaa keliya mararka ardayga uu safar kula jiro waalidkiisa ama waalidkeeda ama ilaaliyaha sharciga marka ujeedada safarka tahay nasasho, madadaalo iyo/ama fasax.

- Waalidka ama ilaaliyaha ardayga waa in ay dhamaystiraan "Foomka Maqnaashada La Fasaxay" ("Pre-excused Absence Form") lana siiyo ogolaashada mid ka mid ah agaasimeyaasha ugu yaraan saddax maalin ka hor inta aan la gaarin maalinta kowaad maqnaashada la filaayo. Kaddib marka agaasimaha fiiriyo foomka, waa in ay saxiixaan dhamaan macalimiinta ardayga kaddibna lagu celiyo Xafiiska Imaaashada (Attendance Office).

- Ogolaashada codsiga maqnaashada ee ku jira qeybtaan waxay ardayga xaq u siisaa in uu qaato hawlaha sare ee la qaato muddada la filaayo in la maqnaado. Ardayga waa in uu diyaar u yahay in uu soo celiyo hawlaha lagu sameeyo guriga iyo hawsha la siiyo darajo kaddib marka ls soo celiyo iyo waa in uu diyaar u ahaado in uu qaato imtixanaadka gadaal laga sameeyo

muddo shan (5) maalin gudahooda kaddib marka uu soo noqdo. Lama filaayo in macalinka bixiyo kaalmada tababarka maadooyinka laga hadlay inta uu ardayga maqnaa.

Degdegga ama Xaaladda Gaarka ah: Ardayga waa loo ogolaan doonaa degdegga ama xaaladaha, sida maamulaha dhismaha, kaaliyaha maamulaha, ama Agaasimaha dugsiyada u gartaan, una arkaan in ay yahiin sabab ku filan ee looga maqnaado dugsiga.

Dhamaan ka maqnaashada dugsiga uusan soo ogolaanin maamulaha dhismaha waxaa diiwaanka loo gelin doonaa sida maqnaashada “aan la fasaxin” ama “la gooyay”.

Qeybta 517.12 Sharciyada u Dagsan Westerville Wuxuu Leeyahay: Qofna, waalidka ama ilaaliyaha ama qofka sharci ahaan haaya ama kantaroola cunugga, si dayacan uma ogolaan doono cunugga, in uu gooyo dugsiga marka sharciyada Gobolka amraan in uu cunugga tago dugsiga.

Xisaabinta Imaashada Ardayga (Caruurta Maqan iyo Kuwa Aan Soo Xaadirin)

Guddiga Waxbarashada Westerville wuxuu taageersan yahay dadaalka gobolka iyo qaranka si loo yareeyo tirada ardayda maqan. Sidaas darted, shaqaalaha dugsiga waxay isku dayi doonaan in ay aqoonsadaan caruurta maqan sida suurtogalka ah iyo in ay ogeysiiyaan dadka waweyn iyo wakaaladaha ku habboon.

Horaanta marka ardayga gelaayo dugsiga, ardayga ama waalidka ardayga/ilaaliyaha ayaa soo gudbin doono shahaadada dhalashada asalka ah, shahaadada diinta oo muujisa taariikhda dhalashada, ama warqadda dhalashada lagu dhaarto (affidavit) iyo koobiyada diiwaanka lagu haayo dugsigii dhawanahaan la tagay, waana in loo gudbiyo xafiiska qaabilsan ogolaashada. Waxaa laga sameysan doonaa koobiyo kaddibna waa la soo celin doonaa. Dhalinta aan guri lahayn, fiiri Siyaasadda Guddiga 5111.01 si aad u heshid macluumaad ku saabsan sida loo bixiyo warqadaha diiwaan gelinta.

Ka Daahidda Dugsiga iyo Rawaxaadda Hore

Waxaa dhici karto in waalidiinta/ilaaliyeyaasha ka codsadaan maamulaha dhismaha ama qofka isaga/iyada mattala in loo ogolaado in cunugga ka soo daaho dugsiga ama in horay looga fasaxo dugsiga. Inkastoo ogolaashada soo daahidda ama horay u ruqseynta aan la dhiiri gelinin, Guddiga wuxuu aqoonsan yahay in ay soo bixi karaan xaalado gaar ah oo ku habboon in la siiyo soo daahidda ama horay u bixidda.

Asbaabta noocaas ah waxaa ka mid ah degdegga qoyska ama xanaanada takhtarka/ilkaha. Hase ahatee, ballamada takhtarka iyo ilkaha waa in la ballansado dugsiga kaddib ama dhamaadka todobaadka, haddii ay suurtogal tahay.

Haddii loo baahdo in horay loo fasaxo ama la soo daaho, warqad gaaban u soo dir dugsiga taasoo sharaxeyso sababta loo rabo in horay loo fasaxo ama laga soo daaho imaashada iyo waqtiga uu cunugga tagi doono ama imaan doono. Agaasimaha ama qofka uu isaga/magaacabay in uu mattaloayaa go'aan ka gaari doono haddii loo baahan yahay in la ogolaado codsiga gadaal ka imaashada ama horay u sii deynta. Sarakiisha dugsiga waxay codsan karaan in shakhsiyaadka noocaas ah muujiyaan aqoonsi habboon. Saraakiisha dugsiga waxay codsan karaan in qofka noocaas muujiyo aqoonsi sax ah.

Lama sii deyn doono arday caafimaad ahaan itaal darran lagana yaabo in itaal darrida ku dhalliso naafonimo haddii uusan la joogin qof wehliya isaga/iyada. Ma jiro arday loo dhiibi doono qof kale oo aan ahayn waalidka/ilaaliyaha ardayga, haddii aan fasax laga haysanin waalidka/ilaaliyaha. Sarakiisha dugsiga waxay waalidka/ilaaliyaha ka codsan karaan warqadaha aqoonsiga ku habboon.

Lama siin doono soo daahidda ama horay u bixidda marka ogolaashada noocaas ah faragelin ku sameyso shaqada barnaammijka ama hawsha dugsiga, furitaanka dugsiga, ka tagidda dugsiga ama gaadiidka, ama marka ogolaashada noocaas ah waxyeelo darran u geysato waxbarashda ardayga ama halis ku abuurto amaanka.

Ardayda aan tagin fasalka dugsiga ay ku qoran yahiin waqtiga bilowga ee loo qabtay waxaa loo qaadan doonaa in ay soo “daaheen” waxaana sidaas loogu calameen doonaa diiwaanka tagiida.

Shaqada Gadaal Laga Sameeyo

Ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay gadaal ka sameyaan shaqada la gaffo muddada maqnaashada la ogol yahay ama aan la fasixin. Kaddib marka lagu soo noqdo dugsiga, shaqada gadaal laga sameeyo waxaa lagu dhamaystiri doonaa muddo la’eg maalmaha la siiyay maqnaashada la fasaxay gudahooda. Ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayga ayaa mas’uul ka ah helitaanka wararka ku saabsan shaqada la gaffay.

Haddii ardayga uu filaayo in uu maqnaan doono in ka badan saddax (3) maalin dugsiyeed oo isku xiga, isaga/iyada waxay macalimiinta ka codsan karaan shaqada marka ay wacaan Xafiiska Tagidda ee dugsiga. Shaqooyinka waxaa laga qaadan karaa xafiiska maalinta ku xigta codsiga.

DAGGANAASHADA

Si ardayga loogu qoro Dugsiyada Magaalada Westerville, waalidka haayo ardayga waa in uu daggan yahay gudaha Dagmada Dugsiga Westerville ama waa in uu buuxiyo mid ka mid ah sharuudaha Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybta 3313.64 sidahoos yimaado haynta sharciga ee joogtada ah ee qof aan ahayn waalidkooda, xaq u yeesho waxbarashada khaaska ah, daggan yahay guriga caruurta ama guri kale oo la daggo, ama la daggan yahay qof cunugga lagu meeleeyay si uu u korsado. Diiwaan gelinta waa in ay soo gogolaato W.C.S. Xarunta Ilaha Qoyska iyo Diiwaan Gelinta.

Dugsiga la Tago

Ardayda waxaa lagu qoraa in ay tagaan dugsi sida ku saleysan meesha uu daggan yahay waalidka haaya (ilaaliyaha sharciga) haddii waalidka ama ilaaliyaha ardayga uusan soo codsanin wareejinta ka dhexeyso dagmada dhexdeeda, aan ogolaashana laga soo qaadanin Agaasimaha ama qofka uu qaabilsan. Xuduudda dugsiyada dagmada ee ku yaala dugsiyada dagmada Westerville waxaa dajin doono Agaasimaha, waxaan la ogeysiin doonaa Guddiga Waxbarashada. Marka la dajinaayo xuduudaas, waxaa tixgelinta ku habboon la siin doonaa awoodda dhismooyinka, cabbirka fasalada, masaafooyinka, qaabka dhulka, gaadiidka iyo qodobo kale oo munaasab ah. Waalidiinta waxaa laga rabaa in ay ogeysiyaan agaasimaha dhismaha ama qofka uu isaga/iyada u magacaawdaymarka cinwaanka isbaddalo.

Ka Guuridda Dagmada

Haddii ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ka guuraan Dagmada Dugsiga Magaalada Westerville ka hor inta aysan dhamaysanin sannad dugsiyeedka, ardayda ku jirta sannadka ugu dambeeyo dugsiga sare waxaa loo ogolaan doonaa in ay dhamaystiraan sannad dugsiyeedka iyaga oo aan bixinin kharashka waxbarashada taasoo ku xeran ogolaashada Guddiga sida ku qoran Xeerka La Baddalay ee Ohio 3313.64.

Dagganaashadaiyo Ilaalinta Sharciga

Haddii waalidiinta kala tagaan ama is-furaan ama guurkooda burburo ama la tirtiro, “waalid” waxaa loola jeedaa waalidka la siiyay haynta guriga ee cunugga xagga ujeedooyinka dugsiga.

Marka cunugga ku jiro haynta sharciga ee joogtada ah ee “haayaha”, sida wakaalad ka tirsan dawladda ama qof aan ahayn waalidka laxmiga ama waalidka soo korsaday, “waalid” waxaa loola jeedaa waalidka ka tagay haynta iyo xuquuqda waalidnimada u soo hartay, axsaanka, iyo mas’uuliyadaha. Daganaashada iyo Ilaalinta waxaa sifeeyo Xeerka La Baddalay ee Ohio 3313.64(A)(1).

Kiisaska haynta wadajirta, waxaa dhici karto in cunugga tago dugsi ku yaala dagmada sida ay u meeleyso maxkamadda. Haddii maxkamadda aysan sameynin meeleyn, waxaa dhici karto in cunugga uu tago dagmada uu isaga/iyada la daggan yahay waalidka. Sida ku jirto maslaxadda ugu wanaagsan ee ardayga, isaga/iyada waa in ay tagto hal dugsi oo ku yaala dagmada.

Isbaddal kasta oo ku yimaada haynta inta lagu jiro sannad dugsiyeedka waa in loo sheego maamulaha dhismaha iyo waa in koobiga warqadaha haynta la geliyo faylka dhismaha uu ardayga tago.

Arrimaha Ardayga Aan Daganeyn

Hababka Maamula Diiwaan Gelinta Ardayga Aan Daganeyn ee uu Sameeyo “Waalidka” aan Ardayga Haynin ama Qofka aan Waalidka Ahayn

1. Ka hor inta aan la diiwaan gelinin, waalidka haaya cunugga wuxuu W.C.S. Xarunta Diiwaan Gelinta iyo Ilaha Qoyska oo warqado ka haysata faylka maxkamadda taasoo tilmaanta in waalidka aan haynin cunugga, qaraabada ama qofka aan ahayn waalidka, abuuray dacwado si uu u helo haynta cunugga.
2. Oraahda dhaarta waxaa ka mid ah magaca waalidka aan haynin cunugga, cinwaanka, magaca cunugga, magaca iyo cinwaanka waalidka haaya cunugga, magaca iyo cinwaanka dugsiga uu tagay cunugga markii ugu dambeysay, iyo magaca iyo cinwaanka qareenka.
3. Kaddib marka la helo warqadaha maxkamadda, cunugga wuxuu tagi doonaa Dugsiyada Magaalada Westerville mana bixin doono kharashka waxbarashada muddo aan ka badneyn lexdan (60) maalin ama tirada ugu yar maalmaha uu sharciga rabo.
4. Hadii haynta lagu wareejiyo waalidka laxmiga ama waalidka soo korsaday ee daggan Dagmada Dugsiga Westerville muddo lexdan (60) maalin gudahooda, ma jiri doono kharash lagu soo dallaco.
5. Waalidka daggan Westerville waa in uu W.C.S. Xarunta Ilaha Qoyska iyo Diiwaan Gelinta siiyo warqadaha sharciga ay maxkamadda sharciga isaga/iyada siisay in ay haayso.
6. Haddii aan la siinin haynta sharciga muddo lexdan (60) maalin gudahooda, bixinta kharashka waxay waajib ku tahay waalidka muddada uu ardayga ku qoran yahay. Waxaa dhici karto in ardayga laga wado dugsiga haddii aan la bixinin kharashka waxbarashada.

   Isbaddal kasta oo ku yimaada haynta inta lagu jiro sannad dugsiyeedka waa in la ogeysiiyo waalidka/ilaaliyaha iyo waa in koobiyada warqadaha haynta la geliyo faylka dhismaha uu cunugga tago.

HAWLAHA GUUD

Keenista iyo Fariimaha

Marka laga reebo degdegga, ma jiro fariimo ama wax loo keeni karo ardayda inta lagu jrio maalin dugsiyeedka. Lama ogolaan doono in ardayda loo keeno waxyaabaha sida ubaxa, buufinta, iwm. Telefoonada loo soo diro ardayga in lagu xasuusiyo ballan ama adeeg lama gaarsiin doono ardayda.

Ogeysiiska Duubidda Fiidiyowga Fasalka

Macalimiinta dagmada, sida qeyb ka mid ah xaqiijintooda, qiimeynta iyo horumarinta aqoonta, iyo sidoo kale macalimiinta ardayda ka shaqeyso shahaadooyinkooda waxbarashada kulliyadaha iyo jaamacadaha deegaanka, waxaa dhici karto in ay marmar iska duubaan fiidiyow iyaga oo tababar ka bixiya gudaha fasalka. Haddii waalidka ama ilaaliyaha sharciga uu rabo in uu iska ilaaliyo suurtogalka in fiidiyow laga duubo cunugooda waqtiga tababarka, waxaa la qorsheyn karaa wax taa fududeeya. Fadlan ogeysii agaasimahaada adiga oo u qora ugu dambayn Sateembar 30 sannad dugsiyeedka socda haddii aad doontid in aad fududeyntaan u codsatid cunugaada.

Kormeerka Fiidiyowga iyo Kor Ka Eegidda Elatarooniga

Caadi ahaan, kormeerka fidiyowga waxaa loo adeegsadaa si jawi ku wanaagsan amaanka iyo waxbarashada loo siiyo shaqaalaha, ardayda iyo dadka soo booqda dhismaha dugsiga iyo waqtiga la raaco gaadiidka baska.

Hababka Degdegga

Haddii lala kulmo degdeg, waxaa lagu dadaali doonaa in siyaabo badan lagu sameeyo isgaarsiinta. Waxaa dhici karto in waalidiinta ay macluumaadka ka helaan kanaalo badan ay dagamadda adeegsato, sida, kumana eka: bogga internetka dagmada (www.wcsoh.org), ogeysiisyada e-mailka, fariimaha qoran, iyo ogeysiisyada laga soo daayo telefishanka xaafadda iyo saldhigyada raadiyaha. Fadlan xasuuso in si loo helo qoraalka degdegga iyo fariimaha e-mailka, qoysaska waa in ay soo booqdaan bogga internetka dagmada kaddibna isku qoraan si ay dagmada uga helaan isgaarsiinta elatarooniga.

A. Xeritaanka Dugsiga Degdegga
   Haddii loo baahdo in la xero ama la daahiyo bilowga Dugsiyada Magaalada Westerville, waxaa la soo gudbin doonaa ogeysiisyo sida, kumana eka, bogga internetka dagmada, isgaarsiinta e-mailka, fariimaha qoran iyo idaacadaha laga soo daayo raadiyaha xaafadda iyo saldhigyada telefishanka u adeega deegaanka Franklin County. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay dhageystaan ogeysiiska xaritaanka ama daahinta Dugsiyada Westerville.

B. Leyliga Dabka
   Leyliga dab damiska ee loo fuliyo si nidaam ah waxay qeyb lagama maarmaan ah ka yahiin barnaamijka dugsiga. Ardayda waxay ka tagi doonaan dhismaha iyaga oo raaca tilmaamaha “ka bixidda dabka” ee fasalka. Dhamaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/dadka soo booqda waxaa laga rabaa in ay ka baxaan dhismaha.

C. Baaritaanada K-9

Fattashaadda K-9 waxaa loo sameyn doonaa si lama filaan ah iyo sida uu u garto Agaasimaha ama maamulaha dhismaha.

D. Leyliga Xeritaanka
Leyliga xeritaanka waxaa la qaban doonaa hadba muddo kaddib taasoo qeyb ka ah barnaamijka amaanka dugsiga. Waalidiinta/dadka soo booqda waxaa laga rabaa in ay la shaqeyaan dadaalka dugisga ka wado hawlgalada leyliga noocaas.

E. Xeritaanka
Haddii boliiska hawl ka wado meel u dhaw dugsiga, waa la xeri doonaa dugsiga.

Inta uu socdo xeritaanka, ardayda waa in ay ku sugan yahiin gudaha dhismaha. Qofna looma ogola in uu galo ama ka baxo dhismaha, waxbarashada waxay u socon doontaa sida caadiga ay ahaan jirtay. Xeritaanka wuxuu socon doonaa ilaa boliiska muujiyaan in halis aysan jirin. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/dadka soo booqda waxaa laga rabaa in ay la shaqeyaan dadaalka dugsiga ugu jiro in uu kantaroolo gelitaanka dhismaha dugsiga inta ay socoto xeritaanka dhismaha.

F. Hababka Daluuliyaha
Ardayda waxaa loo qabtay meel amaan ah oo ku wanaagsan badbaadinta inta ay socoto digniinta daluuliyaha. Leyliga waxaa loo qaban doonaa si loo fududeeyo nidaamkaan waxaana la siin doonaa tilmaamo gaar ah oo ku saabsan amaanka. Dhamaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa laga rabaa in ay meel ka galaan sida qorshaha amaanka dhismaha yahay.

Helitaanka Adeegga Raashinka iyo Dabeecadda Makhaayadda Qaxwadda

Barnaamijka cuntada lacag la'aanta ah ama la dhimay waxaa heli kara ardayda xaqa u yeelata sida hoos timaado tilmaamaha federaalka. Barnaamijka quraacda lacag la'aanta ah ama la dhimay waxaa heli kara ardaydena sida hoos timaado tilmaamaha federaalka.Ardayda qaaba baahida cuntada khaaska ah, fadlan la xariira maamulaha adeegga cuntada dugsiga iyo ogeysii kalkaalinta dugsiga. Si aad u heshid macluumaad badan, la xariir dugsiga ama xafiiska adeegga raashinka.

Qadada waxaa la cuni doonaa waqtiyada loo qabtay xagga qadada saxanka iyo habka gaariga marka la soo qaado ardayda dugsiga sare iyo dhexe. Ardayda waxay kaloo soo qaadan karaan qadadooda. Ardayda waxay kaloo heli karaan barnaamijka quraacda. Fadlan la xariir xafiiska dugsigaada si aad u heshid tafaasiisha iyo kharashka ku baxa barnaamijkaan. Ardayga waxaa laga codsadaa in ay dhowraan sharciyada soo socda ee ku saabsan xushmadda:

A. In ay ku haraan qolka qadada ilaa laga gaaro dhamaadka xissada ama ilaa uu ka fasaxo qaangaarka kormeerka;.
B. Ha goynin safka qadada;.
C. Ha tuurin raashinka, warqadda, ama waxyaabaha kale.
D. Dhamaan raashinka ama cabbitaanka waxaad ku cuntaa kuna cabtaa gudaha goobta quraacda/qadada.
E. Ka qaad dhamaan alaabta ay saareen miiska korkiisa ka hor inta aysan tagin. Dhamaan warqadaha iyo qashinka waa lagu dhex rido weelasha qashinka.
F. Waa in aad sharaf iyo xushmad u jeedisid dhamaan shaqaalaha makhaayadda qaxwada, ilaaliyeyaasha iyo kormeereyaasha waaweyn.

Diiwaanka Shaqada Ardayga, Kaararka Darajada

Diiwaanka Shaqada Ardayga ama kaarka darajada wuxuu bixiyaa macluumaad kooban oo ku saabsan shaqada u qabto ardayga iyo sida uu u tago dugsiga. Diiwaanka Waxqabadka Ardayga ama kaararka darajo bixinta waxaa laga heli karaa internetka marka la adeegsado siistemka warbixinta darajada elataroonigga Dagmada. Waalidiinta waxay qaadan karaan koobi adag hase ahatee waa in ay qoraal ahaan ka soo codsadaan agaasimaha dugsiga ama qofka uu isga/iyada magacaawday.

Mushaarka aan la Bixinin

Waxaa dhici karto in Guddiga ku dhaqmo sharciyada iyo qaanuunka soo saarakhidmadaha alaabta loo adeegsado koorsada waxbarashada iyo kharashka lagu dallaco ilmaha xagga lumista, khasaarada, ama burburka loo geysto qalabka dugsiga, aaladaha, qalabka muusikada, alaabta maktabka, buugaagta, ama buugaagta elatarooniga ee loo baahan yahay in la keeno lacag la'aan, iyo khasaaraha loo geysto dugsiga, waxaana dhici karto in la hirgeliyo bixinta khidmadaha iyo dallacaadda noocaas ah marka la reebo darajooyinka iyo saacadaha cunugga laga hadlaayo. Haddii talaabada la qaaday aysan dhallinin in la soo qaado khidmad, Guddiga wuxuu Khasnajiga u fasaxaa in uu qaado talaabada sharciga ku habboon ama talaabo kale si loo soo celiyo kharashka.Fiiri Qeybta Xeerka Ohio ee La Baddalay 3313.642(C).

Lumay Lana Helay

Alaabta lunta, fadlan ka fiiri xafiiska weyn. Haddii ay dhacdo in ardayga uu helo shay, isaga/iyada waa in ay u dhiibaan mid ka mid ah xogeynta xafiiska. Si loo fududeeyo soo celinta marka waxa lumay, magacyada ardayda waa in lagu qoro dhamaan buugaagta iyo hantida kale.

Waxyaabaha Qofka Leeyahay

Ardayda waa in aysan keenin alaabta shakhsiga ee laga yaabo in ay carqalad geliyaan ama ka sii jeediyaan waxbarashada, kumana eka, isgaarsiinta hawada ama qalabka fanka. Lama ogola in xerada dugsiga lagu watto looxa lagu taraaraxo iyo baskiilada, looxa lugaha, mootooyinka yaryar, ama mootooyinka caadiga, marka laga reebo kuwa caafimaad ahaan lagu tilmaamo in ay yahiin lagama maarmaan.Dugsiga ma qaadan karo mas'uuliyadda wixii luma ama khasaaro gaarto.

Xoolaha Guri Joogga iyo Xoolaha Jooga Dugsiga

Si loo badbaadiyo caafimaadka, amaanka iyo daryeelka ardayda iyo si loo xajiyo tayada jawiga waxbarashada, xoolaha yaryar ee la korsado iyo xayawaanka LOOMA OGOLA gudaha dugsiga. Xaaladaha marka darsi gaar ah u baahan yahay xoolaha la korsado ama xayawaanka, maamulaha ama qofka qaabilsan ayaa ogolaan kara codsigaan. Dadka itaalka darran waxaa loo ogol yahay in ay soo raacaan xoolaha u adeegga.

Dhajinta Calaamadaha/Qeybinta Warqadaha

Qof kasta oo rabo in uu gudaha dugsiga ama xerada dugsiga ku dhajiyo calaamad ama qeybiyo qoraal la soo daabacay waa in uu ogolaasho ka helo Agaasimaha ama qofka qaabilsan.

Diiwaanada Ardayga

Sharciga Federaalka iyo Gobolka iyo sidoo kale siyaasadda Guddiga waxay xadidaan kashifaadda

macluumaadka aqoonsiga shakhsiga ee ku jira diiwaanka ardayga. Caadi ahaan, macluumaadka noocaas ah lama kashafi karo haddii aan ogolaasho qoran laga haysanin waalidka/ilaaliyaha ardayga ama ardayga qaan gaaray. Ogolaashada shardigaan waxaa ka reeban kashifaadda diiwaanka la siiyo sarakiisha dugsiyo kale, kashifaaddaloo baahan yahay sida hoos timaado amar ka soo baxay maxkamadda ama amar maxkamadda soo saartay oo ku saabsan maragta la furo, kashifaadda lagu fududeeyo wareejinta ardayga, kashifaadda macluumaadka jadwalka iyo kashifaadda la xariirta degdegga caafimaadka ama amaanka. Tafasiil dhamaystiran oo ku saabsan sii deynta diiwaanka ardayga iyo waxyaabaha ka reeban ee lagu dabaqi karo sharuudaha ogolaashada qoran waxaa laga heli karaa meelo kale oo ku jira Siyaasadda Guddiga.

Ogeysiiska Sannadka ee ku saabsan Diiwaanada Ardayga

Sharciga Xuquuqda iyo Asturnaanta Waxbarashada Qoyska (FERPA) wuxuu waalidiinta iyo ardayda dadooda ka weyn tahay 18 sanno (“ardayda loo ogol yahay”) u ogol yahay xuquuq xagga diiwaanka waxbarashada ardayga. Xuquuqdaan waxay yahiin:

1. Xaqa in la baaro lana fiiriyo diiwaanka waxbarashada ardayga muddo 45 maalin gudahooda kaddib marka Dagmada hesho codsiga in ay gasho.

   Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha ama ardayda xaqa u yeelata waa in ay agaasimaha dugsiga (ama sarkaalka ku habboon Dagmada) codsi qoran oo aqoonsada diiwaanka (diiwaanada) ay rabaan in ay baaraan. Sarkaalka Dagmada wuxuu sameeyn doonaa ballan lagu helo wuxuuna waalidka iyo ardayga loo ogol yahay ogeysiin doonaa waqtiga iyo meesha diiwaanka lagu baari karo.

2. Xaqa loo leeyahay codsiga lagu baddalo diiwaanka waxbarashada ardayga uu waalidka ama ardayga loo ogol yahay aaminsan yahay in uusan sax ahayn, marin habaabiyo, ama si kale u jebiya xuquuqda asturnaanta ardayga.

   Waalidiinta/ilaaliyeyaasha ama ardayda xaqa u yeelata waxay Dagmada weydiisan karaan in ay baddasho diiwaanka ay iyaga aaminsan yahiin in uu qaldan yahay, marrin habaabiyo, ama jebiyo xuquuqda asturnaanta ardayga. Waalidka (Waalidiinta), ilaaliyaha/ilaaliyeyaasha ama ardayga loo ogol yahay wuxuu warqad u qori doonaa maamulaha dugsiga (ama sarkaalka ku habboon), si cad u tilmaanta qeybta xogta ay rabaan in la baddalo, iyo in ay sheegaan sababta aysan sax u ahayn, u marin habaabiso, ama u jebiso xuquuqda asturnaanta ardayga. Maamulaha dugsiga ama qofka isaga/iyada mattashawaxay go’aan ka gaari doontaa haddii isaga/iyada muddo macquul ah gudaheeda ku baddali doonto diiwaanka kaddib marka la soo codsado, kana badneyn afartan-iyo-shan (45) maalin kaddib marka la soo gudbiyo codsiga. Haddii agaasimaha dugsiga ama qofka uu isaga/iyada magacaawadaygo'aan ku gaaro in uu siiyo codsiga, isaga/iyada waa in ay sidoo kale baddasho diwaanka. Haddii maamulaha dugsiga ama qofka mattala uu go’aan ku gaaro in aan la baddalin diiwaanka sida uu codsaday waalidka/ilaaliyaha ama ardayga loo ogol yahay, maamulaha dugsiga ama qofka mattala wuxuu waalidka/ilaaliyaha ama ardayga loo ogol yahay ogeysiin doonaa go’aanka la gaaray wuxuuna u sheegi doonaa xaqa ay u leeyahiin dhageysiga ku saabsan codsiga baddalaadda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka dhageysiga waxaa la siin doonaa waalidka/ilaaliyaha ama ardayga xaqa u yeesha marka loo sheego xaqa loo leeyahay dhageysiga. Haddii, taasoo ka dambeyso dhageysiga la qabto, la go'aansado in macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada uusan ahayn sax, marrin habaabiyo, ama si kale u jebiyo xuquuqda asturnaanta ardayga, waa la baddali doonaa diiwaanka sida ku habboon, kaddibna waalidka/ilaaliyaha ama ardayga xaqa u yeesha waxaa baddalaadda lagu ogeysiin doonaa qoraal. Haddii, taasoo ka dambeyso dhageysiga la qabto, la go'aansado in macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada uusan qalad ahayn, marrin habaabinin, ama si kale u jebinin xuquuqda asturnaanta ardayga, waalidka/ilaaliyaha ama ardayga xaqa u yeesha waxaa loogu sheegi doonaa sidaas kaddibna waxaa la ogeysiin

doonaa xaqa uu u leeyahay in uu oraah geliyo diiwaanka kana bixiyo faalo macluumaadka lagu muransan yahay iyo/ama sheego sababta isaga ama iyada u qilaafsan tahay go'aanka Dagmada. Haddii Dagmada ay warkaas geliso diwaanka waxbarashada ardayga, Dagmada waxay xajin doontaa warkaas waxayna raacin doontaa qeybta laga murmay diiwaanka ilaa inta diwaanka la xajiyo waxayna kashafi doontaa warkaas mar kasta ay kashafto qeybta diiwaanka uu warka la xariiro.

3. Xaqa loo leeyahay in la ogolaado kashifaadda macluumaadka aqoonsiga qofka ee ku jira diwaanka waxbarashda ardayga, marka laga reebo ilaa inta FERPA ogoshahay kashifaadda aan ogolaashada loo haysanin.

   Hal shay ka reeban oo fasaxa kashifaadda aan amarka loo haysanin waa kashifaadda la siiyo sarakiisha dugsiga kuwasoo sharci ahaan daneeyo waxbarashada. Sarkaalka dugsiga waa qof uu Guddiga u shaqaaleeyay sida maamule, kormeere, macalin/tababare (kana mid ah kuwa lagu baddalo), ama xubin ka tirsan shaqaalaha taakuleynta (kana mid ah shaqaalaha caafimaadka ama daweynta iyo shaqaalaha qeybta hirgelinta sharciga); iyo qof u adeega Guddiga. Guddiga waxay kaloo qofka iyo hay'adda soo socoto u magacaawday "saraakiisha dugsiga" xagga FERPA:

   > A. Dadka iyo/ama shirkadaha uu Guddiga la galay heshiis in uu fulliyo hawl gaar ah (sida qareen, xisaabiye, wakiilka ceymiska, ama la-talliyaha caafimaadka), iyo
   >
   > B. Qandaraasleyaasha, la-talliyeyaasha, dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso ama dhinacyada kale uu Guddiga siiyay adeegga ama shaqada ay fulliyaan shaqaalaha Guddiga [tusaale ahaan, daweeyaha, shaqaalaha farsamada wararka (IT), iyo bixiyeyaasha adeegga waxbarashada internetka ee la ogolaaday].

   Dhinacyada dibadda ee kor lagu xussay waa in ay (a) fulliyaan adeegyada iyo hawlaha hay'adda uu Guddiga u adeegsan doono shaqaalaha, (b) toos u hoos yimaadaan kantaroolka Guddiga xagga isticmaalka iyo xajinta diiwaanada waxbarashada, iyo (c) hoos yimaadaan sharuudaha 34 C.F.R. 99.33(a) ee xakuma isticmaalka iyo dib u kashifiddaPII lagana soo qaado diiwaanada waxbarashada.

   Ugu dambayn, waalidka ama ardayga u adeega guddiga rasmiga ah, sida guddiga dishibiliinka ama cabbashada, ama kaalmeeya sarkaal kale si uu u fulliyo hawshiisa/hawsheeda (sida hawlaha iskaa wax u qabso) waxaa kaloo loo haystaa "sarkaalka dugsiga" xagga ujeedooyinka FERPA hase ahatee isaga/iyada waa in ay la kullanto habka tixraaca kor lagu xussay ee lagu dabaqi karo dhinacyada dibadda.

   “Maslaxadda waxbarashada sharciyeysan” waxaa lagu sifeyaa mas’uuliyadda toos ahaan qofka loo dhiibay ama loo xil saaray si uu ardayga ugu kaalmeeyo in uu gaaro hal shay oo ka mid ah himilooyinka Dagmada ama ka badan, ama haddii diiwaanka loo baahan yahay si sarkaalka Dagmada u fuliyo hawsha maamulka, kormeerka, ama tababarka ama in la fuliyo adeegga ama danta ugu jirto ardayga ama qoyska ardayga.

   Dagmada waxay kaloo kashiftaa diiwaanka waxbarashada ardayga iyadoo aan ogolaasho laga haysanin waalidka ama ardayga xaqa u yeesha sida hoos timaado xaaladaha soo socda:

a. Kaddib marka ay soo codsadaan in la siiyo sarakiisha dugsi kale, dugsiga dagmada ama siistemka dugsiga, ama waxbarashada ka dambeyso dugsiga sare uu ardayga isku qoray ama ku talo jiro in uu isku qoro. Intaas waxaa dheer, in Dugsiga uu wakaalad ama hay’ad kale oo wax laga barto u kashafi karo diiwaanka waxbarashada ardayga haddii ardayga uu adeegyo ka qaato wakaalad ama hay’ad kale oo wax laga barto;

b. Kashifaadda ku socoto sarakiisha federaalka ama gobolka ama madaxda waxbarashada deegaanka;
c. Marka kashifaadda ku lug leedahay macluumaad lagama maarmaan ah oo la xariirta kaalmada maaliyadda uu ardayga codsaday ama ardayga qaatay;
d. Marka kashifaadda ku socoto sarakiisha ama madaxda gobolka ama deegaanka lana ogol yahay in la soo sheego ama la kashifo sida waafaqsan sharciga u dagsan gobolka kaasoo la dhaqan geliyay bishii Nofembar 19, 1974 ka hor, haddii soo sheegidda la ogolaaday iyo kashifaadda ku lug leedahay siistemka cadaaladda dhalin yarada iyo awoodda siistemka u leeyahay in uu si waxtar leh ugu adeego ardayga ka hor inta aan la go'aaminin; iyo, meelaha kashifaadda macluumaadka uu ogol yahay sharciga gobolka kaasoo la dhaqan geliyay bishii Nofembar 19, 1974, sarkaalka gobolka iyo madaxda loo kashifaayo diiwaanka, qoraal ahaan u xaqiijiyaan dugsiga in macluumaadka aan loo kashifi doonin dhinac kasta oo kale, marka laga reebo sida uu rabo sharciga gobolka, iyadoo aan la haysanin ogolaashada qoran ee waalidka ardayga;
e. Makra kashifaadda ku socoto ururada ku hawlan darasaadaka loo qabto ama lagu qabto magaca, wakaaladaha waxbarashada ama hay'adaha si loo horumariyo, loo aqoonsado ama loo siiyo imtixanaadka saadaalinta, loo siiyo barnaamijyada kaalmada ardayga, ama loo horumariyo tababarka;
f. Marka kashifaadda ku socoto ururada bixiya buundooyinka si ay u fuliyaan hawshooda buundo bixinta;
g. Kashifaadda ku socoto waalidiinta arday ku tiirsan, sida ku sifeysan Xeerka Daqliga Gudaha;
h. Marka loo hoggaansamaayo amarka cadaaladda ama amarka maxkamadda siiso maragta;
i. Degdegga caafimaadka iyo amaanka, hadba meesha lagama maarmaanka ah si loo badbaadiyo caafimaadka iyo amaanka ardayga ama shakhsiyaadka kale; ama
j. Horudhaca waxay ku socotaa waalidka/ilaaliyaha ardayga aan ahayn ardayga xaqa u leh ama waxay ku socota ardayga.

"Macluumaadka Jadwalka" waa macluumaadka lagu aqoonsado qofka ee ku jira diiwaanka waxbarashada ardayga oo aan guud ahaan loo arki karin in uu yahay wax dhibaato keena ama soo dhaafa asturnaanta haddii la kashafo. Sida hoos timaado sifeyntaan, Dagamada waxay macluumaadka aqoonsiga qofka ee soo socda kuna jira diwaanka waxbarashada ardayga in uu yahay "macluumaadka jadwalka" waxayna kashafi doontaa macluumaadkaas iyadoo aan haysanin ogolaashada qoran ee waalidka ama ardayga loo ogol yahay, marka laga reebo marka codsiga ku toosan yahay qorshaha fa'iido sameynta ama hawl; magaca ardayga, maadada weyn uu barto, taariikhda uu tago, heerka darajada uu iminka qaato, ka qeybqaadashada hawlaha dheeraadka ah ee ka baxsan manhajka iyo isboortiga, joogga iyo miisaanka haddii xubinta ka tirsan tahay kooxda jimicsiga, taariikhda qalin jebinta, sharafta iyo hadiyadaha la qaatay, iyo hay'adaha iminka jira ama kuwii hore uu ardayga tagay.

Intaas kaddib, Dagmada waxay magacyada, cinwaanada, iyo nambarada telefoonada ardayda dugsiga sare siin doontaa shaqaaleynta ciidamada si loogu meeleeyo laan kasta oo ka tirsan Ciidamada Hubeysan ee Mareykanka, ama hay'ad kasta oo ku hawlan waxbarashda sare, ee soo dalbata macluumaadka noocaas, haddii ardayga dugsiga sare ama waalidka ardayga dugsiga sare uusan soo codsanin in macluumaadka noocaas aan la bixinin haddii aan ogolaashada laga haysanin waalidka/ilaaliyaha.

Guddiga wuxuu bixiyaa emailada dugsiga sida "macluumaadka jadwalka" ujeedadana waxay tahay in la fududeeyo diiwaan gelinta ardayda si ay u galaan adeegyada waxbarashada internetka, kana mid ah brogrraamyada dhaqaaqa (mobile applications) uu ardayga u isticmaali doono waxbarashada iyo ku darista buugaagta emailka gudaha. Ma jiro qof ama hay'ad la siin doon emailada dugsiga bixiyo sida macluumaadka jadwalka in ka baxsan ujeedadaan (ujeedooyinkaan) kooban marka laga reebo bixiyaha adeegga waxbarashada internetka iyo kuwa qaabilsan isticmaalka gudaha Farsamada Waxbarashada Dagmada (District's Education Technology).

Waalidka (waalidiinta), ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ama ardayga loo ogol yahay waxay bixin doonaan ogeysiis si loo ogeysiiyo maamulaha dugsiga ama qofka mattala ugu dambeyn Satembar 30 sannad dugsiyeedka iminka socda, qoraal ahaan, haddii wax iska baddalaan mid kasta ama dhamaan waxyaabaha aan la rabin in la kashafo haddii aan la haysanin ogolaashada hore waalidka/ilaaliyaha ama ardayga loo ogol yahay.

4. Xaqa loo leeyahay in cabbasho loo gudbiyo U.S. Department of Education (Waaxda Waxbarashada Mareykanka) kuna saabsan guul darrada dagmada in ay u hoggaansanto sharuudaha FERPA. Magaca iyo cinwaanka Xafiiska maamula FERPA waa:

Family Policy Compliance Office
U.S. Department of Education
400 Maryland Avenue, SW
Washington, DC 20202-4605

Ogeysiiska Xuquuqda Sida Hoos Timaado Badbaadinta Baddaladda Xuquuqda Caruurta (PPRA)

PPRA waxay waalidiinta siisaa xuquuq gaar ah oo ku saabsan sida aan u qabano wareysiyada, aruurinta iyo adeegsiga macluumaadka ujeedadooda tahay suuq geynta, iyo qaar ka mid ah baaritaanada jirka. Kuwaan waxaa ka mid ah xaqa loo leeyahay in:

- Ogolaashada ka hor inta aan ardayda laga dalbanin in ay ogoladaan wareysiga ku lug leh mid ka mid ah meelaha la badbaadiyo ee soo socda (“wareysiga macluumaadka la badbaadiyo”) haddii wareysiga si buuxdo ama qeyb ahaan looga maalgeliyay barnaamij ay leedahay Waaxda Waxbarashda Mareykanka (ED);
    1. Laamaha siyaasadda ama qaacidooyinka ardayga ama waalidka/ilaaliyaha ardayga;
    2. Dhibatooyinka madaxa ama cilmi nafsiga ardayga ama qoyska ardayga;
    3. Dabeecadda ama dhaqanka kacsiga;
    4. Dabeecadda sharci darrada ah, ka soo horjeeda bulshada, dambi isu soo jiida, ama hoos u dhigta;
    5. Cilmi baaris muhiim ah oo lagu sameeyo dadka kale oo lala leeyahay xariir soke xagga qoyska;
    6. Xariir fiican oo sharci ahaan la aqoonsan yahay, sida marka lala leeyahay qareenada, takhatiirta, ama wasiirada;
    7. Dhaqanka diinta, laamaha, ama caqiidooyinka ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha; ama
    8. Dakhliga, marka laga reebo sida sharciga rabo si loo ogaado xaq u yeelashada barnaamijka.

- La helo ogeysiis iyo fursadda looga saaro ardayga:
    1. Macluumaad kasta oo kale ee la badbaadiyo lagana soo qaaday wareysiga, iyadoo aan la fiirinin maal gelinta;

    2. Baaritaan kasta oo aan dagdag ahayn, baaritaan gudaha u gala jirka ama fiirin loo baahan yahay taasoo shardi u ah tagidda, bixiyo dugsiga ama wakiilka dugsiga, aan loo baahneyn si loo badbaadiyo caafimaadka iyo amaanka ardayga, marka laga reebo baaritaanada maqalka, aragga, ama lafaha, ama baaritaan kasta oo lagu sameeyo jirka ama fiirin la ogol yahay ama loo baahan yahay sida hoos timaado sharciga Gobolka; iyo

    3. Hawlaha ku lug leh aruurinta, kashifaadda, ama adeegsiga macluumaadka shakhsiga lagana soo qaaday ardayda xagga suuq geynta ama iibinta ama si kale macluumaadka loogu qeybiyo dad kale.

- La baaro, kaddib marka la soo codsado iyo ka hor inta aan la siinin ama adeegsanin:
    1. Wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo ee ardayda;

    2. Qalabka loo adeegsado si macluumaadka shakhsiga looga soo aruuriyo ardayda xagga mid kasta oo ka mid ah ujeedooyinka kore, suuq geynta, iibka, ama qeybinta kale; iyo

    3. Alaabta tababarka loo adeegsado kuwasoo qeyb ka ah manhajka waxbarashada.

Xuquuqdaan waxaa laga wareejiyaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxayna ku wareegaan ardayga jira 18 sanno ama cunugga qaan gaaray sida hoos timaado sharciga Gobolka.

Dugsiyada Magaalada Westerville ("Dagmada") waxay soo saareen siyaasado, kaddib marka ay la tashteen waalidiinta/ilaaliyeyaasha, xagga xuquuqdaan, iyo sidoo kale qorshooyinka lagu badbaadiyo asturnaanta ardayga xagga maamulka wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo iyo aruurinta, kashifaadda, ama adeegsiga macluumaadka shakhsiga ee loo adeegsado suuq geynta, iibinta, ama ujeedooyinka qeybinta kale.

Dagmada waxay si toos ah waalidiinta/ilaaliyeyaasha u ogeysiin doontaa siyaasadahaan ugu yaraan hal mar sannadkii marka la gaaro bilowga sannad dugsiyeed kasta iyo mar kasta oo la sameeyo isbaddal la taaban karo. Dagmada waxay kaloo waalidiinta/ilaaliyeyaasha siin doontaa macluumaad ku saabsan ardayda ku qoran jadwalka in ay ka qeybgalaan hawlaha gaarka ah ama wareysiyada hoos ku qoran waxayna waalidka siin doonaan fursad uu cunugiisa ama cunugeeda uga saarto ka qeybgalka hawsha gaarka ah ama wareysiga.

Ogeysiiska la siiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa la qaban doonaa bilowga sannad dugsiyeedka haddii Dagmada qiyaas ahaan aqoonsato taariikhda hawlaha ama wareysiyada waqtigaas. Wareysiyada iyo hawlaha ku jiro jadwalka kaddib marka sannad dugsiyeedka bilowdo, waaldiinta/ilaaliyeyaasha waxaa la siin doonaa ogeysiis macquul ah oo ku saabsan hawlaha la qorsheyay iyo wareysiyada ku qoran hoos, waxaana la siin doonaa fursad ay cunugooda uga saaraan hawlahaas iyo wareysiyada noocaas. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa kaloo la siin doonaa fursad ay ku fiiriyaan wareysiyada la xariira.

Waxaa soo socda liiska hawlaha gaarka ah iyo wareysiyada ku jira shardigaan:

- Aruurinta, kashifaadda, ama adeegsiga macluumaadka shakhsiga xagga suuq geynta, iibka, ama qeybinta kale.
- Maamulka wareysiga macluumaadka la badbaadiyo aysan ED maal gelinin idil ahaan ama qeyb ahaan.
- Baaritaan kasta ama fiirin oo gudaha u gala jirka, aan ahayn dagdag sida ku sharaxan kor.

Waalidiinta aaminsan in xuquuqdooda la jebiyay waxay ashtako u soo gudbin karaan:

Family Policy Compliance Office
U.S. Department of Education
400 Maryland Avenue, SW
Washington, D.C. 20202-8520

Takoor La'aanta

Waa siyaasadda Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville in aysan takoorin, taasoo jebineyso sharciga federaalka iyo gobolka xagga isirka, midabka, dinta, asal qaran, jaadka qofka, xaaladda militariga, abtirsiinada, jinsiga (kana mid ah jinsiga qofka ama aqoonsiga jinsiyada), da'da (marka laga reebo sida sharciga ogol yahay), macluumaadka geneetikada, ama itaal darrida (wada jir ahaan, "Dabaqadda la Badbaadiyo") xagga gelitaanka, helitaanka, daweynta, ama shaqada adeegga, brograamka, ama hawsha ay mas'uulka ka yahiin Dugsiyada Magaalada Westerville. Su'aalaha ama ashtakooyinka ku saabsan u hoggaansamida siyaasadaan ama

sharuudaha takoor la'aanta Sharciga Mareykanka Itaalka Darran, Qeybta 504 Rehabilitation Act (Sharciga Dayactirka) ee 1973, Sharciga Takoorka Da'da Xagga Shaqada ee 1975, Qeybta VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga) ee 1964, Qeybta VII ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ee 1964, ama Qeybta IX Baddalaadda Waxbarashada ee 1972 waa in loo diro:

Westerville School District, Elizabeth Jelkin, J.D., M.B.A., Civil Rights/Section 504/ADA Compliance Coordinator
936 Eastwind Drive, Suite 200, Westerville, Ohio 43081,
Telefoonka (614) 797-5900, ama Xafiiska Xuquuqda Madaniga, Waaxda Waxbarashada Mareykanka.

Qorshooyinka 504

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville waxay ballan ku qaaday in ay dhamaan ardayda siiso waxbarasho tayo sare. Qeybta 504 ee Sharciga Dayactirka ee 1973 wuxuu mamnuucay takoorka ku saleysan itaal darrida waxayna hubsataa in ardayda itaalka darran helaan fursadaha waxbarashada la midka ah sida asxaabtooda aan itaalka darneyn. Haddii ardayga lagu tuhumo in uu qabo itaal darri la aqoonsan yahay loona baahan yahay in la fududeeyo si ay ula xariiraan wabarashada, waxaa la fullin doonaa qiimeynta Qeybta 504. Haddii kooxda qiimeynta ogaato in ardayga leeyahay itaal darri la aqoonsan yahay (mid si la taaban karo u xadidda hal ama ka badan hawlaha nolosha) una baahan wax ka qabasho ama taageero ka fidsan kuwa caadi ahaan la siiyo nidaamka waxbarashda, waxaa la qori doonaa Qorshaha 504. Arday kasta oo loo aqoonsado in uu qabo itaal darri sida hoos timaado 504 waxaa la siin doonaa fursado la'eg si uu uga qeybgalo hawlaha waxbarashada, kuwa aan waxbarashada ahayn iyo/ama hawlaha ka baxsan manhajka. Codsiyada kaalmada la siiyo ardayga iyo qiimeynta 504 waxaa lagu toosiyaa maamulaha dhismaha ama qofka u qaabilsan dagmada.

Sharciga Horumarinta Waxbarashada Dadka Itaalka Darran 2004

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville wuxuu ku dadaalaa in uu meeleeyo, aqoonsado, iyo qiimeeyo dhamaan caruurta ilaa da'da 22aadee daggan gudaha dagmada kuwasoo lagu tuhunsan yahay in ay qabaan itaal darri. Caruurta qabta itaal darri waxay xaq u yeelan karaan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira. Codsiyada kaalmada la siiyo ardayga iyo qiimeynta loo baahan yahay waa in qoraal ahaan loo soo gudbiyo maamulaha dhismaha ama u qaabilsanaha dagmada.

Ardayda Guri Laaweyaasha

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville waxay ballan ku qaaday in ay xuquuqda waxbarashada iyo badbaadinta siiso caruurta iyo dhalinta la kulanta guri la'aanta, kana mid ah kuwa qaba itaal darrida, sida hoos timaado Sharciga Kaalmada Guri Laawaha ee McKinney-Vento. Guri la'aanta waa marka aan la qabin guri joogto ah waxaana si balaaran loogu sifeyaa dadka aan qabin hooy cayiman, joogto ah, ku filan ay habeenkii seexdaan. Si aad u heshid warar dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda ardayda guri laaweyaasha ah, fiiri Siyaasadda Guddiga 5111.01, ama la xariir Xafiiska Adeegyada Caafimaadka iyo Amaanka dugsiga dagmada.

SIYAASADDA GUDDIGA 5111.01 - ARDAYDA GURI LAAWEYAASHA

Ardayda la kulanta sida Federaalka u sifeeyo "guri la'aanta" waxaa la siin doonaa waxbarashada dadweynaha, lacag la'aanta ah, ee ku habboon isla sida loo siiyo dhamaan ardayda kale ee Dagmada.Si loo gaaro taas, ardayda guri laaweyaasha ma noqon doonaan kuwa si kale loo fiiriyo ama lagu sooco

xaaladooda guri la'aanta, waxaana lagu qori doonaa dugsiga u adeega ardayda guri laaweyaasha ee daggan isla meesha uu cunugga guri laawaha dhab ahaan ku nool yahay. Dagmada waxay dajin doonta wayaabaha ardayda guri laaweyaasha ah ka badbaadiyo takoorka ku saleysan guri la'aantooda.
Caruurta iyo dhalinta guri laaweyaasha waxaa lagu sifeyaa dadka aan qabin hooy cayiman, joogto ah, ku filan ay habeenkii seexdaan, waxaana ka mid ah kuwa la kulma mid ka mid ah qodobada soo socda:

A. In guriga lala qeybsado dad kale taasoo ugu wacan marka guri la'aan qofka noqdo, la kulmo dhibaato dhaqaale, ama sabab la mid ah
B. In lagu noolaado motelada, hoteelada, gawaarida la dhigo jardiinka, ama kaambka taasoo ugu wacan la'aanta hooy kale oo ku filan.
C. In lagu noolaado hooyga dagdagga ama ku meel gaarka ah
D. Looga tagay isbitaalada
E. Suga ku meeleynta guryaha korinta
F. Qabaan guri ay habeenkii joogaan kaasoo ah meel dadweynaha u furan ama gaar ah hase ahatee aan loo sameynin in caadi ahaan loo adeegsado sida guri aadanaha jiifto, ama
G. Ku nool baabuur, beer, meel dadweynaha u furan, dhismo laga tagay, guri liito, saldhigga baska ama treenka, ama wixii la mid ah

Waxaa intaas dheer, sida waafaqsan sharciga Federaalka iyo Gobolka, caruurta guurguurta ee ku nool xaaladaha ku sharaxan kor A-G waxaa iyagana loo haystaa in ay yahiin guri laawe.
Caruurta guri laaweyaasha aan weli gaarin dugsiga iyo qosaskooda waxaa la siin doonaa isla fursad ay ku helaan adeegyada waxbarashada ay xaqa u leeyahiin, kana mid ah barnaamijyada ka horeeyo dugsiga ay Dagmada Dugsiga maamusho.
Dagmada waxay meesha ka qaadi doontaa waxyaabaha ku dadban ku qoridda iyo celcelinta ardayda guri laaweyaasha ee ku sugan Dagmada. Ardayda guri laaweyaasha waxaa loo qori doonaa si dedeg ah, xataa haddii aysan haysanin dokumentiyada lagama maarmaanka ah ee lagu qoro sida talaalka iyo diwaanka caafimaadka, caddeynta meesha ay daggan yahiin ama ilaalintooda, shahaadada dhalashada, diiwaanka dugsiga, iyo dokumentiyada kale.
Ardayda guri laaweyaasha waxaa la siin doonaa adeegyo la barbar dhigi karo kuwa la siiyo ardayda kale ee ku sugan Dagmada, waxaan ka mid ah:

A. Adeegyada Gaadiidka
B. Adeegyada waxbarashada uu ardayga guri laawaha ka helo xaq u yeelashada sida adeeygada laga xaqiijiyo ee hoos yimaada Cutubka I Sharciga Waxbarashada Hoose iyo Sare (Title I of the Elementary and Secondary Education Act) ama barnaamijyada la midka ah uu Gobolka iyo deegaanka bixiyo, barnaamijyada waxbarashada la siiyo caruurta itaalka darran, iyo barnaamijyada waxbarashada ee la siiyo ardayda aqoontooda Ingiriisiga kooban tahay;
C. Barnaamijyada waxbarashada shaqada iyo farsamada;
D. Barnaamijyada ardayda hibada iyo kartida u leh;
E. Barnaamijyada nafaqada dugsiga; iyo
F. Barnaamijyada dugsiga ka hor iyo kaddib.

Ardayda guri laaweyaasha ah waxay xaq u leeyahiin in ay ku sii sugnadaan dugsigooda asalka ama dugsiga meesha deegaanka ay ka dhigtaan, sida waafaqsan maslaxadda ugu wanaagsan ee cunugga. Dugsiga asalka waa dugsiga uu ardayga tagay marka uu si joogto ah u lahaa guri ama markii ugu dambeysay ku qornaa. Tagidda dugsiga xaafadda waa sida dugsiga dadweynaha ay tagaan una leeyahiin xaq ardayda guri laaweyaasha ee daggan xaafadda ardayga dhab ahaan daggan yahay.

Ardayda guri laaweyaasha ah waxay xaq u leeyahiin in ay ka murmaan dugsiga lagu qoray, haddii dugsiga lagu qoray uu ka duwan yahay dugsigooda asalka. Si loo gaaro maslaxadda ugu wanaagsan ee ardayga, Dagmada waxay, ilaa inta ka suurtogalka ah, ardayga ku hayn doontaa dugsiga asalka, marka laga reebo marka sida la sameeyo ka soo horjeedo rabitaanka waalidka ama ilaaliyaha ardayga guri laawaha ama dhalin yarka aan lala soconin. Haddii ardayga loo diro dugsi ka baxsan dugsiga asalka ama dugsi uu codsado waalidka ama ilaaliyaha, sharaxaad qoran, kana mid ah war ku saabsan xaqa loo leeyahay in laga qaato racfaan, ayaa la siin doonaa waalidka ama ilaaliyaha ardayga guri laawaha ah ama dhalin yarka aan lala soconin.

Guddiga Waxbarashda waxay u baahan tahay in xuquuqdaan iyo nidaamka muranka la gaarsiiyo waalidka ama ilaaliyaha ardayga guri laawaha ama dhalin yarka aan lala soconin.

Ogeysiinta waalidka ama ilaaliyaha ardayga guri laawaha ama dhalin yarka aan lala soconin xuquuqda ku sharaxan kor, waxaa sii dheer in Dagmada ay ogeysiiska dadweynaha ku soo saari doonto xuquuqda waxbarashada caruurta iyo dhalin yarka ku sugan guri la'aanta ee dugsi kasta.

Marka waalidka ama ilaaliyaha codsadaan, ama marka kiiska ku saabsan yahay dhalin yar aan lala soconin, xariiriyaha guri laawaha, gaadiid ayaa la siin doonaa ardayga guri laawaha oo lagu tago loogana soo noqdo dugsiga asalka sida soo socoto:

A. Haddii ardayga guri laawaha sii daggan yahay Dagmada Dugsiga meesha uu ku yaal dugsiga asalka, waxaa la siin doonaa gaadiid sida waafaqsan tilmaamaha siyaasadda Dagmada/maamulka.

B. Haddii ardayga guri laawaha u guuro dagmo kale, kana sii qaato waxbarashada dugsiga asalka, dagmada asalka iyo dagmada uu ardayga daggan yahay waa in ay ku heshiyaan sida loo qeybiyo mas'uuliyadda iyo kharashka ku baxa gaadiidka lagu tago dugsiga asalka. Haddii dagmooyinka aysan ku heshiin karin habkaas, mas'uuliyadda iyo kharashka waa in ay u qeybsadaan si isla'eg.

Agaasimaha wuxuu magacaabi doonaa Xariiriyaha Caruurta Guri Laaweyaasha kaasoo fulin doono waajibaadka uu faro Agaasimaha. Intaas waxaa dheer, Xariiriyaha wuxuu isku duwi doonaa iyo wuxuu la shaqeyn doonaa Isku Duwaha Gobolka xagga Waxbarashada Caruurta iyo Dhalin-yarada Guri Laaweyaasha iyo bulshada iyo shaqaalaha dugsiga ee mas'uulka ka ah waxbarashada iyo adeegyada la xariira ee la siiyo caruurta iyo dhalin yarada aan guri lahayn.

Xariiriyaha gurilaawaha wuxuu kaalmeyn donaa, ilaa inta suurtogalka ah, ardayda guri laaweyaasha iyo waalidka (waalidiinta) ama ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ama ardayda guri laaweyaasha ee aan lala soconin xagga dadaalka ay ku bixiyaan dokumentiyo si loola kulmo sharuudaha Gobolka iyo deegaanka ee lagu galo dugsiga.

Waxaa la hayn doonaa dhamaan diiwaanka ardayda guri laaweyaasha si loo helo waqtiga ku habboon loona wareejin karo isla markiiba hadba sida loogu baahdo.

Guddiga ma qabo siyaasad, hab maamul, ama dhaqan loo tarjumi karo ama loo dabaqi karo si loo hor istaago qorista, tagidda, ama guulasha dugsiga ee caruurta guri laaweyaasha ah.

42 U.S.C. 11431 et seq. (McKinney – Vento Homeless Act)
La Baddalay 1/21/11

Buugaagta/Buugaagta Maktabka/Qalabka

Ardayda waxay mas'uul ka noqon doonaan buugaagta, buugaagta maktabka, qalab iyo alaabta kale ay soo amaahdaan. Waa in la dhowro dhamaan ilaha. Kharashka buugaagta la lumiyo, qalabka, iyo/ama alaabta kale ee la khasaariyo ilaa heer aan la isticmaali karin waxaa mas'uul ka noqon doono ardayga ay quseyso iyo/ama waalidiinta ama ilaaliyeyaasha. Kharashka lagu baddalo iyo/ama khidmadaha waxaa loo qiimeyn doonaa sida ay tahay.

Ardayda waxaa lagaca la'aan lagu siin doonaa ilaha la isticmaalo (tusaale ahaan buugga lagu shaqeeyo. Haddii ilaha la lumiyo ama aan la isticmaali karin, ardayga wuxuu mas'uul ka noqon doonaa in uu iibsado koobi kale.

Buugaagta
Waxaa aad loo dhiiri gelinaa isticmaalka jildiga buugga. Xasuuso in aadan isticmaalin jildiyada buugga ee

korka oo idil uga "dhaga" buugga. Maaliyad ahaan, ardayda waxay mas'uul ka yahiin dhamaan buugaagta la siiyay. (Iminka, sicirka buugaag badan waa ka badan yahay $50.00).

Haddii ardayga uu mas'uul ka yahay burburinta jildiga, waxaa lagu soo dallici doonaa khidmadda dib u hagaajinta jildiga. Jadwalka khidmadda dib u hagaajinta waxaa laga heli karaa jadwalka khidmadda ardayga.

Buug kasta waxaa ku qoran sumad gaar ah kaasoo la mariyo skaanka elataroonigga marka la siiyo ardaygaada. Buugaagta waxaa la marrin doonaa skan mar kale marka la gaaro dhamaadka sannad dugsiyeedka si loo hubiyo in la soo celiyo buuggaas la siiyay ardaygaada.

Dadka Soo Booqda Dugsiga/Fasalka - Dabagalka/Kor Ka Eegidda Dugsiga - Hababka

1. Dadka raba in ay soo booqdaan dugsiga ama fasalka waa in ay xafiiska weyn horay uga qaataan ballan ugu yaraan labaatan iyo afar (24) saac iyo waa in ay waafaqsan yahiin qodobada Tilmaamaha Maamulka 9150 Dadka soo Booqda Dugsiga.

2. Marka ay yimaadaan, dadka soo booqda waa in ay ka xaqiijistaan xafiiska, iyaga oo adeegsada "intercom" qorshahooda booqashada, kaddibna marka ay soo galaan si toos ah u gudbaan xafiiska dhexe.

3. Lama ogola in dadka soo booqdo dugsiga ay la hadlaan arday ku jira dugsiga haddii aan la haysanin ogolaashada maamulaha ama u-qaabilsanaha. Ardayga looma ogola in uu dugsiga ka raaco qof aan loo aqoonsanin in uu yahay waalidkiisa ama waalidkeeda ama ilaaliyaha ama qofka u haysta amar in uu mattalo waalidka ama ilaaliyaha.

Qof kasta oo soo booqda dugsiga oo joogitaankiisa ama dhaqankiisa carqaladeeyo, ama dabeecadiisa, la soo dhaafay ama iminka, soo jeediya in isaga/iyada rabto ama u badan tahay in ay noqoto mid wax carqaladeyso, waxaa laga codsan doonaa in uu ka baxo xerada. Haddii qofka soo booqday ee sidaas loola hadlay uusan meesha ka tagin, waxaa dhici karto in maamulaha ama u-qaabilsanaha in uu u yeero sarakiisha hirgelinta sharciga.

Si dadka soo booqdo u helaan macluumaad gaar ah oo ku saabsan dugsiyada Dagmada Dugsiga Westerville, fadlan tixraac Tilmaamaha Maamulka 9150.

Brograamyada Iskaa Wax u Qabso

Dugsiyadena waxaa laga helaa fursado badan oo kala duwan oo la siiyo dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso iyo waalidiinta, ilaaliyeyaasha, xubnaha bulshada, ganacsatada iyo ardayda waxaana lagu dhiirigelinaa in ay ka soo qeybgalaan. Macluumaadka ku saabsan iskaa wax u qabso waxaa la heli karaa marka lala xariiro agaasimaha dhismaha, macalinka fasalka, PTA, PTSA, PTO ama ururka Booster ama marka la booqdo boggan internetka Guddiga Waalidka Westerville, ee laga helo bogga internetka Dugsiyada Magaalada Westerville.

MACLUUMAADKA ISKAA WAX QABSO - http://www.wcsoh.org/content_page.aspx?cid=1182
Sifeyn:
Heerka 1aad - Kormeerka Dhismaha Iskaa
Si toos ah u kormeero shaqaalaha dagmada - Dagmada/waxaa loo baahan yahay bajka aqoonsiga dhismaha.

Heerka 2aad - Kormeer La'aanta Dhismaha Iskaa ama Wadaadka
Dadkaan waxaa loo ogol yahay in ay xariir aan la kormeerin la sameyaan cunug/caruur. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: kaaliyaha maktabka ama weheliyaha safarka habeen dhaxa. Badjka Aqoonsiga Dagmada/dhismaha ee loo baahan yahay.

Si aad iskaa wax u qabso uga shaqeysid Dugsiyada Magaalada Westerville, fadlan booqo bogga internetka dagmadasi aad ogaatid hawsha iskaa wax u qabso oo dhamaystiran.

Siaad u aragtid siyaasadda 3120.09, booqo http://www.neola.com/westerville-oh/search/ag/ag3120.09.htm

Si aad u aragtid tilmaamaha 3120.09, booqo
http://www.neola.com/westerville-oh/search/policies/po3120.09.htm

Ka Lug Yeelashada Waalidka

Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Magaalada Westerville wuxuu aaminsan yahay in ka qeybgalka waalidka/ilaaliyaha tahay qeyb muhiim ah oo ka tirsan barnaamijka waxbarashada. Cilmi baarista iminka socoto waxay tilmaantaa in iskaashiga ka dhexeeyo guriga-dugsiga iyo ka qeybqaadashada weyn ee waalidiinta/ilaaliyeyaasha xagga waxbarashada caruurtooda guud ahaan dhaliso darajo sare, hormar xagga dabeecadda ardayga iyo maqnaasho yaraata. Dhamaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayda ku qoran dagmada waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay qaataan door firfircoon oo kala duwan xagga waxbarashada caruurtooda.

Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Magaalada Westerville waxay maamulka fareysaa in ay horumariso sharciyada lagama maarmaanka ah si loo hubsado in siyaasadaan loo hoggaansamo iyo in ka qeybgalka waalidka/ilaaliyaha la dhiiri geliyo. Sharciyada waa in ay:

1. Dhiiri geliyaan iskaashi xoogan ee dhexeeyo guriga-dugsiga iyo in la wadaago mas'uuliyadda waxbarashada;

2. In isgaarsiin adag oo joogto ah dhexeeyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo sarkaalka dugsiga;

3. In waalidiinta/ilaaliyeyaasha la siiyo siyaabo lagu kaalmeeyo laguna dhiiri geliyo caruurtooda in ay si wanaagsan u shaqeyaan;

4. In fursado la siiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha in ay ka qeybgalaan barnaamijka ka qeybgalka waalidka, kana mid ah ururada ama iskaashatada waalidka/macalinka, kooxaha taageerada iyo kaalmada, iyo fursadaha kale xagga dhismaha iyo dagmada;

5. In lagu darro waalidiinta/ilaaliyeyaasha, loona qaato sida hoggaamiyeyaal iyo/ama go'aan gaareyaal, sida ku habboon;

6. In sida ku habboon loo faafiyo siyaasadaan. Faafinta noocaas ah waa in lagu darro buugaagta dusiga ee gacanta lagu qaato iyo in lagu soo dhajiyo dhismooyinka dugsiga.

7. Fiirinta manhajka, buugaagta la akhriyo, qoraalada tababarka.

Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taakuleynta

SIYAASADDA 5630.01 - FARAGELINTA DABEECADDA WANAAGSAN IYO TAAGEERADA IYO ISTICMAALKA KOOBAN EE LAGA SAMEEYO CELCELINTA IYO SOOCIDDA.

Guddiga wuxuu xil iskaa saaray isticmaalka balaaran ay Dagmada ka sameyso Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada ("PBIS") xagga ardaayda iyo dhismaha jawi xoogga saara daryeelka, ammaanka, iyo maslaxadda dhamaan ardayda iyo xubnaha shaqaalaha dugsiga. Shaqaalaha ardayga waxay ka shaqeyn doonaan in ay ka hortagaan baahida isticmaalka celcelinta iyo/ama soocidda. PBIS waxay ahaan doontaa aasaaska abuurista jawi wax lagu barto oo horumariso isticmaalka faragelinta dabeecadda ku dhisan caddeynta, sidaas darteedna xoojisa natiijadaha aqoonta iyo dabeecadda bulshada ee dhamaan ardayda. Waxaa xoogga la saari doonaa horumarinta faragelinta wanaagsan iyo xallinta qilaafaadka suurtogalka ah. PBIS waxay xoojisaa ka-hortagga dhibaatooyinka dabeecadda ardayga waxayna adeegsataa farsamooyin ka-jeedinta, kuwaas aad u yareeya, haddii aysan joojinin, baahida loo qabo in la isticmaalo celcelinta iyo/ama soocidda.

Xubnaha shaqaalaha aqoonyaanka iyo shaqalaha taakuleynta sida Maamulaha u garto in ay ku habboon tahay waxaa loo ogol yahay in ay celceliyaan jirka iyo/ama soocaan ardayga, hase ahatee waa marka keliya ay jirto halis degdeg ah in dhibaato soo gaarto jirka ardayga iyo/ama dadka kale, ma jirto faragelin kale oo ammaan ah oo wax looga qabto, iyo celcelinta jirka ama soocidda waxaa loo adeegsadaa hab ku habboon da'da iyo koriimada iyo waxay badbaadisaa ammaanka dhamaan caruurta iyo qaangaarka ku sugan dugsiga.

Dhamaan celcelinta iyo soocidda waxaa loo samayn doonaa sida waafaqsan Siyaasaddaan, taasoo ku saleysan heerarka uu qaatay Guddiga Waxbarashada Gobolka ee ku saabsan isticmaalka celcelinta iyo soocidda ardayga.

Tababarka hababka PBIS iyo isticmaalka celcelinta iyo soocidda waxaa la siin doonaa dhamaan shaqaalaha aqoonta leh iyo shaqaalaha taakuleynta uu Maamulaha u garto in ay ku habboon yahiin. Tababarka wuxuu waafaqsanaan doonaa Heerarka Gobolka (State's Standards). Shaqaalaha dugsiga loo tababaray soocidda la ogol yahay iyo celcelinta jirka keliya ayaa isticmaali kara farsamooyinka noocaas.

Mar kasta oo la isticmaalo celcelinta iyo soocidda waa in la qoro lagana sameeyo warbixin sida waafaqsan Siyaasaddaan.

Guddiga wuxuu sannad kasta waalidiinta ogeysiin doonaa siyaasadaan, iyo wuxuu ku daabici doonaa bogga internetka Dagmada.

SIFEYNTA

Faragelinta waxyeelada dabeecadda waxaa loola jeedaa faragelinta loogu talogalay in xanuun ama fahmo darro lagu abuuro ardayga si looga hortaggo ama loo yareeyo dabeecadaha xun, sida faragelinta loo adeegsado shiddada, xanuunka iyo/ama kicinta, sida nooc kasta oo ka mid ah shiddada, xanuunka ama ku buufinta, neefsiga, ama dhadhanka.

Celcelinta kiimikada waxaa loola jeedaa mukhaadaraad ama daawo loo adeegsado in lagu kantarool dabeecadda ardayga ama lagu xakameeyo xoriyadda dhaqaaqa:

A.	Uusan soo qorin takhtar shatti haysta, ama aqoonyaan kale oo aqoon u leh caafimaadka kana hoos shaqeeya awoodda aqoonyaanka sida hoos timaado sharciga Ohio, xagga daweynta heerka xaaladda caafimaadka ama madax ardayga; iyo
B.	Aan loo siinin sida uu u qoray takhtarka shattiga haysta ama aqoonyaanka kale ee aqoonta u

	leh caafimaadka kana shaqeeya sida hoos timaado awoodda aqoonyaanka sida hoos timaado sharciga Ohio.

Farsamooyinka Xassilinta waxaa loo adeegsadaa xiilad ahaan, faragelinta afka ama aan afka lagu soo jeedinin waxaa loo adeegsada si loo yareeyo xoogga dabeecadda cabsi gelinta ka hor inta aysan dhicin xaaladda shiddada.

Qiimeynta waxqabadka dabeecadda ("FBA") waa habka wada shaqeynta xallinta-masalada ee loo isticmaalo in lagu sharaxo "waxqabadka" ama ujeedada dabeecadda ardayga. In la fahmo "hawsha" (function) dabeecadda u qabato ardayga waxay si toos kaalmo uga geysataa sida loo handaso brograamyada waxbarashada iyo horumarinta qorshooyinka dabeecadda taasoo aad ugu badan in lagu guuleysto.

Celcelinta makaanikada waxaa loola jeeda habka kasta oo lagu celceliyo xoriyadda dhaqaaqa ardayga, dhaqaaqa jirka, ama isticmaalka caadiga ee laga sameeyo jirka ardayga, marka la isticmaalo qalabka ama aalada loo sameyay ujeedadaas. Celcelinta makaanikada ma aha macnaheeda qalabka ay adeegsadaan shaqaalaha dugsiga ee la tababaray, ama ardayga u isticmaalo ujeedada gaarka ah iyo daweynta la ogolaaday ama ujeedada ammaanka ee qalabka noocaas loo sameyay iyo, haddii lagu dabaqi karo, la qoro, sida:

A.	celcelinta loogu talogalay in lagu joojiyo dhaqaaqa qofka;
B.	qalabka la adeegsado ama taakuleynta makaanikada loo adeegsado in la helo madax banaani dheeraad ah xagga dhaqaaqa taasoo aan suurtogelin haddii aan la isticmaalin qalabka noocaas ama taakuleynta makaanikada; ama
C.	celcelinta ammaanka baabuurka marka loo adeegsado sida loogu talogalay waqtiga gaadiidka ardayga baabuurka socda.

Macnaha waalidka waa:

A.	waalidka laxmiga ama korsaday:
B.	ilaaliye guud ahaan loo ogolaaday in uu ahaado sida waalidka cunugga, ama loo ogolaaday in uu gaaro go'aanada cunugga (balse aan ahayn Gobolka haddii cunugga yahay bukaan hoos yimaado Gobolka);
C.	qof mattala waalidka laxmiga ama soo korsaday (sida waalidka awoowaha, adeerka, ama qaraabo kale) uu cunugga la daggan yahay, ama qof oo sharci ahaan mas'uul ka ah maslaxadda cunugga;
D.	waalid kale oo loo magacaabay sida waafaqsan A.C. 3301-51-05(E); ama
E.	qof kasta oo lagu tilamaamo ammarka maxkamadda ama ammar sida waalidka cunug ama qofka awoodda u leh in uu gaaro go'aanada waxbarashada uu ku mattalo cunugga.

Wehlinta qofka waxaa loola jeeda taabashada ku meel gaarka ah ama qabashada gacanta, garabka, dhexda, sinta, ama dusha si ardayga loogu qasbo in uu u dhaqaaqo meel ammaan ah.

Celcelinta jirka waxaa loola jeedaa isticmaalka xariirka jirka ee fadhiisisa ama yareysa awoodda ardayga u leeyahay in uu si madax banaan u dhaqaajiyo gacmaha, lugaha, jirka, ama madaxa. Celcelinta jirka *kama* mid ah xariir gaaban oo lala sameeyo jirka si loo gaaro ujeedooyinka soo socda ama la midka ah in:

A.	lagu joojiyo dagaalka;
B.	hubka laga soo dhufto ardayga;
C.	la dajiyo ama la xassiliyo;
D.	ardayga lagu kaalmeeyo in uu dhamaystiro hawsha/jawaabta haddii ardayga uusan ka hor imaanin xariirka; ama
E.	laga hortago dabeecadda laab la kaca ee halista ku ah ammaanka u dhaw ardayga (tusaale ku orodka baabuur hortiisa).

F**aragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada ("PBIS")** waxaa loola jeedaa habka ku baahsan dugsiga oo idil si loo geliyo dhaqanka ku saleysan caddeynta iyo go'aanka ku dhisan xogta si loo hagaajiyo jawiga iyo hiddaha dugsiga kaddibna horumar looga gaaro aqoonta iyo natiijadaha bulshada, iyo kordhinta waxbarashada dhamaan ardayda. PBIS waxaa hoos yimaada xiiladaha siistemaatikada iyo ku kooban qofka si loo xoojiyo dabeecadaha la rabo, si loo yareeyo in dib loola kulmo daabeecadaha taxadiga, loona baro dabeecadaha ku habboon ardayda.

Qorshaha Taageerada Dabeecadda Wanaagsan waxaa loola jeedaa handasada, fullinta, iyo qiimeynta isbaddalada qofka ama kooxda tababarka iyo jawiga, kana mid ah brograamyada tababarka dabeecadda, si loo soo saaro horumar la taaban karo xagga dabeecadda lana adeegsado xirfad iyo yareynta dhibaatada dabeecadda.

Celcelinta Dhul Jiifinta waxaa loola jeedaa celcelinta jirka ama makaanikada marka wijiga ardayga loo jeediyo hoos muddo dheer.

Soocidda waxaa loola jeeda soocid uu ardayga iskiisa u dooranin gudaha qolka, meel oodan, ama meel ardayga laga ilaaliyo in uu ka tago marka loo adeegsado celcelinta jirka ama albaab la xero ama waxyaabo kale oo lagu dadbo. Kuma jirto waqtiga dibadda (timeout).

Ardayga waxaa loola jeedaa cunug ama qaangaar da'diisu tahay saddax (3) ilaa labaatan iyo kow (21) oo ku qoran Dagmada.

Shaqaalaha Ardayga waxaa loola jeeda macalimiinta, agaasimeyaasha, la-talliyeyaasha, shaqaalaha bulshada, saraakiisha ilaha dugsiga, kaaliyeyaasha macalinka, aqoonyaanka cilmu nafsiga, wadeyaasha baska, ama shaqaalaha Dagmada ee sida tooska xariir ula leh ardayda.

Waqtiga dibadda waxaa loola jeedaa faragelinta dabeecadda halkaas oo ardayga, muddo kooban oo cayiman, laga fogeeyo fasalka gudaha qolka fasalka ama meel aan xerneen si uu naftiisa u xakameeyo una kantaroolo dabeecadiisa ama u kantaroosho dabeecadeeda. Marka la saaro, ma aha in ardayga jir ahaan la celceliyo ama la adeegsado waxyaabo ka hor istaago in uu ka tago goobta.

FARAGELINTA DABEECADDA WANAAGSAN IYO TAAGEERADA

Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada ("PBIS") waxay tiirar u sameysaa jawiga iyadoo isticmaasha siistemka dabeecadda aan sii jeedinin si loo hagaajiyo natiijadaha aqoonta iyo dabeecadda ee dhamaan ardayda.

Nidaamka ama habka ka-hortagga PBIS waxaa lagu dabaqi doonaan dhamaan ardayda iyo shaqaalaha, iyo dhamaan xaaladaha.

PBIS waxaa ka mid ah:

A. shaqaalaha dugsiga ee loo tababaray in ay aqoonsadaan xaaladaha sida meesha, daruufaha, qofka lala joogo, iyo sababta dabeecadda aan habbooneyn ay u dhacday;

B. qiimeynta ka-hortagga sida:

1. fiirinta xogta jirta;
2. wareysiyada lala yeesho waalidiinta, xubnaha qoyska, iyo ardayda; iyo
3. baaritaanka qorshooyinka faragelinta dabeecadda la soo dhaafay iyo midda iminka jirta.

C. soo saarka iyo fullinta faragelinta dabeecadda ka-hortagga, iyo tababarka dabeecadda habboon, sida:

1. baddalaadda qodobada jawiga ee kiciya dabeecadda aan ku habbooneyn;
2. taakuleynta helitaanka dabeecadda ku habboon; iyo
3. isticmaalka xassilinta afka si loo dajiyo dabeecad dagaal oo sida suurtogalka halis ah.

SOOCIDDA

Soocidda waxaa loo adeegsan karaa oo keliya marka dabeecadda ardayga halis degdeg ah u keeni karto jirka ardayga ama dadka kale mana aha suurtogal in la helo faragelin kale oo ammaan ah. Xayiraadda waxaa loo adeegsan karaa sida faragelinta ugu dambeyso oo keliya taasoo ardayga siisa fursad uu ku soo ceshto kantaroolka talaabadaha uu isaga/iyada qaado. Celcelinta waa in loo adeegsado hab ammaan ah oo koriimo ahaan ku habboon, waqtiga ugu yar ee lagama maarmaanka ah si ardayga iyo/ama dadka kale looga badbaadiyo waxyeelada soo gaari kara jirka, iyo si loogu hoggaansamo Siyaasaddaan iyo siyaasadda la socota ee Waaxda Waxbarashada Ohio ("ODE").

Soocidda waxaa fullin doonaa oo keliya Shaqaalaha Ardayga ee loo tababaray sida waafaqsan Siyaasaddaan si loo badbaadiyo daryeelka, maslaxadda, sharafta iyo ammaanka ardayga.

Sharuudaha dheeraadka ee la xariira isticmaalka soocidda:

Haddii Shaqaalaha Ardayga adeegsadaan soocid, waa in ay:

A. so joogto ah u fiiriyaan ardayga ku jira soocidda si ay u ogaadaan haddii u ku jiro dhibaato xagga jirka ama madaxa kaddibna raadsadaan kaalmada caafimaadka degdegga haddii ay jirto arrin;

B. isticmaalaan xiiladaha afka iyo farsamooyinka xassilinta ku saleysan cilmi baarista si ardayga loogu kaalmeeyo in uu dhakhso dib u helo kantaroolka sida suurtogalka ah;

C. ardayga laga saaro soocidda marka halista degdegga waxyeelada jirka ee soo gaarto ardayga iyo/ama dadka kale dhamaato

D. laga fiiriyo ardayga dhaawac ama dhibaatada nafsiga kaddib marka la adeegsado celcelinta jirka, lala socdo ardayga hadba sida loogu baahdo, dhacdada kaddib;

E. la fulliyo warbixin ay ka soo qeybgalaan dhamaan shaqaalaha ku lugta leh si loo qiimeeyo waxa ka dambeyay dhacdada, jawaabta shaqaalaha, iyo hababka wax looga qabto baahida dabeecadda ardayga; iyo

F. la dhamaystiro dhamaan warbixinta loo baahan yahay iyo qoraal laga reebo waxa ay ku arkeen ardayga.

Sharuudaha la xariira qolka ama goobaha loo adeegsado soocidda:

Qolka ama meesha loo adeegsado xayiraadda waa in ay leedahay boos ku filan, iftiin, hawo, si wanaagsan wax looga arko, iyo ammaanka ardayga.

Qollka ama meesha loo adeegsado xayiraadda waa *in aysan ahayn meel qufulan* ama ka hor istaagta ardayga in uu ka baxo meesha haddii shaqaalaha noqdaan kuwo aan dhaqaaqi karin ama ka tagaan meesha.

Dhaqamada dheeraadka ah ee la xariira soocidda la mamnuucay:

Soocidda waa in aan marna loo adeegsanin sida ciqaab ama in lagu qasbo u hoggaansami.

Soocidda lama isticmaali doono:

A.	sida u roon shaqaalaha
B.	sida shay lagu baddalo brograamka waxbarashada;
C.	sida nooc ka mid ah dishibiliinka ama ciqaabta;
D.	sida shay lagu baddalo celcelinta yar;
E.	sida shay lagu baddalo shaqaalaha aan ku filneyn;
F.	sida shay lagu baddalo tababarka shaqaalaha ku sugan taakuleynta dabeecadda wanaagsan iyo ka hortagga shiddada iyo faragelinta;
G.	sida hab lagu jujuubo, aarguto, ama hab halis gelisa ardayga; ama
H.	haddii ay ardayga ka hor istaagto baahida aasaasiga uu qabo.

Soocidda caruurta aan weli gaarin dugsiga waa mamnuuc, marka laga reebo marka cunugga aan weli gaarin dugsiga laga reebo asxaabtiisa ama asxaabteeda fasalka, gudaha fasalka ama meel ammaan ah, la iftiimiyay oo si wanaagsan hawo loo siiyay, ilaa muddo gaaban oo ku habboon da'da iyo koriimada cunugga, haddii cunugga uu mar kasta ku sugan yahay meel uu ka arki karo xubin ka tirsan shaqaalaha caruurta aan weli gaarin dugsiga.

CELINTA

Waxaa jira noocyo kala duwan celcelinta, sida lagu sifeyay kor, kana mid ah celcelinta jirka, celcelinta xakameynta, celcelinta makaanikada, iyo celcelinta kiimikada. Waa mamnuuc celcelinta marka laga reebo celcelinta jirka.

Celcelinta jirka waxaa la adeegsan karaa oo keliya marka dabeecadda ardayga halis degdeg ku tahay in ay waxyeelo gaarsiiso ardayga iyo/ama dadka kale lana heli karin faragelin kale oo ammaan ah iyo/ama wax looga qabto. Celcelinta jirka waa in loo fulliyo hab ku habboon da'da iyo koriimada, aan faragelinin awoodda ardayga u leeyahay in uu isgaarsiin ku sameeyo luqadda isaga/iyada aasaasi u ah ama habka isgaarsiinta, una hoggaansanta Siyaasaddaan iyo siyaasadda u dhiganta ee ODE.

Celcelinta jirka waxaa fullin doono oo keliya Shaqaalaha Ardayda ee loo tababaray sida waafaqsan Siyaasadaan si loo badbaadiyo daryeelka, maslaxadda, sharafta iyo ammaanka ardayga, marka laga reebo xaaladaha degdegga mar dhifka aan leyska ilaalin karin marka aan dhakhso loo heli karin shaqaale la tababaray.

Sharuudaha dheeraadka ee la xariira isticmaalka celcelinta jirka.

Haddii Shaqaalaha Ardayga isticmaalaan xoog si ay u celceliyaan, waa in ay:

A.	si joogto ah u fiiryaan ardayga ku sugan celcelinta si ay u ogaadaan haddii ay dhibaato ka haysato jirka ama madaxa kaddibna degdeg u raadiyaan taakuleynta caafimaadka haddii ay jirta arrin;
B.	isticmaalaan xiiladaha afka iyo farsamooyinka xassilinta ku saleysan cilmi baarista si ardayga loogu kaalmeeyo in uu dib u soo ceshto kantaroolka;
C.	degdeg uga qaadaan ardayga celcelinta jirka marka halista degdegga in waxyeelo soo gaarto jirka ardayga iyo/ama dadka kale dhamaato;
D.	laga fiiriyo ardayga dhaawac ama dhibaatada nafsiga kaddib marka la adeegsado celcelinta jirka, lala socdo ardayga hadba sida loogu baahdo, dhacdada kaddib;
E.	la fulliyo warbixin ay ka soo qeybgalaan dhamaan shaqaalaha ku lugta leh si loo qiimeeyo waxa ka dambeyay dhacdada, jawaabta shaqaalaha, iyo hababka wax looga qabto baahida dabeecadda ardayga; iyo
F.	la dhamaystiro dhamaan warbixinta loo baahan yahay iyo qoraal laga reebo waxa ay ku arkeen ardayga.

Celcelinta jirka looma adeegsan karo sida ciqaabta ama dishibiliinka, ama in lagu baddalo habab kale oo ka fudud si ardayga loogu kaalmeeyo in uu soo ceshto kantaroolka.

Dhaqanka Celinta la Mamnuucay

Waa mamnuuc in la adeegsado dhaqanka celcelinta soo socda sida hoos timaada xaalad kasta, kana mid ah xaaladaha degdegga ammaanka:

A.	celcelinta wijiga hoos loo jeediyo sida ku sifeysan Ammarka Fullinta 2009-13 (kaasoo celcelinta wijiga hoos loo jeediyo ku sifeeyo in loola jeeo "dhamaan waxyaabaha ama talaabadadha loo adeegsado in lagu yareeyo ama lagu kantaroolo dhaqaaqa ama hawsha caadiga qeyb kasta, ama dhamaan, uu qabto jirka qofka inta qofka uu ku sugan yahay xaalada wijiga hoos jiro muddo dheer");
B.	celcelinta jirka ee xannibta meesha hawada u marto ardayga ama hor istaagta awoodda ardayga u leeyahay in uu neefsado;
C.	celcelinta jirka ee saameysa habka isgaarsiinta aasaasiga ee ardayga;
D.	celcelinta ardayga aan weli gaarin dugsiga, marka laga reebo qabashada cunugga muddo gaaban, sida hab siinta, si cunugga u soo ceshto kantaroolka;
E.	celcelinta ardayga ka qaado baahida aasaasiga;
F.	celcelinta oo dhallisa halis aan meesha ku jirin ama xanuun aan loo baahneyn oo loo geysto ardayga, sida celcelinta jirka ee ku lugta leh ula kaca, ogaanta, ama isticmaalka taxadir la'aanta farsamooyinka soo socda:

1.	isticmaalka hab kata oo dhallin kara in la lumiyo miirka ama waxyeelo gaarsiiya qoorta ama si un u xayira/cabburiya neefta;
2.	dhulka lagu haayo ardayga marka jilbaha laga saaro xabadka, madaxa iyo/ama qoorta ardayga.
3.	isticmaalka meelaha cadaadiska, meelaha xanuunka, ama maroojinta kala goysyada;
4.	jiididda ama kor u qaadidda ardayga marka lagu soo dhago tinta ama dhagta loona adeegsado nooc kasta oo ka mid ah celcelinta makaanikada;
5.	isticmaalka arday kale ama shaqaale aan tababar la siinin in ay kaalmo ka geystaan qabashada ama celcelinta; ama

6. in ardayga lagu xero arday kale ama shay aan dhaqaaqin.

G. celcelinta makaanikada (kama mid ah qalabka ay adeegsadaan Shaqaalaha Ardayga, ama ardayga, ujeedadooduna tahay daweynta la ogolaaday ama ammaanka ee loo sameyay qalabka noocaas iyo, haddii lagu dabaqi karo, loo qoray); ama

H. celcelinta kiimikada (aan ka midka ahayn daawada loo qaato sida uu u qoro takhtarka shattiga haysto).

DHAQANKA DHEERAADKA AH EE LA MAMNUUCAY

Waa la mamnuucay dhaqanka soo socdo, dhamaan daruufo kasta oo lagu jiro, kana mid ah xaaladda degdegga ammaanka.

A. ciqaabta jirka

B. khatarka la geliyo cunugga sida ku sifeysan R.C. 2919.22; iyo

C. faragelinta waxyeelada dabeecadda.

LA XARIIR HIRGELINTA SHARCIGA IYO/AMA SHAQAALAHA JAWAABTA DEGDEGGA

Sida waafaqsan Qorshaha Maamulka Degdegga ee Guddiga(fiiri Siyaasadda 8400), shaqaalaha Dagmada waxay la xariiri doonaan hirgelinta sharciga iyo/ama shaqaalaha jawaabta degdegga ku habboon haddii ay la noqoto in faragelinta (celcelin ama soocid) aysan ku filneyn si loo xajiyo ammaanka dhamaan inta ku lugta leh.

QIIMEYNTA DABEECADDA QOFKA KU SHAQEEYO IYO QORSHAHA FARAGELINTA

Haddii ardayga ku celceliyo dabeecad halis ah oo u horseedo dhacdooyinka celcelinta iyo/ama soocidda, shaqaalaha Dagmada waxay fullin doonaan qiimeynta dabeecadda si loo aqoonsado baahida ardayga iyo siyaabaha wax looga qabto baahidaas. Haddii loo baahdo, shaqaalaha Dagmada waxay kaloo horumarin doonaan qorshaha faragelinta dabeecadda taasoo isku soo darta faragelinta dabeecadda wanaagsan.

TABABARKA IYO HORUMARINTA AQOONTA

Dagmada waxay bixin doontaa tababar sida soo socoto:

A. Dhamaan Shaqaalaha Ardayga, sida ku sifeysan Siyaasaddaan, waxaa sannadkii hal mar la tababari doonaa sharuudaha Policy on Positive Behavior Intervention and Supports, and Restraint and Seclusion (Siyaasadda Dabeecadda Wanaagsan xagga Faragelinta iyo Taakuleynta, iyo Celcelinta iyo Soocidda ee Waaxda Waxbarashada Ohio); A.C. 3301-35~~51-~~15; iyo siyaasadaan.

B. Maamulaha, kaddib marka uu la tashto agaasimaha dhismaha dugsi kasta iyo/ama kaaliyaha agaasimaha, wuxuu aqoonsan doonaa shaqaalaha Dagmada midka loo baahan yahay in uu helo tababar dheeraad ah si tiro ku filan shaqaalaha dhismo kasta loo tababaro maamulka shiddada iyo farsamooyinka xassilinta, sida isticmaalka celcelinta iyo soocidda. Shaqaalaha dagmada ee qaata tababarka dheeraadka ah waa in ay tababarkooda casriyeyaan sida waafaqsan sharuudaha bixiyaha tababarka.

C. Maamulaha wuxuu soo saari doonaa qorshe uu tababar lagu siiyo shaqaalaha, sida ku sifeysan Siyaasadaan, si Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada looga fulliyo

	Dagmada oo idil. In PBIS laga fulliyo Dagmada waxay ahaan kartaa hawl qaadata sanooyin badan, halkaas uu tababarka qaato muddo dhowr sanno.

Dagmada waxay hayn doontaa qoraal elataroonig oo ku saabsan tababarka la bixiyay iyo liisaska ka-qeybgaleyaasha tababar kasta.

Shakhsiyaadka la tababaray sida waafaqsan Siyaasaddaan xagga isticmaalka ku habboon celcelinta iyo xayiraadda waxay isticmaali karaan farsamooyinkaas.

KOR KA EEGIDDA IYO HABABKA KADEEDKA

Maamulaha wuxuu la soco doonaa fullinta siyaasadaan.

Waalidka cunugga ku qoran dugsiga Dagmada wuxuu ashtako qoran u gudbin karaa Maamulaha kuna saabsan dhacdada celcelinta ama xayiraadda. Maamulaha wuxuu baari doonaa ashtako kasta oo qoran kaddibna wuxuu qoraal ahaan ugu jawaabi doonaa ashtakada waalidka muddo soddon (30) maalin gudahooda laga bilaabo marka uu helo ashtakada.

Waalidka cunugga itaalka darran (sida ku sifeysan Xeerka La Baddalay Ohio 3323.01) wuxuu astako u gudbin karaa Waaxda Wabarashada Ohio, Xafiiska Caruurta Gaarka, sida waafaqsan hababka ashtakada ee la heli karo sida hoos timaado Xeerka Maamulka Ohio Qeybta 3301-51-05(K)(4)-(6).

XOGTA LOO BAAHAN YAHAY IYO WARBIXINTA

Isticmaal kasta oo laga sameeyo celcelinta ama soocidda waxaa:

A.	laga reebi doonaa qoraal;
B.	isla markiiba warbixin laga siin doonaa maamula dhismaha;
C.	isla markiiba warbixin laga siin doonaa waalidka; iyo
D.	laga diyaarin doonaa warbixin qoran.

Koobiga warbixinta qoran waxaa la siin doonaa waalidka ama ilaaliyaha ardayga muddo labaatan iyo afar (24) saac gudahooda laga bilaabo isticmaalka celcelinta ama xayiraadda. Koobiga warbixinta qoran waxaa sidoo kale lagu hayn doonaa faylka ardayga.

Dhamaan warqadaha qoran ee ku saabsan isticmaalka celcelinta ama soocidda waa diiwaanka waxbarashada sida waafaqsan Xaqa Waxbarashada Waalidka u leeyahay Sharciga Asturnaanta ("FERPA"), iyo shaqaalaha dagmada waxaa ka reeban in ay macluumaadka la aqoonsan karo u kashifaan qof kale marka laga reebo waalidka, sida waafaqsan sharuudaha FERPA.

Maamulaha wuxuu soo saari doonaa hab lagu aruuriyo xogta ku saabsan isticmaalka celcelinta iyo soocidda.

Maamulaha wuxuu macluumaadka ku saabsan isticmaalka celcelinta iyo soocidda sannad kasta u sheegi doonaa Waaxda Waxbarashada Ohio hadba sida wakaaladaas u codsato, kaddibna waxay diiwaanka Dagmada ee ku saabsan celcelinta iyo soocidda siin doontaa shaqaalaha Waaxda Wabarashada Ohio kaddib marka ay codsato.

*Laga soo qaatay Siyaasadda Waaxda Waxbarashada Ohio ee ku saabsan Faragelinta iyo Taageerada, iyo Celcelinta iyo Xayiraadda la dhaqan geliyay Janaayo 15, 2013

La qaatay 9/23/13
La Baddalay 6/12/17

ADEEGYADA KHAASKA AH

Ardayda Barata Ingiriisiga (EL)

Macalimiinta TESOL-aqoonsatay iyo aqoonyaanada EL waxay ardayda u qalanta siiyaan adeegyada Bartaha Ingiriisiga. Habka barnaamijka ESL waxaa ka mid ah:

- In luqadda muhiimka/guriga ee ardayga aysan ahayn Ingiriisi.
- In ardayga keeno buundo ka hooseyso aqoonta uu u leeyahay Ingiriisiga (akhriska, qorista, dhageysiga, hadalka, iyo fahamka) imtixanaadka aqoonta luqadda Ingiriisiga ee ka jira gudaha dagmada.
- In ardayga uusan ka weyneen 21 sanno iyo in uu ku qoran yahay dagmada.
- In ardayga uu dhibaato ku qabo ku-hadalka, akhriska, qorista, ama fahamka Ingiriisiga iyo in uusan awoodin in uu si wanaagsan wax uga qabto fasalka ama imtixanaadka gobolka si uu ula kulmo heerarka gobolka ee la filaayo si loogu guuleysto taageero la'aan.
- In luqadda uu u dhashay/guriga aysan ahayn Ingiriisi, haddii uu ku dhashay Mareykanka ama waddan kale.
- Maadooyinka iyo socodka tababarka fasalka ESL la qaato waa in ay la kulmaan baahida shakhsiga ee arday kasta. Ardayda ka timaada "Barashada" aqoonta Ingiriisiga, soo marta "Horumar" ilaa "Aqoon" sida xirfadaha aasaasiga iyo aqoonta Ingriiisiga.

Adeegga Waxbarashada Hibada

Ohio, erayga "hibo" waxay tixraacdaa ardayda si wanaagsan u shaqeysa ama muujisa karti ay ku shaqeyaanheerarka sare ay ku guuleystaan marka la barbar dhigo kuwa kale xagga da'da, waayo aragnimada, ama jawiga kuwasoo loo aqoonsado in ay raacaan nidaamka iyo habka u dagsan Xeerka La Baddalay ee Ohio 3324.

Waaxda waxbarashada hibada waxay ballan ku qaaday in ay aqoonsato iyo in ay la kulanto baahida ardayda hibada leh. Soo saaridda fursadaha barnaamijka K-12 si loo gaaro himiladaan, waxaa taageero la siiyaa fursado kala duwan waxaana lagu bixiyaa dhowr siyaabo si loo qaabilo awoodda kala duwan iyo baahida ay qabaan ardayda hibada leh.

Dagmada waxay hubsataa in fursado siman la siiyo dhamaan ardayda dagmada ee loo aqoonsado in ay leeyahiin hibo si loo tixgeliyo in ay ka qeybqaataan adeegyada dagmada. Adeegga barnaamij kasta wuxuu leeyahay waxyaabo tayo u yeela oo loo baahan yahay in ay la kulmaan ardayda loo aqoonsado in ay ka qeybqaataan.

Adeegga Caafimaadka Dugsiga - Baaritaanada Hore

Adeegyada caafimaadka waxaa bixiya kalkaaliyeyaasha shahaadada u haysta. Adeegyada waxaa ka mid ah adeegga guud iyo adeegga caafimaadka dugsiga ee degdegga ah. Adeegydadooda waxaa ka mid ah baaritaanka maqalka/aragga Pre-K (xanaanada ka hor), xanaanada, darajooyinka 1aad, 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad iyo ardayda ku cusub dagmada iyo baaritaanada maqalka ee darajada 11aad. Ardayda la siiyo qiimeynta qodobada-badan waxaa kaloo laga rabaa in laga baaro aragga iyo maqalka ka hor inta aan laga qaadin imtixaanka. Waxaa dhici karto in macalinka

ardayga uu arday u diro kalkaaliyaha si loo baaro. Waxaa dhici karto in waalidka codsado baarista marka uu la soo xariiro dugsiga cunugga. Baarista lafo xanuunka (marmar lagu magacaabo "scoliosis") waxaa lagu qaaban doonaa dugsiga dhexe. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxaa loo adeegsan doonaa foomka tixraacinta si loo ogeysiiyo haddii ay jirto talo la soo jeediyay in la qiimeeyo aqoonta ardayga marka uu ku dhaco mid ka mid ah baaritaanadaan.

La Talinta iyo Taageerada Caafimaadka Madaxa

Barnaamijka la-talliyaha dugsigaiyo adeegyada taageerada caafimaadka madaxa waxay qeyb buuxda ka yahiin dhismaha manhajka Dugsiyada Magaalada Westerville. Waxay u jiraan si shakhsiyaadka ay fa'iidada ugu badan ee suurtogalka ah uga helaan waayaha waxbarashada. Brograamyada iyo adeegyada xagga hawlaha hoggaaminta ku saleysan fasalka, la-tallinta kooxda, la-tallinta qofka iyo qorsheynta, tababarada waalidka, la-tallinta shiddada iyo tixraacinta, iyo bixinta la-tallinta iyo adeegyada iskuduwidda la siiyo shaqaalaha dugsiga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo wakaaladaha bulshada waa wax ay heli karaan dhamaan ardayda si iyaga loogu kaalmeeyo aqoonta, shaqada, iyo koriimadooda qof ahaan-bulshonimo**.**

Kaalmada Faragelinta

IAT (Kooxda Kaalmada Faragelinta) ee dhismo kasta waxay la shaqeysaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha si wax looga qabto arrimaha ardayga, loo horumariyo qorshaha faragelinta, loola socdo horumarka. Tixraacinta IAT waxay ku bilaaban kartaa waalidka/ilaaliyaha, ardayga, ama xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga oo la shaqeeyo cunugga. Xubnaha IAT waxay ku kala duwan yahiin dhismaha, hase ahatee caadi ahaan waxaa ka mid ah maamulaha dhismaha, macalimiinta, shaqaalaha hoggaaminta, takhasuseyaasha, iyo badanaa aqoon yahanka cilmi nafsiga dugsiga. IAT waxay qaabishaa arrimaha waxbarashada iyo kuwa caafimaadka, bulshada-shacuurta iyo dabeecadda.

Waxbarashada Ardayda Itaalka Darran

Dugsiyada Magaalada Westerville waxaa laga rabaa in ay aqoonsadaan dhamaan ardayda itaalka darran, da'dooda tahay 3-22, ee daggan dagmada. Ardayda dugsiga-aan-gaarin iyo kuwa dugsiga-gaaray ee qaba itaal darri waa in la siiyo FAPE, Aqoonta Dadweynaha Ku Habboon oo Lacag La'aan ah, sida waafaqsan go'aanka Kooxda Brograamka Waxbarashada Ku Kooban Qofka. Ardayda waxaa adeegyada lagu siiyaa gudaha fasalada caadiga ah ilaa inta ugu badan ee ku habboon.

"Ardayga itaalka darran" waxaa loo jeedaa ardayga ay soo qiimeysay kooxda dishibiliinka-badan, loona arkay in uu u baahan yahay waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xariira taasoo ka dambeyso mid ka mid ah xaaladaha itaal darrida soo socda: "Autism", Itaal Darrida Garashada, Dhago Xumida-Camonimada, Dhagoolenimada, Dhibaatada Shacuurta, Maqa Xumida, Itaal-darrida badan, Itaal-darrida Lafaha, Itaal-darrida kale ee Caafimaadka, Itaali Darrida Barashada Khaaska, Itaal Darrida Hadalka iyo Luqadda, Dhaawaca Xanuunka Maskaxda, ama Itaal Darrida Aragga. Kooxda qiimeynta qodobada-badan waxaa ka mid ah shaqaalaha dugsiga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha labadaba. Haddii aad la socotid cunug noqon kara "arday itaal darran", fadlan wac Xafiiska Waxbarashada Khaaska ee laga helo (614)797-5900.

KA BIXIDDA SHABAKADA ARDAYGA/GELITAANKA INTERNETKA

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville waxay u haysataa in isticmaalka Internetka yahay axsaan, in uusan ahayn xaq la leeyahay, iyo waxay dhamaan ardayda siisaa habka lagu galo email iyo/ama internetka dugsiga. Internetka Guddiga waxaa loo sameyay in wax lagu barto keliya. Isticmaalka aan la fasaxin iyo aan habbooneyn wuxuu dhallin doonaa joojinta axsaankaan.

Guddiga wuxuu fulliyay badbaadinta farsamada, kuwaasoo ka badbaadiya (tusaale, kuwa hor istaaga/filatar ku sameya) gelitaanka internetka waxyaabaha ka soo baxa/sawirada/qoraalada fisqiga, qaawanaanta cunugga, ama waxyeelo gaarsiiya ilmaha. Guddiga wuxuu kaloo kor kala socdaa hawlaha internetka ardayda si loo yareeyo helitaankaqaawanaanta cunugga iyo waxyaabo kale oo fisqi ah, la diido, ku habbooneyn iyo/ama waxyeelo gaarsiisa ilmaha. Hase ahatee, waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa lagula tallinaa in dadka isticmaala in ay macluumaad, isgaarsiin, iyo/ama adeegyo ka helaan Internetka uu Guddiga u fasixin in loo adeegsado waxbarasho iyo/ama in iyaga iyo/ama waalidiintooda/ilaaliyeyaasha u arkaan wax aan habbooneyn, gaf, la necbeysto ama muran ka taagan yahay. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxay qaataan halistaan marka ay ogolaadaan in ardaygooda ka qeybgalo isticmaalka internetka. Ardayda waxay qaataan mas'uuliyadda iyo qaanta, madaniga iyo dambiga labadaba, taasoo la xariira isticmaalka aan loo fasaxin ama aan habbooneyn ee internetka.

Guddiga wuxuu xaq u leeyahay, waqti kasta, in uu galo, la socdo, fiiriyo iyo fattasho gal kasta, faylasha iyo/ama fariimaha ku jira ama la diro marka la adeegsado kombuyutarada/shabakada Guddiga. Fariimaha la xariira ama taageera hawlaha sharci darrada waxaa loo jeedin doonaa madaxda ku habboon.

FOOMKA KA BIXIDDA SHABAKADA/INTERNETKA ARDAYGA

Fadlan akhri iyo dhamaystir macluumaadka soo socda kaddibna soo celi foomkaan KELIYA haddii aad dooneysid in aad xayirtid ama ardaygaada u diidid Internetka.

Sida waalidka/ilaaliyaha ardaygaan, Aniga waan akhristay Siyaasadda Shabakada Ardayga iyo Isticmaalka Internetka la Ogolaan Karo iyo Ammaanka iyo Tilmaamaha lagana helo bogga internetkaWarqadaha Guddiga WCS. Aniga waxaan fahamsanahay in helitaanka ardayda Internetka loo sameyay ujeedooyinka waxbarashada iyo in Guddiga ka taxadiray in uu yareeyo iyo/ama in ardayga uu Internetka ka helo qoraalo fisqi ah, la naco, habbooneyn iyo/ama waxyeelo gaarsiiya caruurta. Hase ahatee, Aniga waxaan aqoonsanahay in ay tahay wax aan suurtogelin in Guddiga yareeyo helitaanka dhamaan waxyaabaha la naco iyo/ama waxyaabaha lagu murmo ee laga yaabo in laga helo Internetka, sidaas darteedna waxaan codsanaa waxa soo socda:

- Aniga waxaan cunugeyga u diiday in uu isticmaalo iyo in uu internetka ka galo dugsiga.
- Aniga waxaan ruqsad u diiday Guddiga in ay sawirada "nool" ee cunugeyga (sida qeyb ka tirsan koox) ku gudbiso internetka via kamerada internetka sida fursadaha waxbarashada masaafada lana adeegsado Skype iyo farsamooyinka la mid ah.

Kaddib, Aniga waxaan qaatay mas'uuliyadda in go'aankaan gaarsiiyo cunugeyga.

Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha: _____ Taariikhda: _____

Saxiixa Ardayga: _____ Taariikhda: _____

Foomamka ka-bixidda ardayda ka yar toban iyo sideed (18) sanno waa in la soo raaciyo saxiixa waalidka iyo ardayga.

Tixraaca Siyaasadda Guddiga # 7540.03 La Baddalay 2/6/2012 CRT
Tixraaca Buugga Ardayga